


# SAYNIS FASALKA 8aad



WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBARINTA  
XAFIISKA MAAAHIJTA

JAMHUURIYADDA DINUQRAADIGA SOOMAALIYA  
WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA  
XAFIISKA MANAAHIJKA

**SAYNIS**

Ismail digital library  
[ismailpages.wordpress.com](http://ismailpages.wordpress.com)

P.F  
2534  
H.I  
829  
1975  
v.8

**Fasalka - 8aad**

**W. M. Q.**  
**Muqdisho 1980**

*RSCN*

*BBV 0078*

## HORDHAC

Buuggan waxa loogu talagalay fasallada siddeedaad ee dugsiyada asaasiga ah. Ardayda buuggan loogu talagalay waxay muddo wax ku baranayeen Af Soomaali, sidaas darteed ma filayno in wax dhibaato ah ay kala kulmaan barashadiisa.

Buuggu wuxu ka kooban yahay saddex qaybood : Kimiko, Danab iyo Muluug Baadh. Saddexda qaybood marba tii la doono aaya la hormarin karaa ee maaha qasab in sida ay buugga ugu yaalliin macallinku u raaco.

Xafiiska Manaahijtu wuxu mahad weyn u celinaya Maxamuud Axmed Caraale, Axmed Yoonis Habane iyo Daahir Beegsi oo buugga qoray iyo Xuseen Cabdilaahi Axmed oo buugga iskudubariday.

Xuseen Diiriye Jaamac  
Maamulaha Xafiiska Manaqahijta

## TUSMO

1. Maatar	Bogga	1
2. Danabka		81
3. Muluug Baadh		156

## M A A T A R

### GOGOLDHIG :

Hore ayaynu u soo sheegnay, maatarku waxa uu yahay. Waxaa kale oo aynu wax ka soo taataabannay tilmaamaha kala duwan ee maatarku leeyahay. Welise ma isweydiinnay :

Sidee ayuu maatarku u dhisan yahay, muxuuse ka dhisan yahay ?

Mase isweydiinnay oo ma derisnay waxa dhaca marka walxo maatar ah oo kala geddisani ay isla-falgalan. Mase baadhay qaybaha ay falgalyaalkaasi u kala baxaan.

Mase derisnay sidii falgalladaasi aynu ugu sifayn lahayn si qoraal ah oo kooban, si aan hadalku inoola tegin.

### DHISMAHA GUDAH EE MAATARKA:

Tusaale maatar aan qaadanno. Dhagax aan qaadanno Dhagax waa maatar.

Layli : Maxaad u oran kartaa dhagaxu waa maatar?

Dhagaxa waxa aad aragtaa, isaga oo malaasan. Muxuu ka dhisan yahay ? Qybo yaryar oo aasaas u ah, si gaar ahna isugu taga ayuu ka dhisan yahay dhagaxu, sida sartuba uga dhisan tahay laban ama jaajuur la isa saarsaaray. Mise dhagaxu kama dhisna qaybo yaryar oo aasaas ah ee inkasta oo aad sii kala googoysa weligaa gaari maysid qayb aad oran karto waa lebenkii uu dhagaxu ka dhisnaa.

Ka soo qaad inaad in dhagax ah dubbe ku dhufato oo aad dhagaxii qayb yaryar u kala jajabiso. Haddana qaybaha yaryar sii kala jabisid, haddaba, haddaad sidaa u waddid, ma waxaad gaaraysaa qaybo aad u yar oo aanad sii kala jabin karin oo aad sidaa awgeed, ugu tilmaami karto «Labankii» dhagaxu ka dhisnaa, mise waligaa qayb caynkaas ah gaari maysid eh, qayb yar oo waliba qayb ka sii yar bay ka samaysan tahay ?

### Maatarka :

Maatarka waxa lagu qeexaa, «wax allaale wixii

culays leh, dulaate madhanna buuxiya».

Maatarku wuxuu u jiri karaa saddex xaaladood oo kala ah :

1. Adke, waa walax iswada haysta oo adag, sida dhagaixa, buugga iwm;
2. Hoor: Waa walax dareerta oo haddii meel kala dheer lagu shubo shuubanta, sida biyaha, saliidda, caanaha iwm;
3. Neef : Waa walax aan la arki karin, laakiin, la dareemi karo sida hawada.

Waxaa kale oo jirta in isla walax keli ihi ay sadexdaa weji mid kastaba qaadan karto.

**Tusaale ahaan :** Barafku waa adke, hase yeeshiee, haddii la kululeeyo waxa uu isu geddiyaa biyo hoor ah, haddii la sii kululeeyo biyaha waxa ay noqdaan uumi aanad marka dambe arki karin sida neefta.

#### B) Curisyada iyo Iskudhiska :

Maatarku wuxuu u kala baxaa saddex qodob :

- I. Curiyaalka: Waa walxaha aan isbeddelin ee loo beddeli karin walxo ka samays sahlan.

**Tusaale ahaan :** Haydrojiinta, dahabka iyo maartu, waa curiyeyaal, waayo, walxahaas looma bedeli karo walxo ka samays sahlan. Taas macnaheedu waxa uu yahay, haydrojiintu kama samaysna wax aan haydrojiin ahayn. Dahabkuna wax aan dahab ahayn kama samaysna. Ilaa iyo maanta tirada curiyeyaal ka ee la yaqaan waa boqol iyo dhawr, hase ahaatee iyada oo sida ay isu raacaan iyo sida ay isugu darsamaanba badan tahay, ayaa curiyeyaal ka tiradoodu kooban tahay sameeyaan isku dhisyo aan la koobi karayn oo aad u fara badan.

**Iskudhisyada :**

Iskudhisayadu waa maxay? Iskudhisku waxa uu ka samaysmaa isbeddel kimikaad. Waa walaxda samaysanta marka laba curiye iyo wixii ka badani isku darsamaan. Waxaana iskudhisaydaas ka mid ah biyo, didib, shamac, sonkor, cusbo iwm. Giddigood iyo kuwo kale oo aan tiradooda la soo koobi karin waxa loo beddeli karaa walxo kale oo ka samays sahlan.

**Tusaale:** Biyaha waa laga bixin karaa labada curiye ee haydarojiin iyo ogsijiinta falgal ka dhex dhaca. Didibka waxa laga bixin karaa nuurad iyo karboon laba ogsaydh ( $\text{CO}_2$ ), haddaba, nuuradda iyo karboon laba ogsaydhku ma curiyayaal baa mise waa iskudhisyo ka samays sahlan didibkii ay ka yimaadeen? Markii tijaaboo-yin lagu sameeyey nuuradda iyo kaarboon laba ogsaydhka waxa la ogaaday in labaduba ay weli yihiiin iskudhisyo ka samays sahlan ka didibka. ah.

Haddii kala baxaa kiimikaad la sii wado waxa la ogaanayaa in nuuraddu ka samaysan tahay curiyeyaal la yiraa kaalsiyam iyo ogsijiin. Sidaa darteed, ayaa didibku uu yahay iskudhis ka samaysan curiyeyaalka kaalsiyam, kaarboon iyo ogsijiin.

Didibku wuxuu samaysmaa marka curiyeyaalkaasi si habboon isula falgalaan, sidaas oo kale ayaa iskudhisyada shamaca, sonkorta iyo qaar kale oo badaniba ay ka samaysan yihiiin curiyeyaal kala geddisan.

#### Koobnaan :

(a) Curiyaha «A» kalabax iyo kalabax la'aantiisu waa isku mid, mar walba waa «A».

Curiyaha «A» **kalabax** ————— curiye

(b) Iskudhiska «A» haddii la kalabixiyo waxa kabixi kara iskudhisyo ka samays sahlan' ama curiyeyal.

Iskudhiska «A» kalabax ————— iskudhisyo sahan  
ama curiyeaal

**Iskujir :**

Wixii aan ahayn curiye ama iskudhis wuxuu no-qon karaa iskujir. Iskujirku waa walxo badan oo isku jira walxahaas oo duleed ahaan isugu jira.

Haddaba, maxay iskudhiska iyo iskujirku ku kala duwan yihiin? Waa tii aynu aragnay in iskudhiska loo kala bixin karo curiyeaalka uu ka samaysnaa ama isku dhiisyo ka samays sahan, oo waa isbeddel kiimiko ah. Taas macnaheedu waxa uu yahay in waxaa samaysma oo ab iskudhis ama curiye cusub oo ka duwan kii hore dhinaca kiimikaad iyo dhinaca duleedba iskudhiskaas uu ka yimid ama curiyeaalka dhaliyey.


Haddii uu iskudhisku u taagan yahay isbeddel kii-miko ah, iskujirku muxuu u taaganyaahay? Marka walxo kala geddisan la isku daro, iskujirku samaysmaa ma aha wax cusub, astaamo cusubna ma laha ee astaamaha walxaha uu ka kooban yahay oo la isku daray ayuu lee-yahay. Taas waxay inoo muujinaysaa in iskujirku aanu ka samaysmin isbeddel kiimiko ah, waayo, wax isbeddel kiimikaad ahi kuma dhicin, ee waa isbeddel duleed uun.

**Tijaabo :** Iskujirku xadiid iyo Salfar :

**Saabaan :**

Qaddar xadiid budo ah, budo salfar ah, qaddar kaarboon laba salfaydh ah iyo birlab:

**DARIIQO :** In yar oo budo xadiid ah ku dar oo ku ridiq in yar oo budo salfar ah. Laba qaybood u kala qaybi. Labada qaybood midkood xaashi miiska dul saar oo kurshub. Qaybta kalena bakeeri ku shub.



Birlab soo qaado oo dabadeed labadeeda cirif mid-kood ku walaaq iskujirka xaashida ku jira. Maxaad arag-taa? Birlabtu ma ku soo dhegtay? Mise xadiidkay ku dhegtay mise salfarka? Mise iskujirka giddigiis? Si-dee bay u kala saari kartaa iskujirka xadiidka iyo salfarka?

Bakeeri ku shub qaddar kaarboon laba salfaydh ah oo mili kara qaddarka salfarka ah, dabadeed miir oo shaandhee. Hoorka miirtada dhaafa, ku ururi bakeeri kale. Markaa dabadeed, qun yar kaarbon iaba salfaydhka ka umi-bixi hoorka bakeeriga ku jira. Marka kaarboon iaba salfaydhu uu baxo, maxaa hadhay? Waa wiriqyo salfar ah. Tijaabadani waxa ay ina tusysaa in birlabtu ay xadiidka jiriirta ah oo keliya kala bixi karto Iskujirka xadiidka iyo salfarka ah, kaarboon laba salfaydhkuna salfarka mile uu u yahay. Taasi waxay ina tusysaa in astaamaha iskujirka xadiidka iyo salfarku aanay ahayn astaamo cusub ee ay yihiin astaamihii walxaha uu ka sa-

maysan yahay, mar haddii wax cusub aanay samaymin, waxa kale oo tijaabadu inoo caddeynaysaa inay hawl yar tahay oo si fudud loo kala saaro walxaha iskujirku ka samaysan yahay, sidaa darteed, waxay inoo caddaynaysaa in iskujirku yahay isbeddel duleed.

Maxal ku kala duwan yihiin iskujirka iyo iskudhisku ?

#### **ISKUJIRKA :**

1. Walaxda iskujirka ah waxa lagu kala saaraa hab duleed ah.
2. Iskujirka samayskiisu wuu kala geddisnaan karaa.
3. Had iyo goor waxa iskujirka daba socda oo ay ka mid yihiin kul baxaya, isbeddel mugeed, iwm. Ma jiraan.
4. Astaamaha iskujirka waa wadarta astaamaha walxaha uu ka samaysan yahay.

#### **ISKUDHISKA :**

1. Curiyeyaalka uu ka kooban yahay laguma kala sooci karo hababka duleed.
2. Iskudhiska samayskiisu waa si kaliya oo gaar ah.
3. Had iyo goor iskudhisyada waxa daba socda, kul baxaya, ama kul la nuugayo.
4. Astaamaha iskudhisku waa qaar gooni ah oo ka duwan kuwa walxaha uu ka samaysmay.

#### **L A Y L I :**

1. Qeex: Maatar, Adke, Hoor, iyo Neef.
2. Haddii curiyeyaal kala geddisani ay falgalaan oo

ay samaysmaan iskudhisyo kala geddisani, isbeddelkaasi ma mid kiimikaad baa mise waa mid duleed ? Waayo ?

3. Maxay ku kala duwan yihiiin isbeddelka kiimikaad iyo ka duleed ?
4. Waa maxay iskujirku? Muxuu kaga duwan yahay iskudhiska ?

### **ARAGTIDA ATAMKA EE DHALTON:**

Saynisyahankii la oran jiray Joon Dhaalton (1766-1844), ayaa si gaar ah isugu mashquulihey xeerarka samayska kiimikada, kuwaas oo keli ah iskuma uu koobin ee wuxuu fiirin jirey waxyaalo kale oo ku saabsan isbeddelka kiimikada.

Wuxuu Dhaltoon go'aan ku gaaray in maatarku ka samaysan yahay qurubyo yaryar oo aan la sii kala falliiri karin ama la sii jajabin karin. Qurubyada sidaas ah ee aan la sii jajabin karin buu u bixiyey Atam. Maatarka waa la falfalliiri karaa ilaa la gaaro falliirkha ugu haqan ee la yiraa Atam, kaas oo aan falliirmi karayn. Taas macnaheedu wuxuu yahay; haddii aynu dhismaha maatarka u eegno, dhisme guri oo laban ka samaysan, Atamku wuxuu maatarku ugu jiraa halka xabbadda labanka ahi guriga ugu jirto.

Sidaa darteed, qeexidda atamku waa: wax ama qurubka ugu yar ee maatarku ka dhisan yahay ee kana qayb qaata falgal kiimikaad ah. Haddaba Dhaalton afar qodob, buu u yeelay go'aankiisii, si uu macne saynis ah u yeesho waxayna kala yihiiin :

1. Dhammaan curiyeyaalku waxa ay ka samaysan yihiin qurubyo aad u yaryar oo la yiraahdo Atam.

Qodobkan oo hore aan u soo sheegnay wuxuu ad-kaynayaa curiyeyaalka, waayo iskudhiska iyo is-kujirku waa curiyeyaal isu tegey, curiyeyaalkuna waxay ka samaysan yihiin atamo.

2. Atam lama abuuri karo lamana baabi'in karo. Qodobkani waxa macnahiisu yahay in haddii tiro go'an oo atammo ah falgal dhexmaro, in aan falgal-kaasi waxna ridin, waxna ku kordhin oo sidoodii iska ahaanayaan. Intii atamyada ahayd ee falgal-ka ku jirtay ayuun baa maxsuulka falgalkana ku jirta. Qodobkani wuxuu la mid yahay xeerka wa-rida maatarka.
3. Curiye walba atammadiisu waa isku mid dhammaatood, sida Cufka, Culayska, Xajmiga. Isla markaa-na curiye walba atammadiisu way ka geddisan yi-hiin atammada curiyeyaalka kale. Atammada maartu (Cu) way ka geddisan yihjin atammada haydrojiinta (H) ama atammada dahabka (Au).
4. Marka atammadu falgalka ka qayb qaadanayaan waxa ay falgalkaas u galaan iyagoo tiro idil ah, waxayna sameeyaan qurubyo atamka ka waaweyn oo lagu magacaabo molokiyullo.

Molokiyulku waa tiro atammo ah oo isku xidh-may markii falgal kiimika ahi isku keenay. Afarta qodob ee aragtida Dhaalton waxa ay noqdeen mid guud ahaan loo ogAAD oo horukac sayniska u keentay.

#### **XEERARKA SAMAYSKA KIIMIKAAD:**

Dhaatlon hortiiba Saynisyahannadu waxa ay ogaa-yeen in marka laba walxood falgal ka dhex dhaco, uu fal-galkaasi raaco xeerar gaar ah oo aannu ka leexan karin, xeerarkaas waxa la yidhaa, xeerarka samayska kiimi-kada, waana sidan :

### (b) Xeerka Waaridda maatarka :

Xeerkanu wuxuu sheegayaa in marka falgal ka dhex dhaco labada walxood, wadarta Cufka labada walxood ee falgalay la mid tahay wadarta cufka maxsuulka falgalka.

Macnaheedu wuxuu yahay, falgalka naftisu ma abuuro cuf aan hore u jirin, mana baabi'yo cuf hore u jirey. Tusaale ahaan: Waxa la ogaaday markii la tijaabiyeey lagana baaraandegay in haddii la isku daro 2g. oo haydarojiin ah iyo 16g. oo ogsijiin ah, falgalna ka dhex dhaco, ay samaysmaan 18 gm oo biyo ah.

Haddii aad u fiirsato tusaalahan waxaad arki in wadarta cufka falgallada haydarojiin iyo ogsijiin oo ah 2 gm + 16 gm ay le'eg tahay cufka maxsuulka falgalka oo ah biyo cufkoodu yahay 18 gm. Sidaas aya falgalla da biyo oo dhammi ay raacaan xeerka warida maatarka oo wax cuf ahi falgalka kuma soo kordho kamana lumo.

### (t) XEERKA SAMAYSKA GO'AN:

Marka laba walxood falgal ka dhex dhaco, cuf go'an oo midkood ah ayuun baa mar kastaba la falgala cuf go'an oo midka kale ah. Macnaheedu wuxuu yahay, haddii aad tijaabo si qumman aad u samaysay ku heshid in b<sup>gm</sup>. oo walaxda «A» ahi marka ay la falgasho t<sup>gm</sup> oo walaxda «B» ah, ay samaysanto j<sup>gm</sup>. oo «C» ah.

Waxaad mar walba oo aad tijaabada samaysid arki doontaa in b<sup>gm</sup> oo walaxda «A» ah ay la falgasho t<sup>gm</sup> oo walaxda «B» ah si ay u samaysanto j<sup>gm</sup>. oo walaxda «C» ah. Koleyba b<sup>gm</sup> oo walaxda «A» ahi ma qaadato in ka yar ama ka badan t<sup>gm</sup> oo walaxda «B» ah mar haddii muxsuulka falgalku yahay isla walaxda «C». Xaddiga walaxda «C» ee sameysmaana kama yaraado kamana bato j<sup>gm</sup>.

Haddii aynu qaadanno tusaalihi haydarojiin iyo ogsijiinta, waxaad goor walba arki in 2<sub>g</sub> oo ogsijiin ahi ay la falgasho 16<sub>g</sub>, oo haydarojiin ah, si ay u samaysmaan 18<sub>g</sub> oo biyo ah. Kamana yaraan karaan kamana badnaan karaan xaddigaas.


Xeerka Waaridda maatarka iyo xeerka samayska go'an waxa ay ka mid yihin xeerarka lagu magacaabo (Xeerarka samayska kiimikada). Dhaalton isaga oo u fiirsanaya, xeerarkaas ayuu dejiyey aragtida ka jawaabaysay su'aalihi aynu hore isku soo weydiinnay.

### DHISMAHA ATAMKA :

Hore waxaynu u nidhi wixii miisaan leh ee dulalaati buuxin kara waxa la yiraahdaa maatar. Haddii aynu qeexdaa qaadanno, alaabada hareeraheenna taal oo dhami waxay noqonaysaa, maatar, kuraasid, qalmaanta, dhagxaanta, hawada, iyo biyaha. Guud ahaan, waxa la odhan karaa wixii dunida jiraaba waa maatar iyo tamar.

Tamartaa waxa ka mid ah kulka, ilayska, iyo danabka. Waxa hadda la ogaaday in la isu beddeli karo maatarka iyo tamarta, oo qayb maatar ah loo rogi karo tamar. Waxaa wax badan lagu fakaray waxa maatarku uu ka dhisan yahay ee salka u ah. Matalan, haddii aad soo qaaddid xabbad dhuxul ah, dhuxushaasi waxay leedahay miisaan, meelna waa ay buuxin kartaa, sidaa arteed, waa maatar, markaa maxay ka dhisan tahay ?

Haddii xabbaddaa dhuxusha ah, dubbe loo qaato oo la jejebiyo wa la helaa jabjab dhuxul, haddii jabjabkaas la sii jebjibiyana waxa weli la heli karaa jajab ka sii varyar, haso ahaatee weli waa dhuxul, oo weli lo astaa hii dhuxus.



Markaa waxa la odhan karaa haddii jejbintaa la sii wado waxa la gaari karaa qayb yar oo dhuxul ah oo xabbadda dhuxushu ka dhisan tahay. Muddo hadda laga joogo 2500 oo sano, ayaa filosuufar Giriig ah oo la oran jirey Dimokaraystas, wuxuu keenay ra'yi ah in maatarku uu ka dhisán yahay qaybo yaryar oo uu u bixiyey atammo. Atammadaas oo uu yidhi waa saxar aan la sii jejebin karin. Ereyga atam wuxuu afka Giriiggaa uu ku yahay ma qaybsame. Sidaa darteed, wuxuu yidhi maatarku waxa uu ka dhisan yahay saxarro yaryar oo la dhaho atammo oo aan la sii qaybin karin. Ra'yigaasi ma noqon mid tisqaada; ee wuxuu noqday mid la iska ilaaway.

Taariikhdu markii ay ahayd 1800 ayaa Dhaalton soo nooleeyey ra'yigii ahaa in maatarku uu ka dhisan yahay saxarro yaryar. Dhaalton waxa ra'yigaas ku dhalleyey tijaabooyin uu ku sameeyey neefo kala duwan. Nee-fahaas waxa ka mid ah haydarojiin, ogsijiin, iyo naytrotjiin. Wuxuu markaas yidhi neefuhu waxay ka dhisan yihiin saxarro yaryar, neef walibana waxay ka kooban tahay saxarro jaad gooni ah.

Saxarradaas yaryar wuxuu ku magacaabay atammo. Dhaalton ra'yigiisii kuma uu koobin neefaha ee wuu sii ballaadhiyey oo wuxuu jecdiyey in maatarka oo dhami ka dhisan yahay saxarro yarvar oo la yiraahdo atammo. Sidaas darteed, atammada haydarojiintu la mid ma

aha kuwa ogsijiinta, feeramka, dahabka, iwm. Intaas wuxuu ku daray in atamka aan la burburin karin lana samayn karin.

Dhowrkaa arrimood ee ku saabsan jiritaanka atamka ee Dhaalton uu soo bandhigay waxa lagu tilmaamaa aragtida atamka ee Dhaalton.

#### **ATAMKA SIDA AYNU MAANTA U ARAGNO:**

Maanta waxa la isku wada raacsan yahay ra'yigii Dhaalton ee ahaa in maatarku ka dhisan yahay saxarro oo la dhaho atammo iyo in atammq badan oo kalq duwani ay jiraan, sida atamka haydarojiinta, naatariyamka, naytarojiinta, iwm.

Hase ahaatee, waxa la ogaaday in ra'yigii Dhaalton ee ahaa in atamka aan la burburin karain aanu dhab ahayn. Waxa hadda jira qalab badan oo lagu jejebiyo atamka oo lagu kala furfuro saxarro ka sii yaryar oo uu ka dhisan yahay.

Haddaba, maxaa ina geliyey ray'yigaas ah in maatarku saxarro ka dhisan yahay, mar haddii aynaan arki karin saxarradaa ? Saynisyahanku marka uu baadi doon samaynayo ee uu rabo inuu arrin ka sal gaaro, wuxuu marka hore ururiyaa wixii war ah ee uu ka heli karo arrintaas uu baadhayo, dabadeedna warkaas uu helay ayuu ka gaaraa malo go'an.

Go'aankaas waxa lagu magacaabaa aragti. Arag-tidaas oo waxyaalihii uu arrintaas ku arkay iyo waxyaalo kaleba lagu fasiri karo. Matalan, macallinka ayaa wuxuu fasalka keenay kiish afka ka xiran oo alaaboo ku jirto, dabadeedna wuxuu idin weydiyey waxa ku jira kiihskaa gudihiisa. Waxa dhici karta in cof waliba uu wax ku taaro, isaga oo iska malaynaya. Hase ahaatee, malaha caynkaas ihi waa mid aan cilmi ku dhisnayn.


Waxaad samayn kartaa inaad kiishka dushiisa taq-

batid, oo aad hubsatid in shayga ku jiraa uu adag yahay ama jilicsan yahay. Wuxaad kale oo samayn kartaa in aad miisaantid kiishka, dabadeed marka aad ururisid arimahaas, waxa dhici karta inaad shaygii malayn kartid, adiga oo malahaas ku tiirinaya wararkii aad soo ururisay. Malaha caynkaas ah waxa la dhaha aragti.

Wxaynu qaybihii hore ku soo qaadannay in la rumeysan yahay in maatarku uu ka dhisan yahay saxarro. Haddaba, maxaa innagu dhaliyey ra'yigaas caynkaas ah ?

### Tijaabo :

Bakeeri quraarad biyo ah ka buuxi, dabadeedna ku rid fud sibaaq ah, dabadeedna dhab u fiiri waxa dha-ca. Sidee ayaa midabku ugu fiday biyihii ? Midabkii mi-yuu mar qudha si isle'eg biyihii u wada gaaray? Xaggee ayuu ku culus yahay? Marka aad fiirisid sida midabkii sibaaqu uu ugu fiday biyihii, ee uu hadba meel u gaaray, waxa la odhan karaa sibaaqu wuxuu ka dhisan yahay qaybo ama saxarro yaryar, kuwaas oo midabka wata.



Dabadeed markaa biyaha lagu rido, ayey si tartiib ah biyaha u dhexgalaan. Sidaa darteed, hadba meesha ay gaaraanna waxay qaadat� midabkii Sibaaqa. Waxa kale oo aynu halkaas ka arki karnaa in biyaha qudhoodu ay ka dhisan yihiin qaybo ama saxarro yaryar, oo sidaa darteed meelo bannaaan oo saxarrada u dhexeeyaa ay jiraan. Waayo, haddii kale qaybaha Sibaaqu ma dhexgeli karaan biyaha.

Arrimahaas iyo kuwo kale oo la mid ah ayaa innagu dhaliyey in maatarku uu ka dhisan yahay qaybo ama saxarro yaryar. Qaybahaas oo la yiraahdo atammo.

### ATAMKA GUDIHIISA :

Waxa aynu hore u soo sheegnay in atamka la burburin karin, oo loo sii kala furfuri karo saxarro ka sii yaryar, kuwaas oo ah aasaaska atamku ka dhisan yahay. Markii baadhis dheer iyo tijaabooyin badan la sameeyey, ayaa waxaa la ogaaday in atamku ka dhisan yahay saxarro la kala yiraahdo elektaroonno, borotoonno iyo niyuutaroonno.

Saxarradaasi waa kuwo aad iyo aad u naqan, xitaa weyneeyaha laguma arki karo. Astaammo kala duwan ayey saxarradaasi kala leeyihin, waxayna ku kala geddisan yihiin xagga culayska, mugga iyo danabka. Culayska saxarradaasi aad iyo aad ayuu u yar yahay. Sidaa darteed, waxaa lagu qoraa hab la yiraahdo Qormaha Sayniska. Culays borotoonku iyo niyuutaroonku waa isku mid in kastoo borotoonku wax aan micro lahayn uu ka weyn yahay. Elektaroonnadu way ka culays yar yihiin borotoonnada iyo niyuutaroonnada. Haddaba, marka culaysyada saxarradaas loo qoro Qormaha Sayniska waxay noqonayaan sidan oo kale :

## DANABEYN

## CUFKA

Elektaroon	Q.	$1086 \times 10^{-31}$ Kg.
Borotoon	I.	$6724 \times 10^{-27}$ Kg.
Niyutaroon	(0) eber	I. $6747 \times 10^{-27}$ Kg.

Elektaroonnadu wuxuu leeyihim danab tabane ah; borootoonnadu danab togane ah. Niyutaroonnadu ma laha wax danab ah. Sidaa darteed, waa dhexdhedaad. Atam walibaa wuxuu ka dhisan yahay elektaroonno, borootonna iyo niyutaroonno. Elektaroonnadu atam kasta ha ka dhiamandeen, waa isku wada mid astaamahooduna waa nla mid qudha. Taaz waxaa looga jeedaa elektaroonno ee atamka haydarojinta kii jirta iyo kuwa **atamka**. Taa'aa iyo qaybtaa iyo qaybtaa oo kale ay horo ee atamka oo kuwa iyo qaybtaa iyo qaybtaa kala duwan ee heemalka atamka oo kuwa iyo qaybtaa mid vibhiin.

## HEEMAALKA ATAMKA

Qaybtu hore waxaynu kaga hadalnay saxarrada aasaaska ah ee atamku ka dhisan yahay; kuwaas oo kala ah elektaroonnada, borootoonnada iyo niyutaroonnada. Haddaba, garannay in atamku uu ka dhisan yahay saxarradaasi ee sidee bay u sameeyaan atam dhan ?


Sidii hore aynu ugu soo sheegnay atamku aad ayuu u yar yahay, sidaa darteed, lama arki karo xataa haddii weyneeye la gargaarsado. Hase ahaatee, markii tijabooyin badan la sameeyey, ayaa waxa la qaataay heemaal lagu surteeyo dhismaha atamka.

Heemaalka atamku markaa wuxuu nqonayaa sidan

soo socota : Atamku wuxuu ka kooban yahay laba qaybood : Qayb Cufka Atamku ku urursan yahay oo sidaa darteed, culayska sal u ah, hase ahaatee, muggeedu uu yar yahay, iyo qayb ku wareegsan qaybta horë oo culayskeedu yar yahay marka loo eego qaybta hore, hase ahaatee, mug weyn. Qaybta hore waxa la yiraahdaa bu'da atamka, waxayna ka kooban tahay borotoonnada iyo niyuutaroonnada.

Kuwaas oo aad isugu shisan, xoog aad u laxaad weynina uu isu hayo. Qaybta kale ee atamku waxa weeye elektaroonno ku wareegsan bu'da, kuwaas oo u yeela xad mugga atamka. Sidii aynu hore ugu soo sheegnay elektaroonnadu waxay leeyihiin danab tabane ah; borotoonnaduna danab togane ah, waxana aynu ogsoonnahay in danabka kala duwari ay isa soo jiitaan. Sidaa darteed, elektaroonnada iyo borotoonnada ama bu'da atamku waa isa soo jiitaan.

Waxa laga yaabaa inaaad is-tiraahdid maxay elektaroonnadu atamka ugu duuli waayeen haddii ay ku wareegayaan bu'da. Taasi waxay u dhici weyday xooggaas is-jiidashada ee ka dhexeeya elektaroonnada iyo bu'da ayaa elektaroonnada ku haya marinka ay ku wareegayaan. Matalan, haddii aad dhagax xarig ku xidhid, dabbadeedna aad wareejisid, dhagaxu kama duulo gacanta inta aad xadhigga haysid, sababta oo ah xadhigga oo haya. Haddaba, sidaas oo kale ayaa xoogga is-jiidashada ee elektaroonnada iyo bu'duna uu u hayaa elektaroonnada,



Waxaynu nidhi elektaroonnadu waxay ku wareegaan bu'da atamka. Haddaba, waxa jirta inaan la malayn karin elektaroonnadaas oo aan la odhan karin elektaroonkii halkaa ayuu ammintaas marayaa. Sida aan loo malayn karin carrabada marawaxadda marka marawaxaddu wareegayso. Marawaxaddu marka ay wareegayso ma arki kartid carrab waliba meesha uu marayo ee waxa la moodaa wax is-wada haysta oo ciiro oo kale ah, daas oo kale ayaa elektaroonnada aan loo malayn karin.

Marka, waxa la yiraahdaa **Ciilo Elektaroonno** ah ayaa ku wareegsan bu'da atamka.

Atamku marka uu caadiga yahay ee aan la dharsin danab ma laha oo waa dhexdhexaad. Waxa dhici karta in arrintaasi ay kaa yaabiso, waayo, waxa aynu hore ugu soo sheegnay in atamku uu ka kooban yahay elektaroonno iyo borotoonno; elektaroonnada oo danab tabane ah leh iyo borotoonnada oo mid togane ah leh. Waxa had-daba, sabab u ah arrintaas tirada elektaroonnada iyo borotoonnada oo isle'eg; kuwaas oo markaas danabkoodu ay is-burriyaan dabadeedna atamkii ka dhiga dhexdhexaad. Sidii aad hore u soo baratay; atammada curiye-yaalka kala duwani waa ay kala geddisan yihiin, matalan, atamka kubramku lama jaad aha atamka naytarojiinta. Waxa la yaqaan hadda 104 atam oo kala geddisan.

Sagaashan iyo labo (92) ka mid ah waxa laga helaa dhulka, inta soo hadhayna waxa lagu saméeyey macmal-ka oo waxa la yiraahdaa waa macmal. Haddaba, inkasta oo atam waliba uu ka dhisan yahay elektaroonno, borotoonno iyc niyuutaroonno, waxa ay ku kala duwan yihiin; tirada elektaroonnada iyo borotoonnada ee ay ka dhisan yihiin; taas oo dhalisa inay markaas yeeshaan astaammo duleed iyo kuwo kiimikaad oo kala duwan. Atamka ugu sahlani waa atamka haydarojiinta, wuxuuna ka kooban yahay hal borootoon oo bu'da ku jirta, iyo hal elektaroon oo ku wareega. Isla markaas waxa jira atamka yuraani-yaamka oo ka kooban 92 borootoon iyo 92 elektaroon.

Tirada borotoonnada ee atamka waxa la yiraahdaa Tiro-atam; sidaa darteed, curiye waliba wuuxuu leeyahay tiro atam u gaar ah. Atamka haydarojiintu waa hal. Atamka yuraaniyamku wuxuu leeyahay 92 borotoon, sidaa darteed, tiro atamka yunaaniyamku waa 92. Tirada atamku waxay la mid tahay oo le'eg tahay tirada borotoonnada ama tirada elektaroonnada. Tiro atamka haydarojiin (H) waa 1, taa macnaheedu wuxuu yahay in hal (1) borotoon ku jirto bu'da atamka haydarojiin, hal (1) elektaroonna ku wareegayo.

Tiro-atam = tirada borotoonnada = tirada elekta-rooonnada. Dhinaca cufka atamka, hore waxaynu u soo sheegnay in cufka atamku ku urursan yahay bu'da, markaa cufka oo dhammi wuxuu la mid yahay wadarta tirada laba salaxaar ee bu'da atamka ku jira, kuwaas oo ah borotoonnada iyo niyutaroonnada. Cufka atamka haydarojiin waa hal, waayo, hal borotoon oo keliya ayey leedahay ee niyutaroonno ma laha.

Cufka haydarojiintu = hal borotoon + aber niyuu-

1 + 0

Cufka haydarojiinta = 1 guud ahaan. Cufka atamka = tirada borotoonka + tirada niyuutaroonka.

Curiyada	sum mad	tirada A.	curiyada
Haydarojiin	H		1
Hiliyam	He		2
Litiyam	Li		3
Beriliyam	Be		4
Booron	B		5
Karboon	C		6
Ogsijiin	O		7
Naytarajiin	N		8
Foloriin	F		9
Niyoon	Ne		10
Naatriyam	Na		11
Maaganisiyam	Mg		12
Alluminam	Al		13
Silikoon	Si		14
Fosfor	F		15
Salfar	S		16
Koloriin	Cl		17
Argon	A		18
Kaaliyam	K		19
Kaalsiyam	Ca		20
Sink	Zn		30
Meerkuri	Hg		80
Arjantam	Ag		47
Yuraaniyam	U		92
Kubram	Cu		29
Feeram	Fe		26
Maanganiis	Mn		25
Boromiin	Br		35
Beeriyam	Ba		56

## HABAYNTA ELEKTAROONNADA ATAMKA:

Sidii aynu hore u soo sheegnay atammadu waxay ka dhisan yihin saddexda saxar oo kala ah elektaroon, borooton, iyo niyuutaroon. Haddaba, elektaroonnadu waxay ku wareegaan, heer tamaro kala sarreeya oo meerisyooma leh. Heertamaradaasi mid waliba in gooni ah ayey u jirtaa bu'da, heer-tamar waliba waxay leedahay tamar u gaar ah oo ka duwan ta kale iyo tiro elektaroonno ah oo heer-tamartu ay qaadi karto.

Marka heer-tamartu buuxsanto oo intii u go'nayd ee elektaroonnada ahayd gasho, elektaroonnada soo haddhaa waxay isku habeeyaan heer-tamarta ku xigta. Marka tiro atamku kordhaba heer-tamartuna way kordhaan, waxayna ka bilaabmaan heerkal ugu dhow ee ugu xigta ama ta labaad, haddana ta xigta. Taas macnaheedu waxay tahay in tiro idil lagu tiriyo heertamarta atamka. Heer-tamarta kowaad laba elektaroon ayey had iyo jeer qaaddaa, atamka haydarojiinta mooyaane.


Heer-tamarta labaad inta ugu badan ee ay qaadi kartaa waa siddeed elektaroon, ta saddexaadna waxay qaaddaa siddeed iyo tobani elektaroon marka ay ugu badan tahay. Taas macnaheedu ma aha tirada elektaroonnadaasu kama yaraan karaan ee weyna ka badnaan karin. Marka guud ahaan heer-tamar waliba waxay qaadi kartaa  $2^n$  elektaroon, waa marka (n) u taagan tahay tiro idil oo ah heer-tamarta. Marka atammadu isla falgalaan heer-tamarta ugu sarreysaa waxay door biddaa inay ku jiraan siddeed elektaroon. Waxa gaar ah heer-tamarta bu'da u xigta oo laba qaadata, sida haydarojiinta marka ay u sarrayso.

**Tusaale:** Bal hadda aan isku dayno sida elektaroonnadu isugu habeeyaan heertamarta atamka. Aan

ugu horrayno atamka ugu fudud ee ugu sahlan, oo ah ka haydarojiinta. Haydarojiinta tiro atamkeedu waa hal, markaa hal elektaroon ayey leedahay iyo hal borotoon oo dhexdhedaadsha halka elektaroon. Markaa halka elektaroon wuxuu ku wareegayaa heer-tamarta gudaha ee ugu xigta haydarojiinta. Sidaas buu u dhisan yahay. Bal hadda aan qaadno atamka ku xiga haydarojiinta oo ah hiliyam (He). Hiliyam waxay leedahay tiro-atam ah laba.

Macnaheedu wuxuu yahay laba elektaroon oo dhexdhedaadsha laha bu' borotoon oo bu'da hiliyamka ku jira. Labada elektaroon ee hiliyamku waxay galaan heer-tamarta kowaad. Heer-tamartaasi way buuksantay oo wax kale ma qaadi karto. Atamka saddexaad oo ah Litiyam (Li) wuxuu leeyahay tiro-atam ah saddex, taas oo macnaheedu yahay saddex elektaroon oo dhexdhedaadsha saddex borotoon. Saddexda elektaroon laba ka mid ahi waxay buuxiyaan heer-tamarta kowaad. halka elektaroon ee soo hadhayna wuxuu galaa heer-tamarta labaad, ilayn heer-tamarta labaad ilaa inta laga gaaro atamka niyon (Ne), halkas oo heertamarta labaad ku buuksamayso, oo siddeedhii elektaroon wada galaan heer-tamartaas. Markaa dabadeed, waxa bilaabma buuxinta heer-tamarta saddexaad ilaa inta laga gaarayo siddeed iyo toban elektaroon oo ay ku buuksamayso. Sidaas baa heer-tamarta elektaroonnada ee atamku u dhisan yihiin.

Si loo soo gaabsho marka la qorayo buuxinta heer-tamarrada waxa loo qoraa sida tusha aad ku aragtid.




Curiye	Tiro-atam	Elektaroonnada	habeynta
Haydarojiin	1	1	1
Hiliyam	2	2	2
Litiyam	3	3	2,1
Beriliyam	4	4	2,2
Booroon	5	5	2,3
Karoon	6	6	2,4
Naatarojiin	7	7	2,5
Ogsjiin	8	8	2,6
Foloriin	9	9	2,7
Niyoon	10	10	2,8

### Tusaale :

Haddii aan is-nidhaahno sameeya habaynta elektaafoonnda atamka koloriin oo tiro atamkeedu yahay 17, waxa aynu raacaynaa jidkii aynu haysannay ee ahaa ( $2n^2$ ) oo (n) tahay tiro idil oo ah sidan : Heertamarta ko-waad oo laba elektaroon leh, heertamarta labaad oo sid-deed elektaafoon leh heertamarka saddexaad oo toddoba elektratoon leh.

Habeynta  
elektaroonada  
atamka Kaloriin




## AYOONNADA :

Elektaroonnadu waxay leeyihiin danab tabane ah, borotoonnaduna danab togane ah. Sida aad haatan taqaan, atamku wuxuu ka dhisan yahay elektaroonno, boro-toonno iyo niyuutaroonno. Niyuutaroonnadu ma laha danab oo waa dhexdhexas. Waxa haddaba jirta marka atamka uu caadiga yahay inay isle'eg yihiiin tirada elektaroonnada iyo borotoonnada. Taasi waxay ka dhigantaa atamkii mid aan danab lahayn oo dhexdhexas ah. Waayo, danabka tabanaha ah ee elektaroonnada iyo danabka toga-naha ah ee borotoonnada ayaa isle'eg, dabadeedna isbur-riya.

Haddaba, waxa dhacda marmarka qaarkood in atamkii uu qaato elekaroonno dheeraad ah ama ay kuwii-sii qaar ka lumaan. Taasi waxay dhalisaa inay kala ba-taan tiradii elektaroonnada iyo borotoonnadu oo uu dha-co dheelli danab. Sidaas darteedna, atamkii wuxuu yee-shaa danab. Atamka danabaysan waxa la yidhaahdaa ayoon, atamka elektaroonnadiisa qaar ka lumaan ee yee-

sha danab togane ah waxa la yidhaahdaa ayoon togane ah, atamka ay ku soo kordheen elektaroonno dheeraad ah ee yeesha danab taban, waxa la yidhaahdaa ayoon tabane ah.

(Sawirro tusaya atammo noqday ayoon oo ama elektaroonno dheeraad ah yeeshay ama ay qaar ka luu-meen).



## ATAMMADA IYO FALGALKA KIIMIKAAD :

Waxaynu hareeraheenna ku aragnaa walxo kala duwan, kuwaas oo qaarkood aynu cabno, neefsanno, kuwana aynu waxyaabo kala duwan ku qabsanno. Bal hadda isku day inaad walxaha kala duwan aad magacaabi-kartid. Walxaha waxa ka mid an biyaha, caanaha, ogsijiinta, birta, waraaqaha iyo kuwo kale oo badan.

Hase ahaatee, haddii aad u fiirsatid waxaad arkaysaa in isbeddello kala duwan i ay ku dhacayaan. Biyuhu mar waxay isu rogaan uumi oo waxay galaan hawada, haddana dib ayey ugu soo noqdaan biyahoodii, mar marka qaarkood waxay noqdaan baraf oo adke aacyo noqdaan.

Xadiidku marka uiu kululaado wuu fidaa, haddii la sii kululeeyana wuu caddaadaa oo midabkiisii ayaa beddelma. Hase ahaatee, haddii la qaboojiyo oo laga qaado kulkii sidiisii hore ayuu ku soo noqdaa. Isbeddellada caynkaas ah ee markaa wixii dhalinayey meeshii laga qaado, sida kulkii, uu shaygii sidiisii hore ku noqdo waxa la yidhaahdaa isbeddel duleed.

Waxa haddaba jira isbeddello kuwaas ka duwan. Wax badan ayaad aragtay caano dhay ah oo inta meel la dhigay dhanaanaaday, ama xadiid mirdhay ama xaashi gubatay oo dambas noqotay. Alaabadaas midna sideedii hore laguma celin, karo. Isbeddellada caynkaas ah ee alaabadii ay caynad doorsantay waxa ka dhasay isbeddel kiimikaad. Wuxaan dhaliya falgal ka dhex dhaca walxaha. Matalan, marka xadiidku mirdho, xadiidkii waxa la falgala ogsijiinta, iyo uumiga biyaha ee hawada ku jira.



---

Haddaba, isbeddelkaas dhaca marka walxo isla falgalaan waxa sal u ah oo ka qayb qaata atammada. Wa-



xaynu ka soo hadallay siday atammadu danab u yeeshaan marka ay elektaroonno ka lumaan ama ay ku soo kordhaan. Wawa haddaba, dhacda marka ay atammo kala duwani ay kulmaan, in atammadaas, qaar si hawl yar ugu lumaan elektaroonnada heertamarta ugu sarreysa ku jira qaarkood. Kuwana ay ka qaataan elektaroonnadaas. Halkaas ayaa waxa ka dhasha ayoon tabane ah iyo kuwo togane ah.

Waxa aynu ognahay in danabka kala duwani ay isa soo jiitaan. Haddaba, ayoonnadii kala duwanaa ayaa isa soo jiita oo isla xidhiidha. Sida, awrka marka la dabro ee uu xadhiggu isku xidho labadiisa addin, ayaa xooggaa isjiidashaduna uu isugu xidhaa labada ayoon. Dabadeedna waxa meeshii ka dhasha iskudhis. Iskudhiskaas oo leh astaammo ka geddisan kuwii atammada uu ka koobnaa. Matalan, naatriyam waa bir cad, koloriintuna waa neef hurdi ah oo sun ah; haddaba, marka naatriyam, biyo iyo koloriin kulmaan, atamkii naatriyamka waxa ka luma hal elektaroon oo ku jira heertamarta ugu sarreeya.


Elektaroonnadaas waxa qaata atammada koloriinta, sidaa darteed, waxa meeshii ka dhasha ayoonno toga-ne ah oo kuwii naatriyamka ah, iyo ayoonno tabane oo kuwii koloriinta ah. Sidii aynu hore u soo sheegnay wa-xa markaas isla xidhiidha ayoonnadii naatriyamka iyo kuwii koloriinta, dabadeedna waxa samaysma iskudhis la yidhaahdo Naatriyam Koloraydh oo aynu u naqaan cus-bo. Cusbadaas oo aynu cuntada ku darsanno si weynna uga geddisan koloriintii neefta sunta ahayd iyo Naatriyamkii birta ahaa.



Hal elektaroon  
buu bixiyaa



### Guud ahaan :



Ayoon naatriyam ah + Ayoon koloriin ah

Samaysanka hal molokiyuul oo cusbada naatriyam koloraydh (NaCl), kana timid naatriyam iyo koloriin ah oo isla falgalay.

### Layli :

- 1) Qeex atamka ?

- 2) Waa maxay qaybaha atamku?
- 3) Intee elektaroon baa ku jira atam tiro atamkiisu yahay 20 ?
- 4) Intee Niyuutaroon baa ku jirta atam tiro atamkiisu yahay 19, haddii cufka atamku yahay 39 ?
- 5) Sawir sida elektaroonnadu isugu habeeyaan heertamarta atam tiro atamkiisu yahay 11 ?
- 6) Waa maxay ayoonku ?
- 7) Ayoon ahaan u qor falgalka ka dhex dhaca birta kaa-liyam (K) iyo bir-ma ahe koloriin ?

### **BUUXI MEELAHA BANNAAN :**

- 1) \_\_\_\_\_ Waa saxarka aan danab lahayn.
- 2) \_\_\_\_\_ Wuxuu leeyahay wadarta tirada elektaroonnada.
- 3) \_\_\_\_\_ Heertamarka koowaad waa heertamarka ugu xiga atamka.
- 4) \_\_\_\_\_ Heertamarka elektaroonnada atamku way weyn yihiiin.

#### **Atamka iyo Malikiyuulka:**

Waxa aynu hore u soo sheegnay in atamku uu yahay qurubka ugu yar ee maatarka. Waxa kale oo aynu nidhi in atamku uu falgal kiimikaad ka qayb geli karo oo markaana samaysmo molikiyuul, sidaa darteed, qee'ida atamku waa «Waxa ama qurubka ugu yar ee maatar» ka dhisan yahay ee kana qayb qaata falgal kiimika.

Inkasta oo atamku aad uu u yar yahay, ~~ba dana curiye walba atamkiisu wuxuu leeyahay culays~~  
Maatarka culayskiisu waa culayska atammada uu k.

ban yahay. Curiye walba culays gooni ah oo gaar ah a, leeyahay oo ka duwan culayska curiye kale, waayo, atam-madooda ayaa kala duwan.

### Molikiyuul:

Waxa aynu hore u aragnay oo aynu soo sheegnay in molikiyuulku ka duwan yahay oo ka weyn yahay atam-ka. Molikiyuulku: Waa laba atam iyo wixii ka badan oo kiimik ahaan isugu xidhan. Hase yeeshi, laba molikiyuul baa jira.

- b) Molikiyuul curiyaha  $H_2$ ,  $N_2$ ,  $Cl_2$ .
- t) Molikiyuulka iskudhisca ( $H_2O$ ) biyo oo kale. Mar-ka maxay ku kala duwan yihiiin ?


Molikiyuul walba waxa tilmaamihiisu ku xidhan yihiiin:

- b) Inta atam ee molikiyuulku ka samaysan yahay, ma labaa, saddexbaa, afar baa.....?
- t) Atammada molikiyuulku nooca ay yihiiin ama curiyaha atammadaasi yihiiin.

Curiyeyaalka laguma samayn karo wax ka samays-sahlan, iskudhiskase curiyeyaal kala duwan baa läga sa-meyn karaa. Haddaba, molikiyuulka curiyaha sida ( $N_2 O_2$ ,  $Cl_2$ ) waxa uu ka samaysan yahay atammo isku wa-da mid ah xagga culayska, jimidhka, iyo dhiska. Sida aragtida Dhaaltanba sheegayso, hase yeeshi, molikiyuul-ka iskudhisku wuxuu ka samaysan yahay atammo kala nooc ah, sida biyaha oo molikiyuulkoodu ka samaysan yahay laba atam oo haydarojiin ah iyo hal atam oo ogsi-jin ah.

Ogsijiinta iyo haydarojiinta waa laba curiye oo ka-la duwan.

## Suwalaahaan u fiirso :




b)

Molikiyuul iskudhis ah oo ka samay afar atam oo kala cayn ah, laba nooca A yihiin, labana nooca B.

Waxa samaysmay laba curiye oo kala iaad ah, A iyo B.

Sidaa awgeed, curiyeyaalka lagama samayn karo waxa ka samays sahlan.



a)

Molikiyuul curiye (A)  
oo ka samaysan laba  
atam oo isku cayn ah  
sida (H , O , N ).  
2 2 2

Labadii atam ee Labadii atam oo isugu  
curiye (A) oo xirmey oo sameeyey  
kala baxay curiye (A)

Sidaa awgeed, iskudhiska waxaa laga sameyey i  
raa curiye ka samays fudud.

## **Summadda Kiimikaad :**

Waxa aynu ogaannay in boqol iyo dhawr curiye oo kala duwani jiraan. Curiye waliba magac loo yaqaan ayuu leeyahay. Ilaa iyo hadda waxa tusaalooyin innagu soo maray dhawr curiye, waxaana ka mid ah haydarojiinta, ogsijiinta, maarta, jaandiga iyo qaar kale oo badan.

Haddii marka loo baahdo in curiye walba la qoro magaciisa oo dhan dhibaato ayey ahaan lahayd, sidaa awgeed, waxa la gartay curiye walba in loo sameeyo astaan u gaar ah oo magaciisa u taagan.

Summadda sidaas ah ee curiyeyaalka kiimikada ah u taagan ayaa la yidhaa summadda kiimikada ee curiyeyaalka. Curiyeyaalka summaddooda kiimikada qaar waa xaraf keliya, qaarna waa laba xaraf. Marka la rabo in magaca curiyaha la qorana waxaa ku filan oo la qoraa summadda oo xaraf ama laba xaraf ah. Haddii summaddu xaraf ka kooban thay, xarafka far waaweyn baa lagu qoraa. Haddii summaddu laba xaraf tahayna, xarafka hore far waaweyn baa lagu qoraa, xarafka labaadna far yaryar. Summadda kiimikada ahi uma taagna magaca curiye oo kaliya ee waxa kale oo ay tilmaantaa hal atam oo curiyahaas ah.

## **Tusaale :**

Hoos waxaa ku taxan curiyeyaalka aan maalin walba la kulanno maacyadooda iyo mid walba summaddiisii kiimikaad oo ku hor qoran.

Curiye	Summad	Curiye	Summad
Haydarojiin	H	Ayodhiin	I
Ogsijiin	O	Nikal	Ni
Naytarojiin	N	Feeram	Fe
Kaarboon	C	Meerkuri	Hg
Naatriyam	Na	Istaanas	Sn
Magniisiyam	Mg	Liitiyam	Li
Aluumiyam	Al	Beeriyam	Ba
Fosfoor	P	Kaalsiyam	Ca
Salfar	S	Manganiis	Mn
Koloriin	Cl		
Arjantam	Ag		
Ooram (Dahab)	Au		
Sink	Zn		
Balambam (naxaas)	Pb		
Boroomiin	Br		

Sidaas oo kale ayaa curiye waliba summaddiisa gaarka ah u leeyahay.

### Xusuus :

Magaca curiyuhu wuxuu u qormaa waxa afka laatiinka ku yahay oo loogu dhawaaqo loona higgaadiyo si af-Soomaali ah. Tusaale ahaan. Ooran — Dahab (Au) Kubram — Maar (Cu). Arjantam — Lacag (Ag) Haydarojiin (H), Ogsijiinta (O) Kaarboon (C) iwm.

### Tusaale :

Maxaynu u jeednaa marka aynu qoraync astaanta kiimikada ee ah O ? Waxa aynu u jeednaa laba macnood:

- 1) Magaca curiyaha la yidhaahda ogsijiinta oo la soo gaabiyey.

2) Hal atam oo curiyaha ogsijiinta ah. Macnaha labaad baa had iyo jeer loo isticmaalaa oo haddii la qoro 20, waxa aynu u jeednaa waa laba atam oo ogsijiinta ah, 30 waa saddex atam oo ogsijiin ah, iwm, summadda kiimikada ee curiye walibana macnahaas oo kale ayey leedahay.

### Layli :

1. Curiyeaalka magacyadoodu hoos ku taxan yihiin, mid waiba summaddiisa ku qor. Haydarojiin, Kaarboon, Ooram, Naxaas, Kubram, Koloriin, Foosfoor, Feeram, Lacag, Salfar, Magniisiyam, Manganiis, Naatriyam, Ayoodhun, Alusniniyam.

2. Summadda kiimikada ee hoos ku qoran, mid walba magaca curiyaha ay ka taagan tahay ku hor qor :

P. S. Al, Fe, Au, I, Cl, C, O, N, Na, Ni, Ca, Ba, Mg.

3. Maxaa loola jeedaa summadda kiimikaad ee C? Naanaysaha Kiimikada :

Waa ti aynu soo sheegnay in summadda kiimikada ee curiyuh ka taantah yahay calaamad tilmaamaysa hal atam oo curiyahaas ah. Haddaba, maxaa calaamad u ah oo lagu tilmaamaa molikiyuulka ?

Waxaynu hore u soo sheegnay in molikiyuulku yahay tammo isku xidhan, haddii aynu damaeq in aynu tilmiyanne hal molikiyuul waxa aynu u baahannahay in aynu ogaanto oo sheegno :

1. Curiyeaalka uu ka samaysan yahay molokiyulladaasi oo ah ammadaha curiyeaalka molokiyuulka oo aynu sheegno.

2. Inta atam oo curiyeaalkaas molokiyuulka ku nra

## **Qeexid :**

Naanaysta kiimikadu waxa weeye calaamad u taagan hal molikiyuul oo inuujinaysa curiyeyaalka iyo inta atam ee curiyeyaalkas ah ee ku jirta molikiyuulka.

Naanaysta kiimikaad waxay ka kooban tahay xuruuf iyo lambarrac. Xuruufta waa summadaha kiimikaad ee curiyeyaalka, lambarraduna waxa ay ku qoran yihiin summadaha kiimikaad hoostooda oo dhinaca midig ah.

Lambarka sidaas ugu hoos qorani wuxuu sheegaya inta atam ee curiye kaga jirta hal molikiyuul oo walaaxda laga haayo ah.

## **Tusaale :**

$H_2O$  waa naanays kiimikaad oo aad u macruuf ah. Waxay tilmaantaa hal molikiyuul oo biyo ah. Laba summadood oo keli ah ayaa ka muuqda naanaysta kiimikaad ee biyaha, waana H, oo ah summadda kiimikaad ee curiyaha haydarojiin iyo O oo ah summadda kiimikaad ee Ogsijiin. Taasi waxa ay inoo sheegaysaa in biyuhu ay yihiin:

1) Iskudhis ka samaysan curiyeyaalka haydarojiin, iyo ogsijiin, mar haddii laba atam iyo wixii ka badan oo kala duwan oo curiyeyaal kala gooni ah ka kala yimid ay isugayni ka dhex dhaeday.

2) In biyuhu ka samaysan yihiin curiyeyaalka haydarojiin, iyo ogsijiin oo keli ah, ama waxa la odhan karaa biyuhu waxay samaysmaan marka haydarojiinta iyo ogsijiinta falgal ka dhex dhaco.

3) In molikiyuulka biyaha ahi uu ka dhisan yahay hal atam oo curiyaha ogsijiin ah iyo laba atam oo curiyaha haydarojiin ah, oo kiimik ahaan isugu xidhan.

Sidaas aynu u tilmaannay molikiyuulka biyaha ayaa naanays waliba oo kiimika ahi u tilmaaman tahay

Iskudhiska oo keli ahi, kama samaysmo molikiyuullo, cu-riyeyaalka qudhoodu waxay ka samaysan yihiin molikiyuullo. Sidaa awgeed, ayaa curiyeyaalkuna u leeyihiin naanays kiimikaad sida iskudhiiskuba u leeyahay.

Haddii lambar xagga hore laga raaciyo naanaysta kiimikada sida  $2H_2O$  waxa lambarkaasu sheegayaa inta molikiyuul ee waxaas u yahay. Lambarkaas waxa lagu magacaabaa weheliye lambarka hoose ee xagga midig ee summadda curiyeyaalka ku qoranna wuxuu sheegaa inta atam ee curiyeyaalkas kaga jira molikiyuulka waxaana la yidhaahdaa hoos-gale:

### L a y l i :

1. Maxay ku kala duwan yihiin molikiyuulka curiyaha iyo kan iskudhisku ?
2. Macnet naanaysaha kiimikaad ee hoos ku qoran si-dii aynu u macnaynay molikiyuulkii biyaha ( $H_2O$ ).  
 $CO_2$ ,  $MnCl_2$ ,  $N_2$ ,  $O_4$ ,  $O_2$ ,  $P_4$ ,  $S_8$ ,  $Cl_2$ , He,  $H_2$ ,  $SO_4$ ,  $PO_4$ ,  $P_2$ .
3. Waxa hoos ku qoran naanaysahooda kiimikaad qor?
  - b) Curiyaha Ogsijiin oo molikiyuulkiisu laba atam ka samaysan yahay.
  - t) Curiyaha Salfar, oo moyikiyuulkiisu saddex atam ka samaysan yahay.
  - j) Curiyaha Fosfer oo molikiyuulkiisu afar atam ya-hay.
  - x) Iskudhiska molikiyuulkiisu ka samaysan yahay la-ba atam oo haydarojiin ah mid kaarboon ah, iyo saddex ogsijiin.
  - kh) Iskudhiska molikiyuulkiisu ka samaysan yahay la-ba atam oo kaarboon ah iyo toddoba haydarojiin ah, iyo mid ogsijiin ah.

## FALGALKA KIIMIKAAD:

Haddii laba walxood iyo wixii ka badan la isku daro, ama isgaaraan, waxa suurtowda inay badanaaba isla falgalalaan. Haddii falgalkaasi uu sameeyo walax cusub oo dabadeed isbeddel kiimikaad dhaco, waxa la yidhaahdaa falgal kiimikaad ayaa dhex maray ama ku dhex dhacay walxihi.

### Qeexid :

Falgal kiimikaad waa marka laba walxood iyo wixii ka badani isla falgalalaan oo walxo ama walax cusub oo ka timid isbeddel kiimikaad samaysmeen ama samaysantay. Tusaale ahaan:

Marka haydarojiinta iyo ogsijiinta isla falgalalaan oo isku darsamaan dabadeedna ay sameeyaan biyo, waxa ka dhex dhaca haydarojiinta iyo ogsijiinta falgal kiimikaad. Hore waxa aynu u soo qaadannay isbeddelka duleed iyo isbeddelka kiimikaad waxa ay yihiin iyo waxa ay ku kala duwan yihiin.

### Isle'eg kiimikaad:

Haddii aynu rabno in aynu tilmaanno falgal kiimikaad, waa inaynu sheegnaa waxa dhaca oo dhan, oo sidatan ah :


1. Falgalayaasha falgalka ka qayb qaata.
2. Maxsuulka falgalka ama waxa cusub ee samaysma marka falgalku dhaco.
3. Inta molikiyuul ee falgale walba uga qayb gasha falgalka.

4. Inta molikiyuul ee maxsuulka falgalku yahay iwm.

Haddaba, intaás oo dhañ haddii aynu weedho ku sheegno aad baa hadalku inoola dheeraanayaa, sidaa awgeed, waxaa la sameeyey oo la qaataay hab gaaban oo si buuxda loogu tilmaamo waxa dhaca märka walxaha fagal kiimikaad ka dhex dhaco. Habkaas baa la yidhaadhaa isle'eg kiimikaad.

**Q e e x i d :**

Isle'eg kiimikaad waa hab isticmaalaya naanaysaha falgalayaalka iyo maxsuulka falgalka oo si gaaban loogu tilmaamo fagal kiimikaad oo dhaca. Marka isle'egta kiimikaad la dhigayo, waxa marka hore dhinaca bidix lagu qoraa naanaysyada falgalyaalka oo laba walba u dhexeyso calaamadda (+), dabadeedna waxa isla sadarkaas lagu xigsiiyaa calaamadda (=) ama (—). Calaamadda dabadeed waxaa la qoraa naanaysyada maxsuulka falgalka oo labadiiba ay u dhexeyso calaamad (+) sida:



ama



ama



Xuruuftu waxa ay u taagan yihin naanayso, isle'eg kiimikaad ayaana ka soo baxaya.

**Tusaale :**



Haydarojiin iyo Ogsijiin Biyo

Falgallada Maxsuulka

Waa in aad tirisaa curiye walba inta atam ee kaga jira dhinaca bidix iyo dhinaca midig ee isle'egta. Haddii curiye walba ay isle'eg yihiin tirada atammada ee kaga jirta dhinaca bidix iyo midigba ee isle'egta, waxa isle'egtaa la yidhaahdaa isle'eg miisaaman. Haddii aanay atammada curiyeyaalku isle'ekayn waxaa la yidhaahdaa isle'eg aan miisaaneyn.

Haddii aad dhinaca bidix inta atam ee haydarojiin ah eegto waa laba. Dhinaca midigtana laba atam oo haydarojiin ah ayaa ku jira, sidaa awgeed, haydarojiintu waa ay miisaaman tahay. Ogsijiinta eeg. Dhinaca bidix laba atam oo ogsijiin ah ayaa ku jirta, dhinaca midigse mid keli ah. Markaas ogsijiintu ma miisaanna. Mar haddii curiyeyaalka ilse'egta ku jira aanay wada miisaanayn isle'egtani ma miisaanna.



Isle'egtani ma mid miisaaman baa mise waa mid aan miisaaneyn ? Waayo ?

### Maxaa loo miisaamaa isle'egta aan miisaaneyn?

Sida xeerka waarida maatarku inna leeyahay ama Dhaaltanba uu sheegay, atammada lama abuuri karo, lamaan baabi'in karo.

Mar haddii aynu isle'egta kiimikaad ka rabno in ay noqot tilmaan run ah oo falgal kiimikaad ah, waa in ay ka muuqataa in aan falgalku abuuri karin baabi'in karin na wax atam ah.

Sidaa awgeed, waa in isle'egta kiimikaad tilmaan buuxda bixisaa oo muujisaa, in curiye walba tirada atam

mada ee ku jira dhinaca falgalayaasha iyo maxsuulka ay isle'eg yihiin. Sidaas awgeed, ayaa lagama maarmaan ay u tahay in isle'egtii aan miisaaneyn la miisaamo si ay u noqoto falgal.kiimikaad oo run ah.

### **Sidee loo miisaamaa isle'egta aan miisaaneyn?**

Si loo miisaamo isle'egta waxa horta la tiriya eu-riye walba inta atam ee kaga jirta dhinaca falgalayaalka iyo dhinaca maxsuulka falgalka. Dabadeedna waa in ti-ro horgale ah la raaciyya naanaysyada kiimikaad ee hab-boon inay miisaaman, ilaa ay isle'eg keenayaan tirada atammada ee curiye walba kaga jira labada dhinac ee isle'egta.

#### **Tusaale :**



Hadda ayuu isle'ekaan kiimikaad miisaaman ya-hay. Sidaas oo kale ayaa isle'eg kiimikaad oo aan miisa-neyn loo miisaamaa.

### **Sidee loo tarjumaa isle'egta kiimikaad :**


Isle'egta kiimikaad ee aan miisaanayni war kooban ayuu bay sheegi kartaa.

#### **Tusaale :**



Isle'eggan kiimikaad ee aan miisaaneyni waxa uu leeyahay marka haydarojiin iyo ogsijiin falgal ka dhex dhaco, waxa samaysma biyo. Isle'egga kiimikaad ee mii-saamani war buuxa ayuu innaga siiyaa falgalka uu til-maamayo.

## Tusaale ahaan :



Isle'eggan kiimikaad ee miisaamani waxa uu leeyahay: marka haydarojiin iyo ogsijiin uu dhex maro falgal ee ay biyo sameeyaan, laba molikiyuul oo ogsijiin ah, si ay u sameeyaan laba molikiyuul oo biyo ah.

## Layli:

Miišaan isle'egyada kiimikaad ee soo socda:

1. C + O<sub>2</sub> \_\_\_\_\_ CO<sub>2</sub>.
2. N<sub>2</sub> + H<sub>2</sub> \_\_\_\_\_ NH<sub>3</sub>.
3. Na + O<sub>2</sub> \_\_\_\_\_ Na<sub>2</sub>O.
4. S<sub>8</sub> + O<sub>2</sub> \_\_\_\_\_ SO<sub>2</sub>.
5. Fe + S<sub>8</sub> \_\_\_\_\_ FeS.
6. Na + O<sub>2</sub> \_\_\_\_\_ Na<sub>2</sub>O<sub>2</sub>.
7. Na<sub>2</sub>O + H<sub>2</sub> \_\_\_\_\_ NaOH.
8. HCl + Zn \_\_\_\_\_ ZnCl<sub>2</sub> + H<sub>2</sub>.
9. HCl + Al \_\_\_\_\_ AlCl<sub>3</sub> + H<sub>2</sub>.
10. P<sub>4</sub>O<sub>10</sub> + H<sub>2</sub>O \_\_\_\_\_ H<sub>3</sub>PO<sub>4</sub>.

## KAAFTOON :

Ka soo qaad in curiyaha A iyo curiyaha B falgal dhex maro. Ka soo qaad in atammo A ah iyo B ah uu falgalkaasi dhe xmaro. si ay u sameeyaan iskudhis moliki-

yuulkiisu ka dhisan yahay atamka A iyo atammada B. Haddaba, atamka A immisa atam oo B ah ayuu falgal la geli karaa oo uu ku xidhmi karaa? Haddii hal atam oo A ahi uu falgal la sameeyo oo uu ku xidhmo hal atam oo B ah, markaa iskudhiska naanaystiisu waxay noqonaysaa AB. Haddii ay laba atam ku xidhmi karaan waxaa samaysma iskudhiskii hore mid ka duwan oo naanaystiisu tahay AB. sidaas buu u soconayaa.

Haddaba, atamka A goor walba ma wuxuun buu falgal la samayn karaa oo uu ku xidhmi karaa tiro go'an oo atammada B ah si uu goor walba isla iskudhis go'an u sameeyo, mise atamka A had walba waxa uu falgal la samayn karaa oo uu ku xidhmi karaa inta atam ee B ee uu doono? Haddii ay arrintu tahay sida dambe, waxa dhacaysa in tirada iskudhiska ee curiye A iyo curiye B ay isla samayn karaan marka falgal dhex maro aanay xad lahaateen. Maxay haddaba, jawaabtu tahay?

Bal dib ugu laabo xeerka sameyska go'an ee aynu hore u soo qaadannay, ee odhanaya haddii curiye A iyo curiye B uu dhexmaro falgal, si ay u sameeyaan iskudhis, in mar walba eufka A uu falgalka la sameeyo euf go'an oo B ah. Taasis oo sugar oo wax beddeima aan ahayn. Haddii aynu la kaashanno aragtida atameed ee Dhaalton, taasi waax aynu ku maenayn karaa in tirada atammada ee A ee ku xidhmi kara tiro go'an B ah, si ay u sameeyaan iskudhiskaasi sugar, ay tahay tiro sugar oo aan isbeddel lahayn.

Halkaa waxa aynu ka garanaynaa in marba haddii A iyo B ay falgal sameeyaan, oo falgalkaasi uu ka dhasho iskudhis sugar, oo aan tirada atammada A iyo tirada atammada B ee isku xidhmi karaa ay go'an yihin oo aanay hadba tiro atammo A ihi ku xidhmiin inta B ah ee ay doonaan.

Sidaasi iyadoo ay tahay, ayaa waxa dhacda in marka in badan A iyo B falgallo ku dhex maraan xaalado kala duwan, ay falgalayaalkaasi ka samaysmi karaan iskudhisyo kala duwan. Iskudhisyada waxa kala duwan tirada atammada A iyo tirada atammada B ee mid walba molikiyuulkiisu ka dhisan yahay.

### Tusaale :

AB. AB<sub>2</sub>. A<sub>2</sub>B. A<sub>3</sub>B. IWM

Naanaysyadan iyo kuwo kale oo suurogal ahiba waxa ay u taagan yihiiin iskudhisyo kala duwan. Marka sidaasi ay dhacdo, tirada iskudhisyada samaysmaa ma mid aan xad lahayn baa? Maya, mar walba tirada iskudhisyada kala duwan ee ka samaysma falgalka A iyo B ku dhex mara xaaladaha kala duwan, waa mid kooban. Taasna waxay mireekhaati u tahay in tiro ga'an oo atammo A ahi ku xidhmi karto hadba inta atam ee B ah ee ay doonaan.


Dooddaasi dheer, waxa aynu ka garan karnaa in curiye walba leeyahay awood gaar ah, oo uu falgal kula sameeyo curiye kale, ama curiye walba atammadiisa waxa ay leeyihiiin awood gaar ah oo go'an oo ay ku xidhmi karaan atammada curiyeyaalka kale. Awooddaas curiyeyaalka ama atamkeeda waxa lagu qiyaastaa tirada atammada curiyaha kala ah ee hal atam oo curiyahaas ahi uu ku xidhmi karo. Awooddaa caynkaas ah ayaa la yidhaahdaa kaaftoonka curiyeyaalka.

### Qeexid :


Kaaftoonku waa awoodda hal atam leeyahay ee uu ku haysto ama uu isugu xidhmi karo atammada kale marka falgal kiimikaad ka dhex dhaco.

## Tusaalayaal :

Bal fijiri iskudhisyada naanaysyadoodu yihiin :



Bal u fiirso curiyaha haydarojiinta ee ku jira isku-dhisyadan.



## Dabar :

Waawoodda (bond) isku haysa labada atam. Tusaalayaashan haddaad u fiirsatid waxa aad ku arkay-saa in atamka haydarojiintu ku wada xidhan yahay oo uu ku wadajiro. Haddaba, atamka haydarojiin ayaa la sii-yey lambarka kaaftoonkiisu yahay (+1), si loo helo kaaf-toonnada atammada kale.


Markaa, haddaad u fiirsato naanaysta HF, kaaf-toonkii haydarojiin la siiyey wuxuu ahaa (+1), markaas si uu molikiyuulka (HF) danabkiisa guud uu u noqdo eber (0), waa in kaaftoonka (F) uu ahaadaa (-1), markaas buu molikiyuulkii dhexdhexaad noqonayaan.

## Tusaale :


$$\begin{array}{rcl} +1 & & -1 \\ \text{H} & = & \text{F} = 0 \\ (+1) + (-1) & = & 0 \end{array}$$

Markaa bal u fiirso curiyeyaalka foleriin (F), Kloriin (Cl), Boromiin (Br), iyo Aayodhiin (I), waxa ay mid walba ku xidhan tahay hal atam oo haydarojiin ah.

sidaa awgeed, ayaa iyana mid waliba kaaftoonkiisu u yahay hal. Halkaas oo hal taban ah (— 1).



Waxa aad sawirka ku arkaysaa in atamka ogsijiintu ku xidhan yahay laba atam oo haydrojiin ah. waxa aad odhan kartaa atamka ogsijiinta ahi waxa uu u kala gelley laba atam oo haydarojiin ah. marka kaafloonka ogsijiin wuxuu noqonayaa laba, hase yeeshi. ileyn haydarojiin atam oo kaaftoonkoodu + 2 isku yahay baa ku jira biyaha. ( $\text{H}_2\text{O}$ ) waa in ogsijiinta kaaftoonkeedu noqdaa — 2. si danabka molikiyuulkiisu u noqdo eber (0).



Isugeynta kaaftoonka labada Kaaftoonka halka  
itam ee haydarojiin. itam ee ogsijiin:

Taas macnaheeduna waxa weeye kaaftoonnada atammada ku jira molikiyuul walba way is-goostaan oo wadartoodu waq eber had iyo jeer. Haddii atammada curiyuhu uu muujiyo kaaftoonno kala duwan marka uu ku jiro molikiyfullada iskudhisyaada kala duwan waxa la yidhaahdaa curiyahaasi waxa uu leeyahay kaaftoon guure ah.

#### Tusaale :

Naanaysyada  $\text{H}_2\text{O}_2$  (Haydarojiin laba ogsaydh). Haydarojiinta iyo ogsijiinta waa aynu aragnay marka falgal dhexmaro inay sameeyaan iskudhis biyo ah ( $\text{H}_2\text{O}$ ).

Waxa jira haddaba, iyada oo xaaladdu ka duwan tahay inay labada curiye isla falgalaan oo sameeyaan is kudhis la yidhaahdo, haydarojiin laba ogsaydh ( $H_2O_2$ ) oo ka duwan biyaha.

Halkan waxa kaaga caddaanaya in kaaftoonka ogsijiintu uu guure yahay oo aanu la mid ahayn ( $-2$ ), ee yahay ( $-1$ ), waayo, waa tii aynu nidhi waa in danabka guud ee molikiyuulku noodaas eber. Markaa haddii labada atam ee haydarojiin ay leeyihin kaaftoon ah ( $+2$ ) danabka molikiyuulkana laga rabo eber, waa maxay lambar ka uu ( $+2$ ) ee haydarojiinta isu go'ayaan? Waa ( $-2$ ). Ha se ahaatee, halkti atam ee ogsijiinta ahi iminka waa ( $-1$ ), marka laba atam oo ogsijiin ahi waxay ay noqonayaan ( $-1$ ) + ( $-1$ ) =  $-2$ .

Xisaab ahaan waxay noqonaysaa.

$$(+1) + (+1) = +2 \text{ waa ta haydarojiinta}$$
$$+2 + X = 0$$

$$X = -2 \text{ oo ta ogsijiinta ah, laba atam ah.}$$

$$\text{Xaqijin : } +2 + (-2) = 0.$$

Taas macnaheedu wuxuu yahay in kaaftoonka labada atam ee ogsijiinta wadartoodu tahay ( $-2$ ). Kaaftoonka midkoodna yahay ( $-1$ ). Sidaas ayaa kaaftoonka ogsijiinta ku jira  $H_2O$  uu u yahay ( $-2$ ) ka ku jira ( $H_2O_2$ ) na u yahay ( $-1$ ). Sidaas awgeed, ogsijiintu waa curiye kaaftoonkeedu guure yahay oo dhowr kaaftoon muujisa.

### Layli :

1. Sheeg kaaftoonka curiyeyaalka haydarojiinta kula jira iskudhis yada soo soeda (Haydarojiinta mar wal)

ta kaatatoonkeedu waa + 1 ).

- (Q) NH<sub>3</sub> (b) CH<sub>4</sub> (t) N<sub>2</sub>H<sub>4</sub> (j) B<sub>2</sub>H<sub>6</sub> (x) PH<sub>3</sub> (kh) HI

### Noocyada falgallada kiimikaad:

#### GOGOLDHIG :

Noocyada falgallada kiimikaad waa tiro badan yihiin, hase yeeshee, waxa jirta dhawr nooc oo falgallada intooda badan ay mid uun hoos timaaddo, noocyadäasi mid waliba wuxuu yahay iyo waxa uu kaga duwan yahay kuwa kale, waxaa si fiican loo garan karaa haddii aynu xusuusanno wixii ay sheegaysay aragtida atamka ee Dhaalton, gaar ahaan sidaan ah :

Molikivuulku atammo ayuu ka samaysan yahay, atammadaas oo isku xidhan. Atamku waa qurubka ugu yar maatarka ee falgal kiimikaad ka qayb geli karo. Atammada lama abuurin karo. Lamana baabi'in karo.

### Noocyada falgallada kiimikaad :

#### (1) Isutagga toosan :

Falgallada noocan ahi waa kuwa dhaca marka laba atam iyo wax ka badani ay isku tagaan, oo isugu xidh maan si kimika ah, oo sidaa ku sameeyaan molikiyuul cu sub oo u taagan iskudhis cusub oo ka geddisan wixii aynu falgalka ku bilownay.

### Tusaale :

Marka laba haydarojiin atam isu geysmaan oo isku tagaan si ay u sameeyaan hal molikiyuul oo haydarojiin ah sidda :



Atam atam molikiyuul

Hayd. Haydaroj. haydarojiin

ah ah ah

Marka atam haydarojiin ah iyo atam koloriin ahi  
isu tagayaan oo sameeyaan haydarojiin koloraydh sida:




Atam, haydarojiin Atam Molikiyuul

ah Koloriin Haydarojiin

ah Koloraydh ah.



Haddii laysku kuleeliyo qadaro Feeram iyo Salfar  
ah, waxay ina siinayaan iskudhis la yidhaahdo Feeram  
Salfeydh.



## 2. Kalabax :

Falgalka noocan ahi wuxuu ku dhacaa, marka molikiyuul, uu u kala jajabo laba iyo wax ka badan oo molikiyuullo ah, molikiyuulkii horena ka yaryar kana duwan. Taasi macnaheedu waxa weeye atammadii uu ka samays-naa molikiyuulku ee hore ayaa kala jabay oo molikiyuul-lo yaryar oo cusub ayaa samaysmay.

### Tusaale :




AB waa molikiyuul weyn oo labada qaa  
B oo isku xidhan ka samaysan. Falgalku ahaan qay-  
bood oo ay AB ka samaysan tahay buu u kala jebiyey:  
kuwaa oo ah A, iyo B.

### Tusaale ahaan :

Kul.		
1. $\text{CaCO}_3$	$\text{CaO} + \text{CO}_2$	
Kaalsiyam	Ogsaydh	Kaarboon
Kaarbooneyt	Ogsaydh	laba ogsaydh
(Didib)	(Nuurad)	

### U fiirso :

Molikiyuulkii ahaa  $\text{CaCO}_3$  aaya atamkii kaalsiyam  
ka ahaa iyo atamkii ogsijiin ahaa gees isku raaceen oo ay  
sameeyeen molikiyuulka yar ee  $\text{CaO}$ . atamkii kaarboon  
ka ahaa iyo labadii atam ogsijiinta ahaa ee hadhayna ay  
gees isku raaceen oo ay sameeyeen molikiyuul yar oo ah  
 $\text{CO}_2$ .



### (3) Dib-u-habeyn....(Rearrangement):

Falgalka noocan ahi waa ka dhacaa marka moli  
yuul atammada uu ka samaysan yahay ay isbeddelaan  
dib isu habeeyaan, sida ay isugu xidhan yihiin, iyadoo

molikiyuulka atammo kälena ku soo kordhin, kuwiisiina waxba aanay ka tagin.

### Tusaale :

A — B — T Dib-u-habeyn A — T — B ama T — A

— B. Molikiyuulka A — B — T waxa dib-u-habeyntii (re-arangement) kaga abuurmi kara laba molikiyuul oo cu-sub oo kala ah: A. T — B iyo T — A — B.

Waxa aad fiiro u lahaataa in saddexda molikiyuul aanay ku kala duwanayn tirada iyo noocyada atammada ku jirā, waana isku mid. Waxa keli ah ee ay ku kala duwan yihiin kana dhigay saddex walxood oo kala jaad ah waa dhismaha atammada oo u kala duwan molikiyuulla-da. Taas macnaheedu waxa weeye in sida atammadu isugu xidhan yihiin ay u kala duwan yihiin, dabadeedna dhismahoodu kala duwan yahay, sida walxo kala gaar ah oo kale. Sidaa awgeed, iskudhisyada waxa ka dhiga walxo kala gaar ah oo kala duwan qodobbada hoos ku qoran haddii mid uun'ay yeeshaan.

1. Noocyada atammada ku jira moliyikuulka.
2. Tirada nooc walba oo atam ahba kaga jirta molikiyuulka.
3. Sida atammadu ay ku dhisan yihiin oo isugu xi-dhan yihiin.

### 4. Kala baxa lammaan.

Falgalka noocaan ahi waa ka dhaca marka laba molikiyuul uu falgal ka dhex dhaco ee ay labadu kala jabjabaan, dabadeedna ay hal iyo wax kaa badan oo atamma ah ay is-dhaafsadaan.

### Tusaale :



Halkan waxaad ka arkaysaa in molikiyuulka A — E iyo C — D ay is-dhaafsadeen atammada am. atammada ah ee B iyo D.

### Dhab ahaan:



Haydarokoloorik Arjantam Arjantam Naytarik  
aysiidh Naytareyt Koloraydh asiidh

Labada molikiyuul ee falgallada ahi waxay is-dhaafsadeen H iyo Ag.



### 5. Baro Bixin :

Falgalka noocan ahi waa ka dhaca marka curiye. curiye kale ka saaro iskudhis uu ku jiray oo uu meesheesi qato.

### Tusaale guud :



Curiyaha A ayaa beddelaya oo meebsiisii ka qaata curiyaha C.

### Tusaale :



Curiyaha Sink (Zn) ayaa beddelay oo qaatay mee-shii kubram (Cu).

**L a y l i :**

1. Immisa nooc oo falgallo kiimikaad ah ayaa jira ? Magcaw ?

2. Maxaa iskudhisyada ka dhiga walxo kala gaar ah ? Tusaale ka bixi?

3. Qeex kaaftoonka, waa maxay kaaftoonka curiyaha dhexe ee isku dhisyada soo socda?



4. Sheeg kaaftoonka Naytarojiinta iskudhisyadan ?  
 $\text{NO}_2, \text{NO}, \text{N}_2\text{O}_4$

5. Iskudhiska A ayaa la kululeeyey si ay uga soo baxdo neefta B oo marka biyo nuuradeed la dhex marriyo  $\text{Ca}(\text{OH})_2$ , xabuub cadi fadhiistaan gunta weelka uu ku jiro. Magacaw iskudhiska A iyo neefta B. Qor isle'egta kiimikaad ee falgalka oo miisaaman. Falgalkaasu waa nooceee ?

6. Falgallada hoos ku qoran, mid walba sheeg nooca yahay. Hddii aanu miisaannayn, miisaan.



8.  $\text{SO}_3 + \text{H}_2\text{O} \longrightarrow \text{H}_2\text{SO}_4$ .
9.  $\text{KOH} + \text{MCl} \longrightarrow \text{KCl} + \text{H}_2\text{O}$ .
10.  $\text{MgO} + \text{H}_2\text{O} \longrightarrow \text{Mg(OH)}_2$ .
11.  $\text{C} + \text{O}_2 \longrightarrow \text{CO}$ .
12.  $\text{NaCl} + \text{HNO}_3 \longrightarrow \text{NaNO}_3 + \text{HCl}$ .

7. Sheeg nooca falgalka ay yihiiin, miisaanna

1.  $\text{H}_2\text{SO}_4 + \text{NaOH} \longrightarrow \text{Na}_2\text{SO}_4 + \text{H}_2\text{O}$ .
2.  $\text{HCl} + \text{NaOH} \longrightarrow \text{NaCl} + \text{H}_2\text{O}$
3.  $\text{O} + \text{O} \longrightarrow \text{O}_2$ .
4.  $\text{Hg} + \text{O}_2 \longrightarrow \text{HgO}$ .
5.  $\text{Fe} + \text{O}_2 \longrightarrow \text{Fe}_2\text{O}_3$ .
6.  $\text{NaNO}_3 \longrightarrow \text{NaNO}_2 + \text{O}_2$ .
7.  $\text{H}_2\text{O} \longrightarrow \text{H}_2 + \text{O}_2$ .
8.  $\text{Zn} + \text{HCl} \longrightarrow \text{ZnCl}_2 + \text{H}_2$ .
9.  $\text{H}_2 + \text{O}_2 \longrightarrow \text{H}_2\text{O}$ .
10.  $\text{C} + \text{O}_2 \longrightarrow \text{CO}_2$ .

## ISBEDDELKA DULEED IYO ISBEDDELKA KIMIKAAD

Hore waxa aynu u soo qaadannay Isbeddelka Duleed iyo Isbeddelka Kimikaad waxa ay yihiiin iyo waxa ay ku kala duwan yihiiin. Halkañ wax yar oo kooban uun baannu kaga hadlaynaa. Koobnidaas oo saldhig u noqonaysa Falgalka Kimikaad.

Marka Isbeddel laga hadlayo, waxa jira meel Isbeddelkaasu ka bilaabmo iyo meel uu, ku dhammaado. Wal-

xaha isbeddelayana inta aanu isbeddelku bilaabmin wajigooni ah bay leeyihii oo ka duwan ka samaysma. Wajigaas Isbeddelka hortii jira waxa aynu odhanayneý wejiga «A» wejiga danbe ee walaxdaas Isbeddelku ku dhacayo yeélatana mid duleed ha ahaado ama mid kimikaad, waxa aynu odhanaynaa «B». Bal hadda aan eegno wejiyada Isbedelaya waxa ay ku kala duwan yihii. Waxa aynu isweydiinaynaa su'aalo sida :

- 1) Marka Isbeddel duleed dhaco maxay kala yihii wejiga «A» iyo wejiga «B» ?
- 2) Marka Isbeddel Kimikaad dhaco maxay ku kala duwan yihii wejiyada «A» iyo «B» ?
- 3) Maxay markaa ku kala duwan yihii Isbeddel du leed iyo ka Kimikaad ?

### **ISBEDDEL DULEED**

Marka Isbeddel duleed dhaco waxa keli ah oo isbeddelaa waa tilmaamahá duleed ee walaxadaasu leedahay. Wejiga A iyo B maaha alaab kala geddisan ee waa isla wax keli ah oo muuqiisa Uuni beddelan yahay.

**Qeexid :** Waa weji-gadis ama Isbeddel ku dhaca walxa-ha iyada oo wax Isbeddel kimika ahi aanu jirin. Si fududna walaxahaa loo kala sooco.


### **ISBEDDEL KIMIKAAD**

Waa weji-gadis áma isbeddel ku dhaca walaxanaa, oo halkaasi oo uu ka abuurmo walaxo cusub oo ka geddisan tii hore xagga tilmaamaha Duleed iyo kuwa Kimikadba.

### **ISBEDDEL KIMIKAAD**

**Tijaabo :**

Waxaad soo qaadataa in ýar oo Salfar ah iyo Jidhiidh



J.T. 1.11

xadiid ah. Labada walxood ku wada shub dhuun hubsasho, dabadeedna isku walaaq. Dhuunta hubsasho xagga sabirqaab kaga qabò, laambadna salka dhuunta hubasho hoos dhig oo muddo u daa. Fiiri waxa dhaca. Maxaad aragtay? Dhuunta hubsasho meel dhig ha qabowdee. Waxa dhuunta hubsasho ku jira warqad kaga daadi. Salfarkii iyo Jidhiidhii xadiidka ahayd ma kala arki kartaa. Waayo? Birlab soo qaado oo u dhawee walaxdii. Maxaa dhacay?

Halkaa waxa la ogaan karaa in walaxo cusub samaysmeen markii Iskujirkii salfarka iyo jidhiidhi xadiidka la kululeeyay. Walxalahaasi waxay leeyihiin, astaamo ka duwan kuwii Salfarka iyo Jidhiidhii Xadiidka.

Faraqa u dhexeeyaa Isbeddelka duleed iyo Isbeddelka Kimikaad.

- 1) Isbeddelka duleed ee walxuhu waa gaddisme.

**Tusaale ahaan:**

Biyaha märna baraf baa läga dhigaa marna Uumi, iyada oo la beddelayo muuqa biyaha.

- 2) Ma soo saaro walax cusub ee marka wajiga A, loo beddelo wajiga B in haddana wajiga lagu celin karo wajiga A.

**Tusaale :**

Sida barafka märna läga dhigo biyaha, marna Uumi.

- 3) Isbeddel kul oo aad u fara badani lama xidhiidho.

**Tusaale :**

Sonkor biyo ku milanta iyo waxyaalo kale oo la mid ah.

- 4) Isbeddel kuma dhaeo culayska walxaha.

**Tusaale :**

Birlabaynta xadiidka.

- 1) Guud ahaan Isbeddelka Kimikaad ee walxuhu waq ma-gaddisme.

**Tusaale :**

Marka haydarojiin la falgasoo Ogsijiin oo ay sameeyaan biyo.

- 2) Had iyo jeer wuxuu soo saaraa walax cusub, wajiga A la mid ma aha wajiga B.

**Tusaale :**

Marka díidib loo beddelo nuurad.

- 3) Sida caadiga ah Isbeddel kul oo aad u fara badan ayaa la xidhiidha.

**Tusaale :**

Marka qori, shamac, dhuxul, batrool iwm ay gubtaan.

- 4) Way kala duwanaan ka raap culayska walxood oo samaysmay, hase yeeshee culayska guud is ma beddelo.

**Tusaale :**

Isugeynta biraha iyo Og saydhyada.



Isbeddelka Kimikaad waxa tusaale fiican inaga sii-naaya, gubashada Sonkorta, Dhuxuusha, ama Shamaca, sameynta Nuuradda Miridhka iyo Khamiirsta.

## GUBASHADA DHUXUSHA

Waxaa laga yaabaa in intenna badani aragtay dhuxul ama xaabo gubanaysa. Dhuxushaa iyo xaabadu markay aad u gubtaan waxay noqdaan dambas, iyo qiiq ka baxa. Marka ay caddaadaan waxay isu rogaan wax cu-sub oo astaamahoodu ka duwan yihin kuwii hore. Dambaska iyo qiiqa samaysmay laguma celin karo dhuxushii iyo xaabadii hore.

Markaa waxaynu odhan karnaa isbeddel Kimika ah baa dhacay. Dhuxushii baa isu beddeshay wax cusub, qiiqa oo la yidhaahdo kaarboon laba Ogsaydh iyo dambas.

Xaabo ama dhuxul ————— Kaarboon laba Ogsaydh



Kaarboon


+ Ogsijiin      Kaarboon laba Ogsaydh.

(dhuxul)

Gubashada dhuxushu waxay dhacdaa marka Ogsijiintu ku darsanto curiyaha kaarboon oo dabeed Falga ka dhex dhaco.

## MIRIDHKA XADIIDKA

Miridhku waa isbedel Kimika ah oo ka dhex dhaca xadiidka iyo qayb hawada ka mid ah :



WJ 233 N/11

### Tijaabo :


Bakeeri gudihiisa in xábag ah mari. Masaabiir yar yarna Isbiirto ku maydh, dabadeedna ku dhaji bakeeriga gudihiisa. Digsí aad biyo ku shubtay bakeerigii ku af-gambi. Muddo 2 maalmood ah u daa. Markaa dib bal u fiiri waxa dhacay.

Biyihii sare ma u kaceen? Cabbir inta biyuhu ga-leen bakeeriga. Bakeeriga oo dhan dhererkisa cabbir. Labada cabbir ee aad heshid isu qaybi. Waa imisa jajab-ka aad heshay? Haddii tijaabadu kuu hayaagsan tahay wuxuu noqonayaa 1/5 ama wax u dhow. Bal masaabiirta u firso. Maxaa ku dhacay? Madabkoodii ma isbedde-lay? Maxay biyuhu markii hore u geli waayeen bakes-riiga markii dambena ay u galeen? Maxay bakes-riiga u wada buixin waayeen?

Tijaabadan waxa inooga muuqanaya in hawadu ta-hay iskujir ka kooban neefo kala jaad ah, oo qaybina la falgasho masaamiirta, biyana beddeleen meeshoodii, neeftaas oo la dhaho Ogsajiin.


Xadiid + Ogsijiin ————— Miridh (xadiid)

Isle'egga Kimikaad ee miridha xadiidku wuxuu u qormaa sidan :



### YIISKA IYO KHAMIIRIDDA

Soo qaado saabaan:a jaantuska ku yaal. Iskujir sonkor iyo yiista ah ku rid dhalada. Biyo diirran ku dar. Milanku quraaradda uu ku jiro afka waxaad kaga joojisa dhuunxidhiidhiye. Cidhifka kale ee dhuunta waxaad gelisaa bakeeriga uu ku jiro biyo nuuradeedku sida aad jaantuska ku aragtid. Meel diirran qalabkaas dhig maalin u daa. Bal fiiri maalinta xigta. Sidee buu noqday Iskujirkii dhalada gudaheeda ? Bal furka ka qaad, ma ku uray ? Wax isbeddel ahi ma dhacay ?



milan Khamiiriye  
iyo Sonkor

Isbeddelka sonkortaaas ku dhacay baa la dhahaa Kha miirid. Neefta ka soo baxda oo la dhaho kaarboon laba Ogsaydh sidii aynu hore u soo sheegnayba marka uu gaa-dho milanka  $\text{Ca}(\text{OH})_2$  ee bakeeriga ku jiray walax cusub oo midabkeedu cad yahay ayaa bakeeriga guntiisa farii-sata marka ay samaysanto kaddib.

Waxa la yidhaahdaa walaxdaa cusub ee dhalatay Kaalsiyam Kaarboneyt ( $\text{CaCO}_3$ ).

Samaysanka  $\text{CaCO}_3$  waxa ay muujisaa in neefta ka soo baxday dhalada ama guud ahaanba khamiirisku ay tahay Kaarboon laba Ogsaydh. Waayo neeftaasi waa ta qudha ee la falgasha milanka  $\text{Ca}(\text{OH})_2$ , dabadeedna dha-lisa Iskudhiska  $\text{CaCO}_3$ .

Isle'eg ahaan waa sidan:



Milan Kaalsiyam Kaarboon la- Kaalsiyam Biyo  
Haydarogsaydh. ba Ogsaydh Kaarbooneyt

## GUBASHADA SONKORTA

Tijaabo :

In sonkor ah soo qaado, oo ku shub daasad yar oo sida koobka aad u goysay. Dab saar oo u fiirso waxa dhaca, maxaa dhaca ? Midabkii sonkortu muxuu noqday?

Ma sideedii baa mise way isbeddeshay? Maxaa kale oo aad aragtay? Daasadda hareeraheeda maxaad ku aragtay? Aad u fijii? Biyo ma yihiin? Marka sonkorta la gubo isbeddel Kimikaad ayaa dhaca oo wax cusub baa samaysma. Waxa cusub oo la yidhaahdo Kaarboon laba Ogsaydh iyo biyo. Waxa madow ee daasadda ku hadhay, dib ma ugu celin kartaa sonkortii caddayd ? Maya, oo wax ka geddisan oo astaamahoodii ka duwan yihiin kii sonkortii ayaa samaysmay.

Sonkor ————— Kaarboon laga Ogsaydh + Biyo  
dab

Falgalka dhaca marka sonkortu ay gubato waa kala bax, waayo sonkortii baa u kala baxday Iskudhisyo ka sameys sahlan iyada.


## DIYAARINTA KAALSIYAM OGSAYDH (Nuuradda)

Didibka ayaa laga sameeyaa nuuradda, magaca Ki-mikaad ee loo yaqaan didibka waa Kaalsiyam Kaarboneyt ( $\text{CaCO}_3$ ), nuuradduna waa kaalsiyam Ogsaydh ( $\text{CaO}$ ).

Kaalsiyam Ogsaydh oo nuuradda ah waxa la helaa mar-ka didib iyo xaabo badan la isku gubo oo lagu rido hogag loo sameeyey oo la yidhaahdo Maraaq. Marka walxahaasi isku bislaadaan baa laga soo saaraa maraaqii oo dabadeed lagu rusheeyaa biyo. Marka uu dhagaxu qaboo-bana waa la burbiriyaama iskiis buu u burburaa.

### Tijaabo :

Soo qaado didib oo ku shid dab. Dabka u daa ilaa iyo inta uu dhagaxu caddaanayo, dabadeed dabka ka saar, oo qabooji. Bal hadda fiiri inuu burburo iyo in kale. Waxa burburay waa Nuurad (CaO), dhagaxiina wuxuu u kala baxay nuurad iyo kaarboon laba Ogsaydh.



### GUBASHADA SHAMACA

#### Tijaabo :

Maxaa dhaça marka Shamacu gubto ?

Saabaan : Shamac. laba Bakeeri oo kala mug weyn.

#### Dariiqo :

Ku dhaji shamac warqad yar oo miis dul taalla, dabadeedna shid shamaca oo u fiirso waxa ku dhaca shamaci. Ololkii shamacu ma damay isla markii aad ba-keeriga ku afgambiday ? Tijaabada ku celi adigoo istic-maalaya bakeeriyyada kala mugga weyn oo u fiirso inta ay ku kala qaadanayso shamaca damistiisu. Maxaa hal-kaa ka caddaanaya ? Miyaan la òdhan karin gubashada

shamacu waxa damiyay bakeeriga oo dabayshii laga xidhay.

Bakeeriga wax hawo ahi ma ku jirtaa? Way adag tahay runtii si loo sheego arrintaas, waayo hawadu wax la arki karo ma aha. Haddaba sidee baan ku ogaan karraynaa in aan bakeeriga wax ku jirin? Waxa la ogyahay in hawadu ay meel qaadato oo fariisato waayo maatarka ayey ka mid tahay, maatarkuna wuxuu caan ku yahay in uu meel qaato. Gubashada shamacu ma hawadii bakeeriga oo dhan buu isticmaalay, mise qayb buu ka isticmaalay?

#### Tijaabo :

**Saabaan :** Shamaca ku dheji digsiga guntiisa, dabbadeedna si miyir ah ugu shub biyaha, shamacana shid. Bakeerigii soo qaado oo ku afrog shamaca gubanaaya. Bal fiiri waxa dhaca. Maxaad aragtay? In yar shamacii markuu gubtay ayuu damay. Ilaa iyo iminka waxay tijaabadani ina tusaysaa in shamacu gubashada wadayo haddii hawadaa too fur, haddii lagu afgambiyoo weelna, sida baa eriga, shamaciir gubashada in yar wadayo, dabbadeedna damayo, waayo hawadii baa laga xidhay.

Marka shamacu gubto lama odhan karayo bakeeriga ku afrogani waa madhan yahay, waayo hawadu waa iskujir ka kooban dhowr walxood ee gubashadii shamaca een baa istaagtay.

### QAYBTA HAWADA EE LOO ISTICMAALO

#### GUBASHADA SHAMACA


#### Tijaabo :

**Saabaan:** Shamac baxaya, bakeeri cabbiran oo niiisu yahay 500 CC, iyo digsi biyo ku jiraan.

## Dariiqo :

Shamaca baxaya ku dheji salka digsiga. Bakeeriga cabbiran si qun yar ah ugu afrog shamaca baxaya. Mud-do dabadeedna fiiri waxa dhacay.

Maxaad aragtay? Shamacii baa damay. Maxaa isbeddel ah ee aad aragtay? Biyihii baa bakeerigii kor u raacay. Imisa Santimitir oo saddex jibbaaran bay biyihii kor u kaceen? Waa imisa jajabka biyihii sare u kaceen? Muxuu jajabkaasu ku tusayaa? Maxaad tijabadan ka heshay?



Markii aad bakeeriga ku afrogtay shamaca, shamaciin wax yar dabadeed ayuu damay. Taasi waxay ku tusay saa in qayb hawada ahi caawiso gubashada. Qaybtaas waxa la dhahaa Ogsijiin. Ogsijiintu waxay ka qayb qan datay falgal, sidaas darteed Ogsijiintii ayaa lagu saaraa bakeerigii cabbirnaa. Maxay biyuhu sare ugu kacceen? Muggii Ogsijiinta falgashay ayaa waxa beddelay mugleeg oo biya ah oo la mid ah 100 CC ama 15 ee mugga hawada ku jirta bakeeriga cabbiran.

Taasi waxay ina tusaysaa in 1/5 oo ah hawada (Ogsijiin) ku jirtay bakeeriga falgashay. Taasi macnaheedu waxa weeye, in 1/5 ee hawadu tahay ogsijiin. Marka shamacu gubto isbeddel Kimikaad baa dhaca oo wara ka dhasha falgalkaasi walxo cusub. Walxahaas oo ah biyo, iyo Kaarboon laba Ogsaydh.

### L a y l i :

1. Tax Saabaanka tijaabada miridinka birta.
  2. Sheeg oo tax waxa ay ku kala duwan yihii isbeddelka Kimikaad iyo duleed.
  3. Waa maxay Khamiiristu? Waa maxay maxsuulka Khamiirista Sonkorta?
  4. Maxaa lagu garanaya in neefta ka baxda Khamiirista Sonkortu tahay Kaarboon laba Ogsaydh?
  5. Maxaa laga sameeyaa Nuuradda?
  6. Waa maxay maxsuulka gubashada Shamacu?
  7. Muxuu Shamacu u damaa marka weel lagu afambiyo?
- Sheeg oo magacow qaybta hawada ah ee gubashada loo isticmaalo.

9. Sheeg magaca falgalka Kimikaad ee loo isticmaalo gubashada Shamaca.
10. Maxaa dhuxusha laga sameeyaa ?
11. Gubashada Sonkortu ma isbeddel Kimikaad baa ?
12. **Qeex:** Isbeddel duleed iyo mid Kimikaad iyo falgal Kimikaad.
13. Waxyaabaha soo socda kuwee baa falgal Kiinikaad ah.
  

  - 1) Marka warqadi gubato.
  - 2) Marka tarraq (qaraf ama kabriid) la shido.
  - 3) Marka cusbo biyo lagu milo.
  - 4) Marka Sonkori gubato.
  - 5) Marka biyo iyo isbiirto la isku daro.
  - 6) Marka dhedo samaysanto.
  - 7) Marka dahab la dhalaaliyo.
  - 8) Marka caanuhu dhanaanaadaan.
  - 9) Marka burcadka subag laga dhigo.

### **ASIIDHYO, BEYSYO IYO CUSBOOYIN.**

Asiidhyada, beysyada iyo cusbooyinku waa saddex qolo oo iskudhisyo kimikaad ah door weynna ka ciyaara kimistariga. Iskudhisyada ee kala ah asiidh, beys iyo cusbooyin, kimika ahaan bay isugu xidhan yihiin ama isbeddelkooda kimikaad baa isku xidhan. Iskudhisyada intooda badanina waa mid ahaan saddexda nooc ee kimi-

kada ah. Bal hadda mid walba goonideeda aan u eegno oo darisno.

### **Asiidh :**

**Qeexid :** Asiidhu waa walax u beddesha warqadda litmas ee midabkeedu yahay buluug ama calan, casaan, had iyo goorna leh atammada haydarojiinta oo biri beddeli karto.

Runtii lama soo koobi karo asiidhada jira oo dhan, hase ahaatee, bal aynu fiirinno intooda caadiga ah. Isku-dhisyada aynu hore u soo aragnay ee ay ka mid yihiin haydrokoloorik asiidh, naytarik asiidh, salfiyuurik asiidh, intuba waa asiidho.

### **Tijaabo :**

Dhuunta hubsasho ku shub iskudhisyadan: salfiyuurik asiidh, naytarik asiidh ( $\text{HNO}_3$ ), haydrokoloorik asiidh ( $\text{HCl}$ ) asitik asiidh ( $\text{CH}_3\text{O}_2\text{H}$ ) iyo sitirik asiidh.

Mid walba milan ka samee oo ku shub dhuun hubsasho, dabadeedna warqadda litmas ee buluugga ah ci-dhifkeeda taabsii. Maxaa dhacay? Wax isbeddel ah ma ku aragtaa waraaqda litmas?

Bal hadda waxaad soo qaadataa kaabaj daray ah, batruul daray ah, dheecaanka cinabka, dheecaanka liinta iyo dhowr hubsasho.

Batruulka in yar ka soo gooso oo biyo ku bayli ilaa biyuhu casaan noqdaan. Dheecaanka waxaad ku shub-taa koob, dabadeedna dabool saar. Kaabajkana in yar ka soo gooso oo sidii oo kale biyo ugu beyli ilaa midabka biyuhu isku beddelaan bunni (Purple). Dheecaanka kaa-

bajka, batruulka iyo cinabka waxa loo isticmaalaa tilmaamayaal asiidh.

Marka la rabo in asiidh la hubiyo, waxa qaaddo dhee-caanadan midkood ah lagu daraa bakeeri biyo ah. In yar oo ah asiidha liinta ama khal ah ku shub hoorarkii tilmaamayaalka ahaa (kii kabajka, batruulka iyo canabka), dabadeedna fiiri waxa dhaca. Maxaa dhacay ?

Marka asiidh lagu daro hoorarka tilmaamayaalka ah waxa khafiif noqda ama luma midabkii ay lahaayeen.

**Tijaabo :**


A. Milan ah salfiyuurik asiidh ( $H_2SO_4$ ), naytarik asiidh ( $HNO_3$ ) iyo haydrookolorik asiidh (HCl) soo qaado. oo ku kala shub dhuumaha hubsashada. Milan walba ku dar in yar oo birta magniisiyam ah. Maxaa magniisiyamkii ku dhacay ? Bal kabriid ama tarraq gubanaya afka ka saar dhuunta hubsasho ee magniisiyamka iyo milanka asiidhu ku jiraan. Maxaad aragtaa ? Wax san-qadh ahi ma kuu baxday? Isbeddel kimikaad miyuu dhacay? Hadduu dhacay, bal falgalka qor. Dhuuntii aad magniisiyamka ku dartay bal iminka ku rid warqaddii litmaska buluugga ahayd. Maxaad aragtay? Muxuu ka-ga duwan yahay milanka aad haysataa kii hore ?

B. Milan salfiyuurik asiidh ( $H_2SO_4$ ) ah iyo milan haydarookoloorki asiidh ah (HCl) soo qaado. Labadoo-daba ku rid in yar oo sink ah (Zn). Maxaad aragtaa ? Bal sidii tijaabadii hore tarraq baxaya ku kor qabo dhuumaha hubsasho ee asiidhyada iyo sink (Zn) aad isku dartay ku jiraan. Maxaa dhacay ? Haddii aad si habsemi ah u samaysid tijaabooyinka A iyo B, marka aad tarraqa ku hor qabatid dhuumaha hubsasho, waxaad maqli jabaq ah «bob». Wuxaan samaynaya marka bir sida

magnisiyam (Mg) ama sink (Zn) lagu rido milan asiidh ah, haydarojiintu birta asiidhu ka saarto, waxaanad ar-kaysaa haydarojiinta oo budhbudh leh, dabadeedna marka aad tarraqa ku qabatid, haydarojiintu way gubanaysaa oo hawadey la falgaleysaa. Sidaas bay jabaqda «bob» u samaysantaa.

Jaantuskanu wuxuu ku tasayaa, sida haydarojiinta loo uruuriyo marka bir iyo asiidh ay isla falgalaan oo dabadeedna birtu saarto haydarojiinta asiidha ku jirta.

Tijaabooyinkaas hore aynu u soo sheegnay waxay inoo caddeynayaan in asiidhu tahay iskudhis kimikaad oo haddii warqadda litmas la taabsiyo ay u beddesho caasan. Marka bir loo geeyanaa, atamka haydarojiinta ee ku jira asiidhu uu baxayo.



Isle'eg ahaan waxay u qormayaan sidaan:

Asiidh + Warqadda litmas (Buluug) \_\_\_\_\_  
Warqadda litmas midabkeedii wuxuu is-  
ku beddeley casaan.

Asiidh + bir ————— Cubso + Haydarojiin

Sida :

$$2\text{HCl} + \text{Zn} \longrightarrow \text{ZnCl}_2 + \text{H}_2$$

Haydrokoloorik + Sink ————— Sink + Haydarojiin  
Asiidh Kolooraydh

Tijaabo :

A. 20 Sm<sup>3</sup> oo salfiyuurik asiidh badhax ah, soo qaad do, ku shub bakeeri oo milanka yara diiri. U fiirso midabka milankaasi uu leeyahay. Wuxa kale aad soo qaadataa kubram ogsaydh (CuO). Dabadeed in yar oo kubram ogsaydh ah ku dar milanka salfiyuurik asiidh. Maxaa dhacay? Bal hadda warqaddii litmaska buluugga ahayd ku rid. Wax isbeddel midab ahi warqadda ma ku hay-saan? Milanka iminka aad haysaa salfiyuurik asiidh ma yahay?

Isle'egta tijaabadu wuxuu u qormaa sidan :

$\text{H}_2\text{SO}_4$	+	$\text{CuO}$	—	$\text{CuSO}_4$	+	$\text{H}_2\text{O}$
Salfiyuurik	+	Kubram	.	Kubram	+	(Biyo)
Asiidh		Ogsaydh	.	Salfeyt		(tutuwe)

B. Soo qaado 10 Sm<sup>3</sup> oo milan naatariyam haydarog saydh ah, ku dar milanka A ee aad haysatid. Wax isbed del midab ahi ma dhacay? Waa maxay?

Tijaabooyinka kor ku qorani waxay wax inaga tu-sayaan astaamaha asiidhu leedahay. Haddii aad si hab san u sameysid, fiirsasho wacanna aad ku qaadatid, xaad qeexi kartaa asiidh waxay tahay. Wuxuu kaaqaa inuu qanaya tijaabooyinkaasi waa :

A. In asiidhu tahay iskudhis kimikaad oo leh taamaha (a) Dhadhan xaamud ah (iska jir, asiidho bi-dhadhamin karo ilaa aad ba-dhaxdid oo biyo badan la-haydar); (b) Marka milan asiidh ah lagu rido warqadda litmaska ah ee buluugga ah, waxay warqadkaasi isku bed deshaa casaan. Warqadda litmas waa warqad lagu qiiyaaso oo lagu garto inay walaxi asiidh tahay iyo in kale. (c) In asiidh ay ku jiraan atammo haydarojjin ah oo ay beddeli karto, kana saari karto biri. Taa macluudeedu waa, asiidha oo la falgasha birta si ay u bixiso haydarojjin. (d) In asiidho ay la falgasho iskudhis yadaa kimi kaad ee la dhaho Beysa sida Kubram Ogsaydh iyo Naata-riyam haydarogsaydh, dabadeedna bixiyaan maxsuulka qudha ee ah biyo (H<sub>2</sub>O) iyo iskudhisyo kimikaad oo la dhaho Cusbooyin, sida kubram salfeyt (CuSO<sub>4</sub>).



Asiidh Beys

Marka asiidhu la falgasho beyska ee maxsuulku noqdo biyo iyo cusbo waxa loo yaqaan in asiidhii dhexdhe xaadisey beyskii, ama beyskii uu dhexdhedaadiyey asiidh kii ama asiidhkii iyo beyskii ay is dhexthexaadiyaan.

Iskudhis yadaa astaamaha kor ku qoran leh baa la dhahaa asiidh.

Asiidha ku jirta khudradda aynu cunno dheecaanna-da ku jira khudradda kala duwan qaar baa asiidho ah. sida kuwa liinta, cinabka iwm. Wawaana ku jira asiidh la dhaho Sitirik asiidh. asiidhadani waa qaar ku abuur-may khudradda. Dheecaannada laga miiro khudrada-haas waxa la odhan karaa in ay asiidho badhxan yihiin.

Asiidhada caadiga ah ee macmalka lagu isticmaalo waxa ka mid ah salfiyuurik asiidh ( $H_2SO_4$ ), naytarik asiidh ( $HNO_3$ ), haydarokoloorik (HCl) iyo fosfoorik asiidh ( $H_3PO_4$ ).

### BEYSASKA (Beysyada)

Hore waxaynu u aragnay sida naatariyam haydarog-saydhku uu u dhexdhedaadiyo ulana falgalo asiidha.

Tijaabo :

a) In yar oo milan naatariyam haydarogsaydh ah oo badhxan ku shub dhuun hubsasho. Dabadeed warqad-da litmas ee caş ku rid oo taabsii cidhifkeeda. Maxaa aragtay? Midabkii casaa ee litmasku ma isbeddeley ?

b) Wawaad soo qaadataa biyo, dheecaankii batruul-ka ee aad hore u samaysatay, amooniya, khal iyo dhib-ciye. Bakeeriga badhkii biyo ka buuxi. Adoo isticmaa-laya dhibciye waxaad ku dartaa biyaha dhowr dhibcood oo dheecaanka batruulka ah si aad biyaha u yara casay-sid waxoogaa amooniya ah kú shubo bakeeriga biyuhu ku jiraan. Wax isbeddel ah ma ku aragtaa midabka biyaha ? Haddana in yar oo khal ah ku dar biyaha amooniyadu ku jirto ilaa aad aragtid isbeddel ku dhacay midab-ka biyaha. Midabka biyuhu waxay isu beddelaan bunni madow xiga marka amooniya (Beys) biyaha lagu daro. Sidan waxa lagu hubsadaa beysyada. Marka khalka (Asiidh) lagu daro biyaha ay amooniyadu ku jirto, mi-

dabkii biyuhu waxuu dib isugú beddelaa casaan khafiif ah. Sidanna waxa tagu hubsadaa asiidhada.

**Tijaabo :**

Dhibic ama in yar oo atariyam haydarogsaydh ah, ama kaaliyam haydarogsaydh ah faraha ku masax. Mu-xuu u eg yahay ?

**Qeexid :**

Beysku waa iskudhis kimikaad oo astaamahan leh :

- a) Hadduu beysku milme yahay, wuxuu faraha uga silbadaa sida saabuunta. (Iska jir inta aanad taaban bey-syada, waa in la badhxaa, haddii kale jidhkey goyneysaa).
- b) Hadduu milme ku yahay biyaha, warqadda lit-mas cas, wuxuu u beddelaa buluug ama midabka calanka.
- c) In uu fasaqo asiidha oo ay sameeyaan cusbo iyo biyo kaliya.

Astaamaha kor ku qoran iskudhiska kimikaad ee lagaga helo baa la dhahaa Beys.

**Beysaska :**

Waa iskudhisyo kimikaad oo ka sameysan ogsaydhka, ama haydarogsaydhka biri leedahay oo la falgala, fasa-qana asiidha, dabadeed sameeya cusbo iyo biyo oo kali ah.

**SAMAYSKA ASIIDHADA IYO BEYSYADA**

Marka haddaba curiyaha ogsijiin uu la falgalo biro-ma-ahe waxaa sameysma iskudhisyo la dhaho Ogsaydhyo biro-ma-ahe.

a) Kaarboon + Ogsijiin ——— Kaarboon laba ogsaydh.



b) Salfar + Ogsijiin ——— Salfar laba ogsaydh.



c) N<sub>2</sub> + 2O<sub>2</sub> ——— 2 NO<sub>2</sub>

Naytaro- + Ogsijiin ——— Naytarojiin laba Ogsaydh  
jiin

d) P<sub>4</sub> + 5 O<sub>2</sub> ——— 2 P<sub>2</sub>O<sub>5</sub>

Fosfoor + Ogsijiin ——— Fosfoor shan ogsaydh

Marka ogsijiin ay la falgasho curiyaalka birta ah,  
ogsaydhyada ka samaysma waxa la dhahaa Bir Ogsaydh-  
yo, sida :

a) 4 Na + 2O<sub>2</sub> ——— 2 Na<sub>2</sub>O<sub>2</sub>

Naatariyam + Ogsijiin ——— Naatariyam laba ogsaydh

b) 4 K + O<sub>2</sub> ——— 2 K<sub>2</sub>O

Kaaliyam + Ogsijiin ——— Kaaliyam Ogsaydh.

c) 2 Cu + O<sub>2</sub> ——— 2 CuO

Kubram + Ogsijiin ——— Kubram ogsaydh.

d) 2 Ca + O<sub>2</sub> ——— 2 CaO

Kaalsiyam + Ogsijiin ——— Kaalsiyam Ogsaydh.

Guud ahaan iskudhisyada bir ogsaydh ahí waxay yi-  
hiin beysyo, sidaa darteed, baa loo dhahaa Ogsaydhyada  
Beysyada ah. Ogsaydhyaha bir-ma-ahe astaamahoodu  
waa kuwa asiidha, sidaa darteed baa loo dhahaa Ogsaydh-  
yada asiidhyada.

Ogsaydhyada ku milma biyaha waxay la falgalaan biyaha oo dabadeed waxay sameeyaan wax loo yaqaan «Alkali». Magaca guud ee kimikaad ee la dhaho alkali waa haydaroggsaydhyo ku milma biyaha.

Tusaale :

- a) Naatariyam + Biyo ————— Naatariyam  
 Ogsaydh. haydarogsaydh.

Na<sub>2</sub>O + H<sub>2</sub>O ————— 2 NaOH.


b) K<sub>2</sub>O + H<sub>2</sub>O ————— 2KOH  
 Kaaliyam + Biyo Kaaliyam  
 Ogsaydh. haydarogsaydh.

c) CaO + H<sub>2</sub>O ————— Ca(OH)<sub>2</sub>.  
 Kaalsiyam + Biyo Kaalsiyam  
 Ogsaydh. haydarogsaydh.


Milanka kaalsiyam haydarogsaydh had iyo jeer waa loo yaqaan Biyo Nuuradeed. Alkaliyada ugu horraan milmaa waa naatariyam haydarogsaydh (NaOH), kaaliyam haydarogsaydh (KOH) iyo amooniyam haydarogsaydh (NH<sub>4</sub>OH). Marka Ogsaydhka asiidhu ay ku milmaan biyo waxay bixiyaan asiidho.

- a)  $\text{CO}_2 + \text{H}_2\text{O} \rightarrow \text{H}_2\text{CO}_3$   
 Kaarboon + Biyo Kaarboonik asiidh  
 labo' ogsaydh

b)  $\text{SO}_3 + \text{H}_2\text{O} \rightarrow \text{H}_2\text{SO}_4$   
 Saltar sadex + Biyo Saifiyuurik asiidh  
 Ogsaydh



Naytarojiin + Biyo Naytarik asiidh  
laba ogsaydh









Fosfoor shan Fosfoor Ogsaydh Fosfoorik asiidh:

### CUSBOOYINKA






Iskudhiska samaysma marka asiidh iyo beys is dhex-dhexaadiyaan ama biri la falgasho asiidhyada oo ay ka saarto atammada haydarojiinta ah baa la dhahaa cusbosida :

A) Dhexdhexaadiska asiidh iyo beys:







B. Ka saāridda birtu ka saarto atammada haydarojiin ee ku jira asiidhada :




Isle'egyada giddigood haddii aad u fiirsatid waxaad arki in maxsuulku yahay cusbo iyo haydarojiin baxaysa.

Haddii asiidhyadu ay leeyihiin dhawr atammo oo haydarojiin ah oo birtu ka saari karto, waxaa cihacda mararka qaarkood in birtu aanay wada saarin atammada haydarojiinta oo dhan. Marka sidaasi dhacdo, waxaa la dhahaa cusbada samaysatay «Cusbo asiidhan», waayo, weli atammo haydarojiin ah baa ku jira sida :



C. Cusbooyinka ásiidhan ee kale waxa ka mid ah, naatariyam laba haydarojiin fosfeyt ( $\text{NaH}_2\text{PO}_4$ ), naatariyam hal haydarojiin fosfeyt ( $\text{NaHPO}_4$ ) naatariyam haydarojiin kaarbooneyt ( $\text{NaHCO}_3$ ) iwm, .....



Cusbooyinka ay sameyso salfiyuurik asiidh waxa la dhahaa Salfeytyo, sida naatariyam salfeyt ( $\text{Na}_2\text{SO}_4$ ), Sink Salfeyt ( $\text{ZnSO}_4$ ), Baariyam Salfeyt ( $\text{BaSO}_4$ ), Kaalsiyam Salfeyt ( $\text{CaSO}_4$ ), Magniisiyam Salfeyt ( $\text{MgSO}_4$ ), iwm.

Cusbooyinka ay sameyso Naytarik asiidh waxa la dhahaa Naytareytyo sida :

Nataariyam Naytareyt ( $\text{NaNO}_3$ ).

Kubram Naytareyt [ $\text{Cu}(\text{NO}_3)_2$ ].


Kaaliyam Naytareyt ( $\text{KNO}_3$ ).

Kaalsiyam Naytareyt [ $\text{Ca}(\text{NO}_3)_2$ ], iwm.

### L a y l i :

1. Qeex. Asiidh, Beys iyo Cusbo.
2. Milan aanad garaney ayaad ku dartey birta Sink ( $\text{Zn}$ ), isla markiiba waxaad aragtay falgal bilaabmay, oo dabadeed neefi ka soo budhbudh leedahay, haddii aad neefta ku ururisid dhuun hubsasho oo dabadeed tarraq aad ku qabatid, ayaa waxaad maqashay cod u qorma «Bob». Haddaba :
  - (a) Neefta magacow.
  - (b) Milanka magacow.
  - (c) Marka neefta dhuunta ku jirta lagu qabto tarraq, falgal kimikaad ma dha-cay? Hadduu dhacay, qor isle'eggiisa oo miisaaman.
3. Sidee baad ku garanaysaa in milan yahay beys, ama asiidh haddii aad haysatid warqadda litmas? Mid walba qor midlabka uu bixiyo.
4. Qor Falgalka ka dhexdhaca birta Sink ( $\text{Zn}$ ) iyo hay-darokoloottik asiidh maxsuulkana magacow.

5. Astaamaha guud ee asiidhu waa maxay ?  
 (Meeshii lagama maarmaan ah, qor isle'eggeeda oo miisaaman).
6. Dhammee isle'egyada kimikaad ee hoos ku qoran. da-beed dheellitir.
- a)  $\text{CO} + \text{O}_2$  \_\_\_\_\_
- b)  $\text{C} + \text{O}_2$  \_\_\_\_\_
- c)  $\text{SO}_3 + \text{H}_2\text{O}$  \_\_\_\_\_
- d)  $\text{CO}_2 + \text{H}_2\text{O}$  \_\_\_\_\_
- e)  $\text{NO}_2 + \text{H}_2\text{O}$  \_\_\_\_\_
- f)  $\text{Zn} + \text{H}_2\text{SO}_4$  \_\_\_\_\_
- g)  $\text{Ca}(\text{OH})_2 + \text{HCl}$  \_\_\_\_\_
- h)  $\text{NaOH} + \text{H}_2\text{SO}_4$  \_\_\_\_\_
- j)  $\text{H}_3\text{PO}_4 + \text{NaOH}$  \_\_\_\_\_
- k)  $\text{CuO} + \text{H}_2\text{SO}_4$  \_\_\_\_\_
7. Markee bay samaysmaan cusbooyinkaashidbaad ?  
 Tusaaale bixi :
8. Miisaan isle'egyadan.



## D A N A B K A

### D A N A B K A N E G

Waxaa laga yaabaa inaad ku nooshahay ama beri uun tagtay magaalo aqallada aan faanuusyo lagu shidan. Aqalladaas waxaa lagu iftiinsadaa waxyalo ka kooban siiigye iyo dhalooyin sageefka ka soo deldelaan. Marka la iftiiminayana badhan uun baa la taabtaa.

Waxaa laga yaabaa inaad wax badan aragtay hiisae marka gugii roobku da'ayo. Waligaa adoo timahaaga oo qallalan feedhaya ma u dhaweysay ama ma taabsiisay shanlada saxaro yar yar oo la yiraahdo? Waxa kale oo laga yaabaa inaad aragtay raadiyo la gelinayoo dhagaxda bitijoorka si uu u shaqeeyo.

Waxaa kale oo aynu hore u soo sheegnay in maa-tarku uu ka dhisan yahay qaybo yar yar oo la yiraahdo Molikiyuullo una dhexeeyaan meelo bannaan. Waxaa kale oo aynu nidhi Molikiyuulladu waxay ka dhisan yihiin qaybo ka sii yar yar oo la yiraahdo Atamo. Haddaba, waa maxay xoogga qaybahaasi isu hayaa?

Tusaale:


Haddii aynu soo qaadanno loox, waxaynu odhan karnaas looxaasi wuxuu ka kooban yahay molikiyuullo. Haddii aynu dherer in ayuu goonno, waxaynu u baahanaynaa xoog weyn. Taasi waxay ina tusaysaa in molikiyuullada uu isu hayo xoog aad u laxaad weyni. Arrimahaas aynu soo sheegnay marka korka laga eego waxa la moq-

daa inaan wax ka dhexeeya jirin, hase ahaatee, qaybah oo socda waxaad ku arki doontaa in ay salka ku wada hayaan dhacdo la yiraahdo danab.

## TAMAR SOCODKA IYO DANABKA


Danabaynta:

Xaashiya aad u yar yar iyo faarad miiska dushiisa ku daadi Shanlo ama saqaf caag ah, qalin biire, buufin rabauh ah iyo baceeri qaruuraas ahna soo qaado. Shan lada ku xog tmahaaga oo gallalan ama gobal buste ah. Dabadeedna u soo dhawee faaradii iyo xaashiyihii yar-yaraa. Fiirso waxa dhaca. Maxaa dhacay? Tijaaba-



dan ku celceli intaad alaabada kale midba mar qaada-tid. Dabadeed fiirso waxa dhaca. Marka aad buufinta

isticmaalaysid horta iyada buuxi oo dabadeeuna marka  
ay foocdo afka ka xidh.



### DANABKA XOQIDDA KA DHASHA

Maxaad tijaabooyinkaas hore ku aragtay ee anladu (Saqafku) intaanad timaha ku xoqin miyey sannadu. **soo jiidatay?** mise markii aad ku xoqday ka dib ba? **soo jiidatay?** alaabadii kale ka warran? Xaashiyihii? Isaaqdeekaas ku dhacay walxahaas sidee baa loo sharaxi karo? arrintaasi mid cusub ma ahoo, ee waxaa la ruumaysan in hay in muddo hadda laga joogo 2500 Sannadood. uu aad kana faalooday nin Giriig ahoo oo la odihan jirey. Toraans. Ninkaasi wuxuu arkay in marka alaabta la yirachaa ambar (Ambarku waa xabag dhir waa hore diulka) jirtooy oo dhagaxawday. dhogor lagu koppa aad suur jidato saxarradda.

Boqolaal sano ka dib ayaa nin Sayniyahan ah oo la odhan jiray Gilbert wuxuu arkay in alaaboo badan oo kale ay iyana marka la xoqo soo jiitaan saxaradda sidii ambarka. Si uu haqqaba u tiirmaamo isbeddelka alaabadaa ku dhaca marka la isku xoqo qaarkood, ee ay la yimaadaan astaamahan la yaabka leh, ayaa wuxuu u bixiyeey Danab (Elektriko). Shayga marka la xoqo awoodda u yeesha inuu soo jiito saxarradda waxaa la yiraahdaa wuxuu sitaa danab. Dariiqada shaygu uu ku yeelan karo danabka waxaa la yiraahdaa Danabyow.


Tijaabooyinka aad soo samaysay waxa walxuhu danabka ku yeeshen Islis. Sidaa darteed, waxaa lagu magaacaabaa Danabka Isliska. Danabka gaar ahaaneed ee walxuhu yeelato waxa la yiraahdaa Saldarab Haddii aynu dib ugu noqonno tijaabooyinki waxaynu arkaynaan in shanlada iyo walxaha kaleba ay iyaka uuni yeeshaan ka, taas oo iyo baah loo 'Sidaas dar

MIRA KUNARAKA NEG

Gobal warqad adag ah soo gaado oo dherer iskugu laab laba meelood ka dalochi dhaan ku xidh. Dunta meel ka soo lul sida aad jaantuska. Astid. Laba shanlo oo caag ah ama sabarad caag an so. Mid walba gobol buste ah ama timahaaga oo inga. Gu xoq. Midkood gabalkii warqadda ahaa geli. Muday joogsanayso. Shanladii ama sabaraddii labaad u si dhawee tij soo lulatay. Fiirso waxa dhaca. Maxaa dha ca? Dhawr goor ku celceli ilaa aad kalsooni gaadhid.



Laba sabaradood oo qaruurad ah (Kuwo yar yar) soo qaado. Labada maro xariir ah ku xoq. Mid warqaddii adkeed ee soo lulatay geli intaad shanladii caagga ahayd ka saartid. Tii kalena u soo dhawee. Fiirso waxa, dhaca. Maxaa dhacay?



Haddana shanladii, caagga ahayd oo aad buste ku xoqday soe quudo. Qofradadii soo lutatay geli, sabaradadii qaruuradda ahaydha maro xariir ah ku xoq oo u dha-

wee si uu baagegaa ahayd. Uffiri waxa dhaca maxaa dha-cay?




Hase ee xiyumu u soo aragnay in shanlada caagga ah markaas oo qaybiye ama timaha ay yeelato danab oo ay squalooyin sawaridda iyo xaashiyaha. Haddaba markaas oo qaybiye keenay laba shuno oo cang ah oo leh sal-danabta. Isku idka ah way kala dideen. Sidaas oo kale markaas oo qaybiye isu keenay laba sabaradood ee qaruuradda oo leh xidhabe isku mid ah iyana way kala dideen. Hase ee xiyumu markaas caagga iyo qaruuradda oo labaduba danabta oo la isu keenay way isa soo jiiteen. Markaas sida oo qaybiye laba shuno oo cang ahi saldanab isku mid ah ayrii loo qaybiye labada sabaradood ee qaruuradda ahina oo qay bihiin saldanab isku mid ah. Taasi wa-xay ka qaybiye labada saldanab isku mid ah jiba ay kala didaan.

Laakiin caaggii iyo qaruuraddii waa is jiiteen. Mar-kaa labadooda Saldanab waa kala duwan yihiin. Haddii kale oo isku mid yihiin way kala didi lahaayeen. Markii kii alaaboo badan oo kala duwan tijaabooyin lagu sameeyey, waxa la arkay in wixii saldanab leh ay u kala ba-xaan: Kuwo qaruuradda soo jiita kana dida caagga iyo kuwo caagga soo jiita kana dida qaruuradda. Taasi macnaheedu wuxuu yahay qaar waxay leeyihin Sal-danabka caagga, kuwa kalena saldanabka qaruuradda.

Saldanabka shanlada caagga ahi ay yeelato marka lagu xoqo buste ama timo kaleba waxaa la yiraahdaa Sal-danab Tabane ah. Taa Qaruuraddu yeelato märka lagu xoqo mara xariir ahna waxaa la yiraahdaa Saldanab to-gane ah. Arrimahan kor ku xusan waxaan ku soo ururin karnaa Xeerka danabka Neg oo odhanaya: Danabka is-ku mid ahina way kala didaan, kuwa kala duwanina way isa soo jiitaan.

### T i j a a b o

Waxaad soo qaadataa labo buufimo, miiqdun ah, iyo gabal yar oo buste ah ama shay dhogor ah oo kale. La-bada buufimood neefec dabadeedna afka laba miiq oo dun ah kaga kala xidh. Meel ka soo lul, hubi inay labada buufimood ay istaabanyaan. Labada buufimood mid kasta ku xoq gobolkii bustaha ahaa. Fiiri waxa dhaca. Maxay u kala dideen? marka labada buufimood lagu kala xoqo bustaha waxay yeeshaan Saldanab Tabane ah oo isku mid ah, sidaas darteed waa ay kala dideen?




## ARAGTIDA ELEKTAROONNADA

Markii shanladii caagga ahayd lagu xoqay dhogor ama timaha waxay soo jiidatay Saxraddii iyo warqadiihii yar yaraa. Sidaa oo kale Sabaraddii qaruuradda ahayd marka-lagu xuqay marada xariirta ah waxay soo jiidatay Saxaraddii iyo warqadiihii. Haddaba labaduba waxay yeesheen Saldanab. Saldanabka ta caagga waxay-nu nidihi waa tabane ta qaruuraddana waa togane.

Haddaba, sidee baa arrintaas loo sharxi karaa? Arrintaas waxay ku xidhan tahay dhismaha maatarka. Waxaa la rumaysan yahay in maatarku ka kooban yahay qaybo yar yar oo la yiraahdo Atamo. Atamada wal-xaha oo dhami isku mid ma aha ee waa kala duwan yihiin. Tusaale : Atamka haydarojiintu la mid maaha ka ogsijinta. Kubraamkuna la mid maaha ka Neytorojiinta. Muddo badan ayaa saynisyahannadu u haysteen in Atamka aan la sii qaybin karin oo ay rumaysnaayeen in atamka aan la sii qaybin karin oo ay rumaysnaayeen yimid eray Giriig ah co mienhiisu yahay ma qaybsame. Qarnigii 19aad dabayaqaadiisii ayaa tijaabooyin badan la sameeyey. Taasna waxaa la ogAADAY in atamku uu

# ATOM

- ⊖ Elektaroon
- ⊕ Barootoon
- Niyutaroon



ka koohan yahay qaybo yar yar lana qaybin karo.

Qaybaha uu ka kooban yahay atamka waxaa lagu magacaabaa Elektaroono, Borootono iyo Niyutaroono. Borotonada iyo niyutaroonaadu aad bay isugu dhisan yihii. Borootonada iyo niyutaroonaadu aad bay uga weyn yihii Elektaroonada, hase ahaatee way ka mug yar vibiin. Borootonada iyo niyutariinaadu waxay yihii bu'da atamka. Elektaroonada waxay ku wareegsan yihii bu'da atamka. Elektaroonada waxay leeyahiin Saldanab Tabane ah, waana xaddiga danabka ugu yar. Sidaa darteed waxaa loo qaataa Hal. Borootonada waxay leeyahiin Saldanab le'eg ta Elektaroonada, hase ahaatee waa midka duwan waana togane.

Niyutaroonaadu iyaku ma laha saldanab. Sidaa darteed waa dhexdhexaad. Elektaroonada iyo borootonada atamku way is jiitaan waayo Saldanabkooda aya a kala duwan, taas ayaana isu haysa. Elektaroonada waa isku wada mid atamkasta ha ka mid ahaadeene. Taa macnaheedu waxaa weeye Elektaroonada Atamka Haydarojiinta iyo ogsijiinta waa isku mid. Sidaas oo kale ayaa borootoonaduna iskugu mid yihii, Niyutaroonaduna iskugu mid yihii.

## DANABKA ATAMKA WAA MAXAY:?

Atamku waxaa aynu niidhi wuxuu ka kooban yahay Elektaroonno, Borotonno iyo Niyuutaroonno. Marka maa Saladanabkiisu noqonayaa? Ma tabane, mise togane? Mise dhexdhixaad? Atamku marka uu caadiga yahay Saladanab ma laha ee waa dhexdhixaad. Tirada Elektaroonada iyo Borotoonada ee Atamku ka kooban yahay way is le'eg yihiin marka uu dhexdhixaadka yahay. Taas macnaheedu wuxuu yahay Saladanabka tabanaha ah ee Elektaroonada ayaa le'eg ka borotoonada ee toganaha ah dabadeedra way is dheelitirayn. Taasi waxay keentay in Atamku wax saladanab ah oo dheeraad ah aanu lahayn ee uu dhexdhixaad yahay.

## MAXAA WALAXDA DANABKA U YEELA?



Waxaa jira in Sabaradda caagga ah iyo ta qaruurada ahiba ayna lahayn Saladanabka marka ay caadiga yihiin. Haddaba xaggee buu ka yimid danabku marka sabaradaha lagu xoqo bustaha ama marada xariirta ah? Sida kaliya tu ku imaan karaa waa iyada oo dheelitirarkii labada saladanab ee Elektaroonka iyo Borotoonka uu isbeddelo. Taas oo ah in Elektaroonada laga qaado shaygii narkaasna shaygu yeesho Saladanab togane ah ama iyada oo Elektaroonada lagu daro shaygii oo markaas tiradii Elektaroonadu ka bataan tirada borotoonada ee shayga. Markaasna shaygu Saladanab tabane ah yeesho.

Inta aa, laysku Xop


Xop

Marka laysku Xop

Xop






Buste



Buste (Saldans  
togaone ah)

Sabarad caag ah

Sabarad caag ah  
(Saldans tabane ah)



Karir  
(Saldans taban  
ah)

Sabarad guraad ah

Borotoonada atamadu waxay yihii xudunta atama-da si hawl yarna loogama saari karo. Sidaas darteed marka shay uu Saldanab yeesho waxaa ku biiray Elektarooma ama way ka (tageen) oo ka maçan yihii Aan soo qaadno Sabaraddii caagga ahayd ee timaha lagu xoqay ee yeelatay Saldanabka tabanaha ah. Sidee bay taasi u dhacday? Mar haddii Sabaraddu yeelatay Saldanab tabane waxaa la odhan karaa waxaa ku soo kor-dhay Elektaroonho dheeraad ah. Xaggee bay ka yimaadeen? Elektaroonnadu waxay ka yimaadeen bustihii lagu xoqay.

Qaruuraddii iyadu markii marada xariirta ahayd lagu xoqay waxay yeelatay Saldanab togane ah. Markaas waxaa ka lumay Elektaroonno kuwaas oo ay qaadataay maradii xariirta ahayd ee lagu xoqay (eeg jaantuska hore.)

Guud ahaan waxaa dhaliya Saldanabka walaxda qaadidda Elektaroonnada ee mid laga qaado midna loo gudbiyc. Shayga ay ka tageen Elektaroonadu wuxuu yagudbiyo. Shayga ay ka tageen Elektaroonadu wuxuu yeeshaa Saldanab togane, ka ay u tageerna Saldanab tabane ah. Si kale haddii loo eego waxa la odhen karaa isku xoqidda laba shay waxay u baahan tahay tamar. Markaas tamarta Socodka ee muruqyada ayaa loo rooga tamarta danabka ee shaygu yeeshay.

### GUDBIYAYAASHA IYO MA-GUDBIYAYAASHA:

Middi aan daab lahayn qaado oo maro ku xoq. Xaashiyo yar yar iyo saxaro u soo dhawee. Ma soo jiidataay? Maya? Haddii mid daab caag ah leh soo qaaddo oo maro ku xoqdo dabadeedna xaashiyihii iyo saxaradlii u dhawee. Maxaa dhacay? Ma soo jiidataay? Haa. Haddaba maxaa middida aan daabka lahayni saxaradda u soo jiidan wey-

day? Jawaabtu laba mid uun bay noqon kartaa. Waa midda hore ah, middidu danab ma yeelato marka la xoqo. Waa midda labaad eh, middidu danab way yeelataa ee wuu ka tarfaa.

Fii waxaa beeniyey tijaabadii aan ku sameeeyey danabka leh, waana tii soo jiidatay sa-xarad xooqay. Sidaas darteed ta dambe ayaa had oo danabku middida aan daabka lahayn wu gacantaada kiijin middida daabka leh danabku kama lumen oo lai udbin ee waa tii saxafaddii soo jiidatay. Waayo daabk cangga ayaa u oggolaan waayey in danabku dhe: uu gacanta raaco.

Alaabda ay yihiin Jaandiga Silfarta, Kubranka, birta oo dhaxay waxay oggolaadaan in uu danabku dhex maro. Kuwas waxaa la yiraahdaa gudbiyaal. Alaabta ay ka mid yihiin: Caagga, Looxa iyo rada ma oggolaadaan in uu danabku dhexmaro. Kuwas waxaa loo yiraahdaa ma gudbiyayaal.

### SIDEE LOO OGAADAA DANABKA SHAYGA:


Maxaa lagu ogaadaa in shay uu leeyahay danab, iyo in kale? hore waxaan u soo aragnay in sabaraddii marka aan bustaha lagu xoqin aanay saxaraddii soo jiidan, marka lagu xoqayna ay soo jiidatay. Markaas waxaa la odhan karaa saxaraddii waxay ina tuseen in Sabaraddii leedahay danab iyo in kale? Haddaba waxa jira qalab sidaas oo kale u muujiya danabka oo fikradaas ku shaqee-ya. Qalabkaas waxaa la yiraahdaa Danab-Tuse.

### DANAB — TUSE KUBBAD DHUUX

Qalabkani wuxuu ka kooban yahay kubbad yar oo laga sameeyey dhuuxa qaranka galleyda ama hadhuudh-


ka oo miiq dun ah lagu xidhay oo meel laga soo lulay. Samay danabka-tuse oo tijaabadaan raac.

Soo qaado dhuuxo jirridda galayda. Dhuuxaas oo qalalan qayb ka mid ah qaado oo isku cadaadi. Markaas ka samee kubbad dhexroor yar. Dabadeed ku xidh dun dherkeedu 15sm yahay? Meel ka soo lul. Sabaraddii caagga ahayd iyo Sabaraddii qaruuradda ahayd soo qaado oo ku kala xoq dhogor iyo maro xaviir ah. Midba mar u dhawee kabbaddii oo u fiirso waxa dhaca. Maxaa dha-cay? Laba Sabaradooba kubbaddii way soo jiiteen. Marka ay kubbaddu taabato Sabaradaha dib ayey haddana u booddaa waayo? Marka ay kubbaddu taabato shaygii saldanabka lahaa waxay yeelataa saldanab la mid ah. Sidaas darteed way kala didaan oo dib bay u kala boodaan.



## DANABTUSE AAD SAMAYSAN KARTID

Waxaad sco qaadataa dhalo aan midab lahayn oo af yar, fur buush ah, silig ah, laba baal oo warqadda alluminamka ah ee Kubram xanjada dheer ku dahaaran shanlo caag ah iyo gabal buste ah, sida aad jaantuska (3) ku aragtid u samayso danabtusaha.



Danabtusuhu waa qalab ina tusa in shay danab leeyahay iyo in kale iyo caynadda danabka. Si danabtusuhu inoogu muujiyo caynadda danabka ee shaygu leeyahay waxaa loo baahan yahay in danabtusaha marka hore asaga la danabeeyo lana yaqaanno danabka uu' sito.

### **Sida danabtusaha loogu yeelo Saldanab togane ah:**

U fiirso tusaalooyinka jaantusaha (t) uu muujinayo. Shanlo caag ah oo aad ku xoqday gobol buste ah oo markaas ay yeelatay Saldanab togane ah u soo dhawee mada-xa silig Kubram ah ee danabtusaha, hase taabsiin. Elektaroonadii silingga madaxiisa degganaa waxay u diideen inaad uusiga hcoose ama warqadda aluminamka ah. sida jaantuska (t) eed ku cragtid. Taasi waxay dhalisaa in labadii baal ee warqaddu ay yeeshaan Saldanab isku mid ah. dabadeedna ay kala didaan.

Adiga oo weli shanladii meesheedii ku haya, taabo caaradda Silingga Naxaasta ah oo fartaada saar. Elektarconnadii waxay markaas raacaan gacantaada oo dhulka ayey cabtaan, (Fiiri jaantustaa t). Labadii baal ee warqadda aluminamka ahi waa ay isku soo dhaceen. Fartaadii ka qaad silingga, dabadeedna shanladii ka kax. Baalashii warqaddu waa ay kala dideen. (Fiiri jaantusta t). oo ah iyaka oo yeeshay saldanab isku lid ah ama saldanab togane an. Taas waxa dhaliya tegidda ay elektaroonadu ka tageen oo ay fartii raaceen, dabadeedna dhulka galeen. Markaas waxa kuu dhan danabtusihii oo Saldanab togane ah sita, una diyaar ah in la adeegsado.


Haddii madaxa salingga Kubramka ah loo soo dha-weeyo shay leh Saldanab tabane ah, hase ahaatee aan la

taabsiin, baalashii warqaddu waa ay isku dhacaan. Haddii shay Saldanab togane ah leh loo dhaweyona baalashii warqaddu waa ay kala didaan. Haddiiba dib u danabee danabtusihii adoo u yeelayo saldanab tabane ah. Dabadeedna u soo dhawee alaabadan oo laba laba. xariir iyo qurayyad rabadh iyo hogor (buste).

**Tijaabadaan Samay Dabadeedna isku day inaad Fasiri**  
**Kartid waxa dhaca:**

T i j a a d a b o

Xaashi soo qaado oo ka gooso gabal dhererkiisu yahay 16sm balaciisun: yahay 6sm dhexda iskaga jebi oo mastaraad qori ah kala dhex geli: Gobolkii buste ama maro dhogor aji ku xoq. Mastaraddii kor u qaad oo u fiirso waxa dhaca. Shanlo caag ah ama qalin biiro ah timahaaga ku xoq dabadeed labada baal ee warqadda ah kala dhex geli oo kor u qaad. Maxaa dhacay? ku celceli tijaabada ilaa aad kalsooni gaadhid. Sabaraddii qaruuradda ahayd maro xariir ah ku xoq, dabadeed xaa-shida dhex goli. Ku celceli tijaabada ilaa aad kalsooni gaadhid. Maxaa tijaabadani ku tusaysaa? Shanladu waxay Saldanab tabane ah ayey leedahay. Dhuunta qaruuradda ah (Sabarad) waxay leedahay Saldanab togane. Sidee baa loo fasiri karaa arrimahaas?




### Saaqidda Saldanabka ee danab Neg:

Hore waxaa aynu' nidhi shay waliba wuxuu ka dhisan yahay Atamo. Atam walibana wuxuu ka sii dhisan ya hay elektaroono, borotoono iyo Niyutaroono. Borotoo.

nadu waxay leeyihiiin Saldanab toogane ah. Elektaroodu nadu waxay leeyihiiin Saldanab tabane ah. Niyuutaroonadu waa dhexdhexaad. Marka atamku uu deggan yahay ee uu dheelitiran yahay, tirada elektaroonadu iyo borotoonadu way isle'eg yihiin.

Haddaba, haddii dheelitiranka atamku uu lumo Saldanab ayuu yeelan karaa. Taas oo ah haddii tirada elektaroonadu ay ka bataan borotoonada walxuhu waxay yee-lataa Saldanab tabane ah. Haddii ay borotoonadu ka togane ah. Markaas danabaynta kala duwanina way isa togane ah. Markaas danabaynta kala dumanina way isa soo jiitaan, kuwii isku mid ahina way kala didaan. Haddaba soo qaado laba kubblood oo dhinaca isku haya. **Ka** soo lul mid kasta dun **xariir** ah dabadeedna u soo **dha-wee** sabarad caag ah oo aad ku xoqday buste. Maxaa dhacay ?



J.T. 2.12

Marka loo dhaweyyo Sabaraddii danabaysnayd laba kubbadood, waxaa dhaca in elektaroonadu ka yaacaan dhinacii kabbadda soo xigtay Sabaradda waayo waa isku Saldanab wuxuuna yeeshaa Saldanab tabane ah. Markaas waxay tagaan dhinaca kale taas oo ay dhinacaas ku bataan. Dhinaca ay ka tageen waxa bata borotoonada, sidaas darteed wuxuu yeedha Saldanab togane ah sida aad jaantuska sare aragtid. Danabaynta sidaa ah ee shay danab lehi uu danabeeyo snay kale marka loo soo dhaweyyo isaga oo aan la taabsiin waxa la yidhaah-daa saaqida Saldanabka danabka neg.

### Danab Tiranka

Marka shay danab lahaa uu ka lumo danabkii ee uu noo do dhexdhexaad waxaa la yiraahdaa wuu danab tirmay. Markii marciisa daabka lahayn ku xoqday maro ee aan u dhoweyney saxaradda waa soo jiidan weyday, taas oo ina tusaysaa inaanay danaa lahayn. Taas waxaa vgu wacan iyada oo danabkii raacav gacanta oo dhulka aaday, waayo middida daabka lahayn oo gudbiye ah. Sidaas darteed, waxaan edhanayaa middidii way danab tirantay.

Marka shay saldanab tabane ah leh aad taabatid, elektaroonadii ayaa shayga ka yimaada oo gacanta soo raace, oo dabadeedna dhulka aado. Haddii uu shaygu leeshay Saldanab togane ah, elektaroono avaa dhulka ka yimaada oo beddela danabkii toganaha ahaa ee shaygu sitay. Sidaas darteed walaxdii waxay noqotaa dhexdhexaad.

### DANAB TIRMAY DARUURAH (Hollade):

Waxa laga yaabaa inaad wax badan aragtay hillaaec marke gu'gii roobabka waaweyni da'ayaan. Haddaba,


maxaa dhaliya hillaac? Marka hawadu kululaato ee heerkulkeedu kordho, way fududaataa oo kor bay u kac-daa. Dabadeed waxaa soo beddesha oo soo dhacda tu qabow oo culus. Marka hawadu ay isdhaafayso ayaa molikuyuulladu isku xoçmaan. Taasi waxay dhalisaa in elektaroonada molikiyuullada qaarkood ka lumaan qaarkoodna ku bataan. Halkaas waxaa ka dhasha danab, duruurtana xaggeeda sarreeyey waxay yeeilataa saldanab togane ah, xaggeeda hooseeyaana saidanab tabane ah, Dabadeed, daruurtii dhulkii ay dul joogtay ayey ku saq-daa saldanab togane ah.

Waxaa aynu ognahay in labada danab ee kala-du-wani ay isa soo jiitaan. Sidaas darteed ayaa marka xoo-gaggaas danabku aad u weynaado, ayaa elektaroonadii daruurtii dhulka ku soo boodaan, oo danab tiran dhacaa. Sidaas ayuu hillaacu u dhashaa, markaas ayeynu hillaac aragnaa onkodkaana maqalnaa. Marmarka qaarkood, daruurtta xaggeeda hoose ee dhulka soo xiga ayaa yeesha Saldanab togane ah. Taas oo dhulkii ku saaqa saldanab tabane ah. Labada goorba elektaroonada u kala boodaya dhulka iyo daruurtta ayaa dhaliya hillaac. Sida badan wäxa hillaacu ka dhashaa elektaroonada u kala boodaya laba daruurood oo sal danab kala duwan leh.

Daruurta iyo dhulka waxa u dhexeeya hawo, taas oo ma gudbiye ah oo elektaroonadu aanay si fiican u dhexmari kareyn. Danabka aad u laxaad weyni wuxuu ku qasbaa hawada inuu dhexmaro. Taasi waxay dhalisaa in hawadii ay kululaato ilaysna bixiso iyo inay fiddo oo ay kor u baxdo waayo cadaadiskeedii ayaa yaraaday. Markaas waxaa dhaca in hawadii u dhaweyd ay ku soo yaacdo meeshii tii hore banaysay oo halkaas ay ka dhala-to jabaqdii taas oo onkod la yidhaahdo.

Badanaaba danab tiranku wuxuu ku dhacaa dhirta

iyo daaraha dhaadheer waayo iyaku dhulka kale ayey uga dhaw yiliin daruurta danabna way yeeshaan sida dhulka kale. Haddaba waxaa habboon in marka roobabka hillaca lehi ay da'ayaan in laga fogaado geedaha dnaadheer iyo meelaha biyaha badani ay ku jiraan sida baatiyada



### SIDEE AQALLADA LOOGA ILAALIYAA HILLACA

Si khasaaraba danab tiranka laxaadka weyni uu geysto daaraha looga foojignaado, waxaa laga dultaagaa sabarad dheer oo bir ah. Sabaraddaas oo dhulka loogu aaso bir ballaadhan.

Sidee bay daaraha uga badbaadisaa danabtiranka? Marka hore Sabaraddu waa ka dheer tahay aqalka. Si-daas darteed, iyada ayuun baa danabtiranku ku dhacaa. Waa marka labaad eh, iyadu waa bir oo si fiican bay elektaroonadii dhulka ugu gudbisaa. Waa marka sad-dexaad eh, waxaa jira in danabku aanu oogooyinka wal-xaha si isle'eg ugu wada baahin. Taas waxaa looga jee-daa, tusaale; haddii walax oogadeedu kubbad tahay oo ay leedahayna danab, danabku si isle'eg ayuu ugu wada baahaa oogada.



Haddiise ay walaxdu leedahay caaro dhuuban, danabku wuxu isugu tagaa kuna bataa caaradda. Sidaas oo kalena way ka hor qaadataa oogooyinka kale marka danabeeeyo. Haddaba Sabaraddu way af fiican tahay oo marka daruurtii ay ku saaqdo danab, daartii iyo sabaraddii, ayaa danabkii isugu uruuraa. Sabaradda cihifkeeda oo halkaas uu ka baahaa. Taas ayaa ka ilaalisa in danab laxaad weyni uu ku sameeyo daarta qudheeda oo markaas danabtiran ka dhaco, kaas oo daartii waxyeelo weyn u geysata.

### L A Y L I:

#### Ka jawaab su'aalahaan soo socda buuggase ha ku qorin:

- 1) Maxaa la yiraahdda danab ka dhasha isliska?
- 2) Labada Saldanab ee danabka Neg maxay kala yihiiin?
- 3) Maxaa la yidhahdaa dariiqada walax loogu yeelo danab?
- 4) Sheeg xeerka danabka Neg?
- 5) Maxaa looga jeedaa erayada gudbiye?
- 6) Aatamku marka u dheelitiranka yahay danab ma leeyahay?
- 7) Sidee loo sharxi karaa marka sabaradda caagga ah ay yeelato saldanab tabane ah. sabaradda quraaradda ahina Saldanab togane ah?
- 8) Niyuutaroonnadu danab ma leeyihiiin ?
- 9) Maxaa la yiraahdaa qalabka lagu ogado in walax danab leeyahay iyo in kale? Sidee banna loogu yeeli karaa Saldanab togane ah?


## 2) DANABKA QULQULA:

Haddii elektaroon lagu caado atam, dhextaexaad ah. Ataykii wuxuu yecnahu saldanab togane ah. Haddii lagu daran wuxuu yeesnah saldanab tabane ah.

Waxaa weliisa waxay ku kooban tahay Atamo. Atam, mada walaxdaa waxay loeyihin elektaroonno. Haddii Atammada walaxda ay ka lumaan elektaroonno waxaa yeelataa Saldatub logane ah. Haddii Alammada walaxda ay ku koochuu elektaroonno waxay yeelataa saldanab tabane ah. Labadil shugaa saldanab isku mid ah lihi way kala dida, labadil kala duwani way isa soo jiitaan, nayaan nha kala didineya.

### Tafsiir

Waxaad soo gaadat�aa laba daasadood oo dhaadheer oo kuwa sididii oo kale ah. Labadaba meel gunta dhow ku daacod sida jaantuska aad ku aragtid. Dhuun gaaban oo rabadh ah, ama caag soo qaado. Dalooli mid-kood gelina dhuuntii, xanjona ku aabudh dalbolka harere- rahiisa. Qoiga dharka lagu qabto marka ja wadho, dhuunta dhenda kaga qabo. Dabadeed afkeeda kale dalooli daasadda geli oo sidii oo kale xanjo ku aabudh. Labada daasadood midkood biyo ka buuxi, dabadeedna biinki ka fur dhuunta. Fiirso waxa dhaca. Biyihii ma ku shubmeen daasaddii kalé? Markee bay biyihii ku



jira labada daasadoo ma isleeg yihiin marka biyuhu ay  
ka joogsadaan daasaddii ay ku shubmaveen?

### **Tijaabo Tusinaysa Sida Danabku u Socdo.**

Waxaad soo qaadato... (isid - okuwa caanaha ama  
saliidda lagu shubo). Siligga labadiisa däcal mid ka xir daasadda afkeeda, adoo  
biinka dharka ku qabanaaya. Daasadda dul dhig ga-

ruurad nadiif ah. Shanlo soo qaado oo ku xoq gobol bus-te ah. Dabadeedna hadba taabsii daasadda, si daasaddu danab u yeelato. Marka aad daasaddii danab u yeeshid, biinkii qabo oo siligga taabsii danabtusaha sida aad jaantuska ku aragtid. Maxaa baalkii danabtusaha ku dha-cay marka aad siligga taabsiisid danabtusaha? Labadii baal way kala tageen, waayo?

Daasadda danabka yeelatay markii lagu xidhiidhiyo danabtusaha Silingga Kubramka ah (gudbiye) la isugu xidhay danabki wuu raacay gudbiyihii Kubramka ahaa: Taasi waxay ina tustay danabtusaha oo baalalkiisii kala tageen markey danab yeesheen.

## GABAGABO

Waxaynu aragnay sidii ay biyihii uga soo shubmeen daasaddii ay ku jireen oo ay ugu qulqulayeen tii madhnayd. Qudqulladaas biyaha oo ay dhalisay kala saraynta heerka biyaha ama cadaadiska biyaha. Markii laba-dii heer ee biyaha labada daasadood ku jiray isle'ekaadeen, qulquliddii biyuhu waa istaagtay. Markaa biyaha waxa dhuunta raaciyye faraqa u dhixeyya labada cadaadis ee biyaha. Sidaa oo kale markii lagu xiray daasad-dii (Saldanab tabane lahayd) danabtusaha, wuxuu danabkii u tagey danabtusaha ee aan markii hore waxba lahayn.

Taasi waxaa inoo muujiyey caleemihii danabtusaha oo markay yeesheen 3 saldanab oo isku mid ah kala did-day. Danabka qulqulaayaa wuxuu ka kooban yahay elektaroonno ka tagey meelaha ay ku badan yihiin oo tagaaya meelaha ay ku badan yihiin oo tagaaya meelaha ay ku yar yihiin.

taroono ka tagey meelaha ay ku badan yihiin oo tagaaya meelaha ay ku badan yihiin oo tagaaya meelaha ay ku yar yihiin.

Markaa waxaa tijinbaa wadaa isaga muori karaa in marka la isku xidhiidhiyo. Imaan si ayaa qofkaa elektaroodoo ku badan yihiin midna kii xidhiidhi oo u baahay ay elektaroonnadu ka tagaan halka ay ku belooyihiin oo aadaan halka ay ku yar yihiin. Dhinac kii le hadin aynu ka eegno. Jaba shay oo jidbaa looyi biye saldanab tabane ah midna saldanab tognoo aad u baahay ah. Tagaan halka ay ku badan yihiin oo u baahay ah. Tagaan halka ay ku yar yihiin oo u baahay ah. Socodka elektaroonada wanaan taas oo ayneen u baahay qofqulka danabka. Danabkani ayuu u baahay kii duwan yahay iyada oo uu socodka. Taas iibnay si qise soced si daas ah ma laha ee yaxnihi. Taas u baahay shayga kor kiisa. Haddaba sida aynu u aragtaan in markii labada heer biyuhu isle'ekaddeon. Aardigdii biyuhu ay joogsatay ayaa elektaroonada qofqulka u baahay qoogaatlaan marka danabka labada shay oo isku xirani isle'ekaadaan. Marka si loo helo danabke qofqulka waa in la hubiyaa qulqulidda elektaroonada. Taas oo aad u baahan tahay in had iyo jeer uu jiro dheelli oo u baahay xagga danabka labada shay.

### TAMARTA KIMIKADA IYO DANABKA

Waxaa aynu nidhi hadeli la damco in la belo danabka qulqulka waa in la hubivo dheelli xagga danabka ah. Taas oo lagu gaari karo in marka elektaroonadii ka ta gaan halkii ay ku badnaa een oo ay gaaraan halka ay ku yaraadeen in laga qaado si aanu e lunin dheelligaa su. Sidee taa loo hubin karaa? Xaqqa taariikhda had daan ka eegno, markii sappduku ahnaa 1780 ayaa saynis yahan Talyaanij ah oo la odban jirey. Galfani isaga oo

maalin qalaya rah, buu rahii ku taabtay biraqaab ka dhisan laba birood oo kala jaad ah. Rahi baqtiga ahaa ayaa lugtiisii dhaqaaqday oo fig tidhi. Wxaaa la og yahay in haddii shay aina walax danab leh, la taabto qofka muruqyadiisu ay ururaan oo gacantisu sooboodo, ama sida hadda la yidhaahdo (Shoog) ba ku dhacay

oo qofkii waa wada garfiray. Sidaas darteed, markii baa wuxuu gaartay in waxaa nhaa lugtiisa dhaqaajiyey uu yahay danab Haddaam ~~waxaa~~ fasiri kari waayey sida danabkaasi u dhoshaa ~~ku~~ ~~aa~~ tu ka yimid waayo waa gaas sida qudha ee danab leh, qhalin jirey waxay ahaydisku xoqidda labo siye. Waa in jirtey in la yaqin kal luunka qaar ka mid ahi haddii le magabo uu qofka (Shoog) qabsan jirey. Sidaas awgeet waxaa uu maleeyey in rahu uu danab leeyahay. Wuxuu ku magacaabay Danabka Xayawaanku.

Tijaabadaas iyo shuraas oo Galfani bixiyey waxay xiise iyc muran ku dhalisay Saynisyahannadii waagaas. Saynisyahan isna Talyaanii ah oo la odban jidhey Folta aqoon weyna u lahaa danabka ayuu dabadeed arrintaas baadhay. Folta waxa ja quminataan weyday sharaxi Galfani ee ahaa in rahu uu danabka leeyahay. Waxay isaga la noqotay in birqaalka labada birood ee kala duwan ka dhisani ay sidaa u qayreyn dhalashada danabka. Raha lugtiisuna markii dhaqnaaqday ayey muuji say in qulqulid danab dhexmartay. Si uu haddaba u xaqijiyo warkiisa intuu rahii isakba dhaafay ayuu danabkii ka dhaliyey laba birood oo ballaadhhan oo kala nooc ah iyominan ah maawiyami dotoroydh (Nacl). Taasi waxay eaddeesay in qayreyn dhalin karo falgal Kimikaad. Isid batim ayaan dhalashadii Folta ku dayday oo iyana Samadivey nijarayn kuli duwan iyagoo adeeg sanaya bire iyo minno kaa greyan kuwi Folta.

## **Sidee Tamarta Kimikaad loogu beddelaa**

### **Tamarta Danabka:**

Waxa dhacda mar mar in Kimikada isla falgasha qaar ka mid ah elektaroonada laga qaado oo kuwo kalena loo wareejiyo. Sidaas darteed, waxa halkaa laga heli karaa laba shay oo midna saldanab tabane ah uu leeyahay ka kalena saldanab togane ah. Markaa haddii labadii Kimiko ee midna ay elektaroonada ka lumayeen midna uu kuwo dheeraad ahi uu qaadanayey loo dhexeysiyo milan gudbiye ah, dabadeedna iyana gudbiyaha kale la isugu xidho waxaa dhacda in ay elektaroonadu gudbiyaha raacaan oo ay ka guuraan halkii ay ku badnaayeen oo ay tagaan halkii ay ku yaraayeen. Soçodka ayaa waxa ka dhasha qulqul, sida aynu hore u soo sheegnay. Qalabka sidaa isugu dhisan ee tamarta kimikaad u roggatamarta danab waxaa la yiraahdaa unugga danabka kimikada.


Unugyadaasi waxay u qaybsamaan laba qaybood. Kuwo u baahan in la beddelo kimikada falgalkaa ka qayb qaadata marka wadar amar danab ahi ay ka dhalato. Wuxaan la yiraahdaa Unugyada koowaad. Kuwa kale-na waa kuwa alaabta ama walxaha falgalka qayb ka qata si hadba loo cusboonaysiyo oo qulqulidda danab la dhex mariyo. Waxana la yiraahdaa Unugyada labaad. Batariga baabuurta ayaa ka mid ah.

### **U N U G G A F O L T A :**

Unugga lagu magacaabay saynisyahankii Folta wanu ka kooban yahay laba Safeexadood oo midna kubram tahay (Cu), midna Sink (Zn); iyo baaquli biyo Salifiyuurik Asiid lehi ku jiraan waxaana la yiraahdaa gudbiye-milme waa walax (milme) marka uu biyaha ku mil-

mo gudbin kara danabka. labada Safeexadood ee kubram (Cu) iyo Sink (Zn) ahi waxay ka dhextaagan yihiin milanka ah Salfiyurik asiidka ( $H_2SO_4$ ) badhhan waxana la yiraahdaa qotinno. Marka labada qotina debedda ayaa Silig la isugu xidhiidhiyaa. Dabadeedna lagu xidhaa guluub ama nal, nalka ayaa baxa ama ifa.

Qotinku : Waa gudbiye uu danabku ka baxo ama ka galo gudbiye milanka Unugga.



### Maxaa Unugga ka dhexdhacaaya?

Atammada qotinka sinka (Zn) ahi marka ay istaabtaan gudbiye-milmaha ayey dhex galaan milankii inta ay elektaroonnadii ku reeban qotinkii sinka ahaa. Waxay markaa yeeshaan saldanab togane. Marka atam uu yeesho (Danab) oo elektaroono ka tumaan ama ay ku soo kordhaan waxaa la yiraahdaa (ayoon). Sidaa darreed, waxaa milankii dhex gala ayoono sinka ah (Zn)

oo togane ah. Salfiyūnūkī asiiħħii iyo biyihīna waxay ū kala baxxaan ayoona togane ah iyo kuwo tabane ah ayoonadīi tabanaha ahaa ayaa waxay qabtaan xaggii qotinkii kubranka ahaa dabadeedna waxay ka qaataan elektaroonaadiisa inta ay ka gaadhaan. taasi waxay keentaa in qotinkii kubramka uu yeesho saldanab togane ah. wāayo, elekfaroonadīi ayaa qaar laga qaatay. Qotinkii sinka ahaana waxa uu yeeshaa saldanab tabané ah. markaa waxa jira laba shay oo midna elektaroona yar leeyahay. haddii unugga debediisa labada qotin silig la isugu xidho elektaroonaadii waxay ka tħagħaq sinka iyako raacaya silingga oo waxay qabtan kubramka. qulqulidda elektaroonada waxa la yiraahda qulqulla danabkā. waxaa ayhu hor u soo aragnay in marka dheliga elektaroonadu uu ċunno oo elektaroonadīi latbadii walxood ee midna ay ka badnayeen midna ku yaraayeen in qulqulkii elektaronada kubramka laga qado si uu had iyo jeer uga yaraato. d'abdeebuna ay elektaroono kale uga yimaadaan qotinka Sinka ah. arrintaas waxaa qabta falgalka Kimikada ee ka dhex soċċa unugga gudhiisa. Ayoonada togane ah ayaa had iyo jeer ka qaadanaya elektaroono qotinka kubramka ah. sidaa darteed ayuu had iyo jeer togane u yahay. Marka ayoonadīi toganħha abhaa tiegħi elektaroono ayev neqdaan atamo dhuxx-bexxad ah. Taasina waxay dhalisaa in ayoonadīi to ganaha abhaa ka yaraatlaan milankā. Haddieba, marka taasi dhaedh ayaa atamo kale qotinkii sinka ahaa ka soo baxxaan oo intay elektaroonadooda ka yimħażżejju bay iyaka oo ayoonadīi togane ah milanku soo għadni. Taasina waxay dhalisaa in qotinkii Sinka ahaa uu had iyo jeer yahay tabane. Sidaa darteed ayaa qulqulidda danabka u waqtall.

### DIBBAKTOOYINKA UNUGGA FOLU

Waqt idheri ni ur-ġen Fotu azz-żewġ yahay iddi mattooyin bada li W-żejt ja kien u u marki fuq qabeli is-savu danab

haaddana joogsado. Haddii unugga lagu xidho nal, ama guluub, nalkii ama guiuubkii marka uu muddo ifo ayuu damaa. Taas oo muujinaysa in qulqulka danabku joogsado. Taas waxa ugu wacan in qotinkii tabanaha ahaa ay isku dheehdo neef la yiraahdo haydarojiin. Taasina waxay ka joojisaa inuu ka qayb qaato falgalkii Kimikaad. Taasi waxay keentaa in ay joogsato qulqulkii elektaroonadu ay ka imaanayeen qotinkii tabanaha ahaa ee tagaayey qotinkii toganaha ahaa. Taasina waxay dhalisaa in uu lumo dheellitirkii elektaroonada ee labada qotin. Marka taasi dhacdo qulouliddii elektaroonada ayaa joogsada waxaana la yiraahdaa **Cidhifow**. Taasi waxay dhalisaa inuu istaago falgalkii Kimikaad. Dhibaataada labaad waxay tahay in cotinka (Zn) ahi uu la falgaloo alaaboo kale. Milankaas (Zn) ku milmaayo, isaga oo unuggii shaqaynayo oo qulqulidda dhalinaya.


Taasi waxaa ugu wacan birta sinka oo naali ah, sidaa darteed qotinkii isaga oo saafi ah lagama samayn karo ee had iyo jeer waxa ku dhafan alaaboo kale. Milankaas uu Sinku (Zn) Ku milmaayo, isaga oo unuggii shaqaynayo, waxay dhalisaa inuu ootinkii maano darro u dhammaado oo unuggii guud ahaan u shaqayn waayo.

## UNUGGA ENGENGAN

Unugyo badan avaa la sameevev si loo beddelo dhibaatooyinka unugga Folta. Mar walba iyada co la beddelayo ootinnadjii gudbive ahaa. Unugyada waxa ka mid ah unugga lagu magacaabo unugga engeegan ee lagu isticmaalo Kaarbuunada, Raadiyowga iyo Naastara-ha. Dhismaha unugga engeegan: waxaad soo caadataa unug engeegan oo gaboobab, miishaar soo caado oo dherer ugu kala goy. Dabadeedna fiiri qaybaha unugga uu

ka kooban yahay iyo alaabta uu ka dhisan yahay. Ugu horreyn unugga waxaa ku dhaadhan qardaas. Qardaaska waxa ka hooseeya daasad yar oo ay ku jirto budo madoobi. Daasaddu waxay ka samaysan tahay birta Sinka (Zn), Sidqun unugga Folta oo waa qotinka tabanaha ah ee unugga engegan. Budada waxaa dhex-deeda ku jira ul dhuubaan oo madow. Ushaasi waxay ka samaysan tahay kaarboon. Kaarboonku wuxuu yahay qotinkii toganahaa ahaa. Haddii aad fiirisid daasadda Sink (Zn) ah waxaad hoosteeda ka arki doontaa wax ca-jin u eg oo ku dhejisan. Cajiinkaasi wuxuu ka kooban yahay iskudhiska kimikaad ee la yiraahdo Ammooniyam kalorayh ( $\text{NH}_4\text{Cl}$ ), iyo dar kale oo ku laaqlan.

Falgalka-ka dhexdhaca Sinka (Zn) iyo iskudhiska Kimikaad ah ee cajiinkaas ku jira ayaa qulqul danab ka dhalataa sida unugga Folta. Markaa, haddii la isugu xidho silig qotinka toganaha ah, elektaroonadii waxay ka tagaan qotinkaa tabanaha ah oo waxay aadaan qotinka toganaha ah iyaka oo silingga u raacaya. Sidaa ayaa qulqulidda danabku ay unugga engegan ugu dhalataa. Unugga engegani malaha dhibaatooyinka unugga Folta leeyahay oo kale. Hase ahaatee dhibaatadiisu waxay tahay haddii uu dhammaado lama cusboonaysiin karo ee waa la tuuraa. Unug engegani waa wax la qaadan karo waayo kama dhisanq wax hoor ah oo daadanaya.



J.T. 2.17

## QULQULKA JIMAYSAN

Haddii aynu dib ugu yar laabanno labadii unug ee aan ka soo hadalnay, waxaynu arkaynaa in mar walba elektaroonnadu ay ka tageyeen qotinka tabanaha ah ee ay aadayeen qotinka toganaha ah. Haddii aynu qaadanno unugga Folta waxaynu arkaynnaa in elektaroonnadu ay ka tageen qotinka sinka ( $Zn$ ) ah oo ay aadeen qotinka kobarka ( $Cu$ ) ah. Marka elektaroonnadu ay joho qudha had iyo jeer u ujeedaan oo ay u qulqulaan waxa la yiraahdaa qulqulidda danabka ee ka dhalanaysa qulqulka jihaysan. Waxaynu qaybaha dambe ku arji doonaa qulqul taas ka geddisan oo geesta ay u socoto hadba beddesha.

Unugyadu guud ahaan waxay dhaliyaan qulqul jihaysan oo toosan.

## MAREEGTA SAHLAN EE DANABKA


Si tamartu ay hawl waxtar leh u qabato waa in la xukumi karaa. Tamarta ajan la xukumin waxa ka mid ah hillaac. Sida aad aragtay hillaca cidina wax kuma qabsan karto. Haddaba si looga faa'iideysto tamarta danabka, waa in lagu dadaalaa sidii meeshii lala rabay loo gaarsiyo. Marinka jihaysarr ee qulqulku marto si meeshii lala rabay ay u gaadho waxa la yidhaahdaa Mareegta Danabka. Mareegta danabka ee ugu sahlan waxay ka kooban tahay.

- 1) Unugga uu danabka ka dhasho.
- 2) Qalab adeegsada tamarta danabka (sida nal ama galuubka)
- 3) Marin ama gudbiye danabku maro, sida Siligga kobramka (Cu) ah.

Mareegta caynkaas ah waxa lagu magacaabay mid sahlan waayo waxaa dhaeda in mar la istismaalo dhawr unug oo danabku ka dhasho iyo dhawr qalab (nal) oo ku shaceeya tamarta danabka. Marka saddexda qaybood ay isku xidhan yihiin qulqulka danabku ay socoto, waxaa la yiraahdaa Mareeg oodan. Haddiise saddexda qay-

bood aanay isku xidhmayn, qulqulku ma socdo, waxaan la yidhaahdaan Mareeg Furan. Bal hadda u fiirso sida nalka gurigaaga loo shido ama loo damiyo. Wuxaad aragtay marka la daarayo ama la shidaayo in la taabto. Iswijiyyada waxa lagu xukumaa mareegto danabka oo mar-naa lagu oodaa marna lagu furaa. Waxaa jira fureyaal

badan oo kala duwan. Kuwo badhan ah oo la cadaadiyo meel, kuwo marna sare marna hoos loo dhufto iyo kuwo la maroojiyo.




J.T. 2.18.

## Tijaboo :

Waxaad soo qaadataa kaarbuuno shaqaynaysa oo unugyada engegani ku jiraan, dabadeedna badhanka taa-bo. Maxaa dhacay? Nalkii wuu baxay markii qulquliddii dhexmaray. Haddana badhankii farta, ka qaad, maxaa dhacay, Nalkii wuu damay, waayo qulquliddii ma dhex-marayso nalka. Kaarbuunada kala furfur oo bal hadda isku day inaad kala tilmaami kartid mareegta danabka. Waxaad arki in qayb waliba ay qaybta kale ku daba xi-dhan tahay. Waxaad kale oo aad u fiirsataa galka gu-dihiisa dabadeedna bal isku day inaad arki kartid sida furuhu uu mareegta danabka marna u oodo marka nal-ku baxo, marna uu u fure oo marka nalku damo.

Haddaad Kaarbuuno waydid waxaad samaysaa qalabkan. Waxaad soo qaadataa unug engegan, nal iyo silig kabram ah. Labada dacal ee silingga dahaarka ka diir. Dabadeedna labada dacal midkood nalka dabadiisa ku mar sida aad jaantuska ku aragtid. Dacalkii kale ee silingga soo laab oo taabsii unugga salkiisa. Markaa ka dib nalka dul saar unugga salkiisa. Maxaa dhacay, Nalkii ma baxay? Bal hadda tilmaan qayba-ha mareegta danabka. Marka aanay isku wada xidh-mayn miyuu nalku baxaa? Hadda fiiri nalka gudihiisa, waxaa ah xaasaw yar. Labada dacal ee xaasawdaasi midna waxay ku xidhan tahay madaxa nalka ee maraara-ha leh, midna waxay ku xidhan tahay figta Nalka.



J.T. 2.19

### Saddex Arrimood oo sameeyaa qulqulka danabka:

Marka laba shay oo midna elektaroonadu ay ku bandan yahay oo saldanab tabane ah leh, iyo mid ay elektaroonadu ku yar yihiin oo leh saldanab tabane ah la isugu xidho gudbiye kubramka ah sida silingga, elektaroonadu waxay ka tagaan halkii ay ku badnaayeen oo waxay aadaan meeshii ay ku yaraayeen. Elektaroonadaa qulqulaya waxaa la yidhaahdaa qulqulka danabka.

Haddaba, qulqulka danabka ee raacaysa gudbiyaha sida silingga kubramka ah waxaa lagu suureyn karaa biyo raacaya dhuun oo kale. Haddii aynu dib ugu noqonno tijaabadii, markii labada daasadood ee midna biyuhu ku jireen midna ay marnayd la isugu xidhay dhuun, biyihii way ka soo shubmeen daasaddii ay ku jireen oo waxay u soo qulquleen tii kale. Biyihii qulqulayeen oo waxay joogsadeen markii labadii heer ee biyaha daasa-daha ku jirey ay isle'ekaadeen. Haddaba, biyaha waxa dhuunta raacinaayey cadaadiska biyaha ee labada daaadood ee aan isu dheelitirnayn, sidaa darteed, biyuhu waxay u qulquleen xaggii cadaadiska biyuhu uu ku yaraa, waxayna joogsadeen markii labada cadaadis ee biyuhu ay isle'ekaadeen. Waxaa dhici karta in loo baahdo xaddiga biyaha ab ee dhuunta maraya ammin go'an, sida inta litir ee sekenkiiba maraysa oo kale. Haddaba xad-diga biyaha ah dhuunta maraya waxa xukuma cadaadiska biyaha ee dhaqaajinaya. Haddii cadaadiska biyuhu uu weyn yahay xaddiga biyaha ee dhuunta raacayaana wuu weyn yahay. Haddii cadaadiska biyuhu uu yar yahay xaddigga biyaha ihi isna wuu yar yahay. Waxa jirtan arrin kale oo iyana xukunta xaddigga biyaha ah ee ammin go'an dhuunta raaca. Haddii daloolka dhuuntu aad u yar yahay, biyo badan ma mari karaan dhuunta, waayo way iscidhiidhinayaan.

Sidaa darteed xannibaad ay la kulmaan. Haddiise daloolka dhuuntu uu weyn yahay, biyo badan ayaa dhuunta ammin go'an mari karaa waayo nafis ayay hela-yaan.

Markaa, haddii aynu qulqlidda danabka ee gudbiyaha raacaysa aynu nidhi waxaa lagu suurayn karaa biyo dhuun raacaya, maxav yiliip arrimaha xukuma qu'lqulka danabka ee gudbiyaha maraysa?

## CADAADISKA DANABKA:

Sidii aynu u nidhi biyaha u kala qulqulayey labada daasadood waxaa dhaliyay cadaadiska biyaha ku jira labada daasadood oo aan isle'ekayn, ayaa qulqulka danabka uu u dhaliyay cadaadis la yidhaahdo cadaadiska danabka. Kaas oo ka dhasha laba shay oo laba saldanab oo kala duwan qaba. Cadaadiska danabka waxaa la yidhaahdaa Foolteejka waxaana lagu cabbiraa qalab la yidhaahdo fooltbeeg. Hal beeg foolteejku waa «Foolt». Marka la soo gaabiyana waxaa loo qoraa «V». Haddii foolteejku uu weyn yahay waxa lagu cabbiraa kiirofoolt halka kiirofoolt waa 1000 foot. Haddii foolteejku uu yar yahayna waxaa lagu cabbiraa milifoolt. Milifoolt oo ah

1. Foolt.

1000

## Qulqulka Danabka:

Sidii loogu baahnaa in la ogaado xaddiga biyaha ah oo dhuuninta niaraya waqtii go'an ayaa loogu baahan yahay in la ogaado xaddiga danabka ah ee gudbiyaha maraya. Waxaa xaddigga lagu cabbiraa qulqulka maraya qalab la yiraahdo ambiyeerbeeg. Halbeegga qulqulka waxaa la yiraahdaa ambiyeer. Halkii ambiyeer waa qulqulka danabka ee mareeg maraya sekenkiiba.

Ambiyeer Saldanabka ee danabka

Amminta

Haddii qulqulka danabku ay xaddi yar tahay waxaa lagu cabbiraa miliambiyeerka. Halka miliambiyeer waa

1

— A (ama  $1mA = 10^{-3}A$ ). Sidaa darteed, haddii la 1000

qorayo 4 Ambiyeer waxa loo qoraa 4A. Miliambiyeerka marka la soo gaabiyo waxaa loo qoraa mA.

### C A A B B I G A :

Marka qulqulku ay dhaxmareyso gudbiye sida siliga kubramka, waxay la kulantaa caabbi, caabbigaas oo haddii uu aad u weyn yahay is-hortaagga qulqulka danabka oo diida in qulqulkii walaxdu dhixmarto. Walxaha oo dhami way wada leeyihiin caabbi, hase ahaatee caabbi-goodu wuu kala yar yahay. Caabbiga walaxdu waxay ku xiran tahay walaxdu waxay ka samaysan tahay. Walxahaas ay caabbigoodu uu aad u weyn yahay oo aanay qulqulku si dhib yar u mari karin, waxa la yiraahdaa ma-gudbiyayaal, waxaana ka mid ah qaruuradda, goomada (Rabarka) iyo qoriga. Walxaha qulqulku ay si dhib yar u dhix mari kartaana waxaa la yiraahdaa gudbiyayaal, waxaana ka mid ah biraha oo dhan, sida arjantamka, kubramka, aluminamka, dahabka iwm. Gudbiyaha ugu fiican waa arjantamka, hase ahaatee waxaa badanaa la isticmaalaa maarta, kubramka iyo aluuminamka, waayo arjantamku waa qaali.

\* Caabbiga walaxdu waxay kale oo ku xidhan tahay **dhererkiisa, dhumucdiisa iyo heerkultiisa**. Marka dhererka walxaha la kordhiyoba caabbigiisuna waa kordhaya. Marka dhumucdiisa weynaatana caabbigiisuna waa yaraataa. Walxaha birta ah oo dhan caabbigoodu waa kordhaa markaa keerkulkoodu kordho. Halbeeg caabiga waxaa la yiraahdaa OOM. Markaa caabbigu

weyn yahayna waxaa lagu cabbiraa Kiilo-OOM kaas oo ah 1000 OOM. Si loo hawl yaraysto marka xisaabaadka lagu shaqaynaayo OOMka waxaa loo qaataa loona qoraa xaraf Giriig ah oo loo akhriyo OOM una qorma. Mar-ka haddaad rabtid inaad 4 OOM qortid waxaad qori 4 oo keli ah.

Waxaynu aragnay saddex arrimood oo sameeya qul-qulidda elektroonada ama qulqulidda danabka. Kuwaas oo ah, Cadaadiska danabka ama foolteejka, xaddiga da-nabka ama qulqulka danabka iyo caabbiga meesha ay qulqulku marayso.

Haddii cadaadiska qulqulka waddaa ama foolteejku kordho, xaddiga qulqulka ee gudbiyaha maraysa ayaa kordho. Haddii caabbiga meesha qulqulku marayo weynaatana qulqulka danabku way yaraataa. Xiriirkas ka dhxeeyaa, qulqulka, foolteejka, iyo caabbiga waxa helay saynisyahan Jarmal ah oo la odhan jirey Jooj Simon OOm qarnigii 19aad.

Sidaa darteed baa loogu magac daray halbeegga caa-bbiga la yiraahdo OOM iyo xeerka uu leeyahay ee saddex-da qodob ka kooban xeerka OOM marka ereyo lagu sheego xuwu noqonayaa sidan soo socota: Qulqulku waxay saamigal qumman la tahay foolteejka, saami iswaydaar-na caabbiga walaxda ee gudbinaysa. Xisaab ahaan xeerka OOM wuxuu noqonayaa:

Qulqul = Foolteej  
—  
Caabbi (I)

Ama I = V  
—  
R

Marka:

I = Qulqulka

V = Foolteejka

R = Caabbiga

Halbeegga Qulqulka waa Ambiyeer

Halbeegga Foolteejka waa Foolt

Halbeegga Caabbiga waa OOM.

Markaa la soo gaabinayo halbeegga waxaa loo qoraa:-

Qulqulka \_\_\_\_\_ A

Foolteejka \_\_\_\_\_ V

Caabbiga \_\_\_\_\_

Waxaa kale oo xeerka Oom loo qori karaa:

V = IR

$$Ama \ R = \frac{V}{I}$$

Kuwaas oo laga soo diiray isle'egta (I)

### SIDA LOOGU SHAQEYYO XEERKA OOM:

Tusaale:

1. Qulqul intee le'eg ayaa mari karta gudbiye caabbigisu yahay 10, haddii foolteejku yahay 100 V ?

Haysatid.

$$\text{Foolteejka } V = 100 \text{ V}$$

$$\text{Caabbiga } R = 10$$

$$\text{Qulqul } I = ?$$

Furfurid.

$$I = \frac{V}{R}$$

$$I = \frac{100 \text{ V}}{10} = 10 \text{ A}$$

$$I = 10 \text{ A}$$

2. Immisa foolt ayaa loo baahan yahay si qulqul  
5A ahi ay u marto gudbiye caabbigii su yahay  
2 ?

Haysatid:

$$\text{Qulqul } A = 5 \text{ A}$$

$$\text{Caabbiga } R = 2$$

$$\text{Foolteejka } V = ?$$

Furfurid:

$$V = IR$$

$$V = 5 \text{ A} \cdot 2$$

$$= 10 \text{ A}$$

$$\cancel{10 \text{ V} \quad (IA = IV)}$$

## L A Y L I :

1. Maxay yihiin qulqulka danabka iyo qulqulka jihaysan ama toosan? Sheeg halbeegga lagu cabbiro qulqulka danabka?
  2. Muxuu yahay cadaadiska ama foolteejku? Sheeg halbeeggiisa?
  3. Waa maxay caabbigu? Sheeg halbeegga caabbiiga?
  4. Sheeg qodobbada xukuma caabbiga walaxi lee-dahay?
  5. Xisaab ahaan ku sheeg xeerka Oom?
  6. Buuxi meelaha madhan si ay u noqoto weedh saynis ah oo dhan?  
  
b) Mega-Oomku            Waa            Oom  
t) Miliambiyeerku        Waa            Ambiyeer  
j) Kiilo-Oomku            Waa            Oom  
  
x) Milifoltku            Waa            Foolt.
- Xisaabahan xeerka Oom la kaasho oo ka shaqay:
7. Haddii Foolteej ah 100 V lagu aadiyo caabbi ah 50 waa maxay qulqulka maraysa?
  8. Qulqul intee ah ayaa mari kartaa silig caabbi giisu yahay 14 haddii foolteejku yahay 120 V ? 120 V ?
  9. Foolteej intee ah ayaa loo baahan yahay haddii la rabo in qulqul 5A ay marto gudbiye caabbi giisu yahay 25 ?

## Sida loo xukumo qulqulidda Elektaroonada.

### (Qulqulka Danabka)

Waxaa laga yaabaa inaad wax badan aragtay kaarbuuno la gelinayo unugyo engegan oo saddex ah ama raadiyo afar unug la gelinayo. Hase ahaatee, ma waydiisay waxa loo adeegsado unugyada iyo tirooyin kala duwan loo qaato mar kastaba. Waa marka hore unugyadu waxay dhaliyaan tamar danab, tamarta oo qalabkaas kala duwani ku shaqeeyaan. Karbuunada marka ay ilayska bixiso. tamartii danabka ayaa raadiyowguna tamartii danabka ahayd isugu beddelay tamar jabaq.

Waxaa haddaba jirta sidii aynu hore u soo aragnay in qulqulka danabka ahi ay ku xidhan tahay cadaadiska danabka (foolteej) iyo xaddiga qulqulka ah ee mareegta maraya. Walax waliba oo ku shaqeynaya qulqul danab ah waxay leedahay, cadaadis danab iyo qulqul gaar ah. Taasi waa waxa halka unug ee engegan ee kaarbuunada uu u ifin waayo nalka. waayo qulqulka iyo cadaadiska danabka ee halka unug oo engegan ma ifin karaayo nalka. Sidaa darteed waxa loo baahan yahay in la xukumi karo qulqulka danabka oo qalab kasta, xaddiga qulqulka ahayd ee uu ku shaqaynaayey la hubiyo inay marayso. Sidaa loo gaadho waxaa habboon in la ogaado foolteejka unugyada wax lagu qabsado.


Foolteejka unugyada enegani waa I.5 V ka unuga Fooltna waa I.I V. Haddaba si loo helo qulqul ifisa nalka kaarbuunada waa in la isku xidhaa dhowr unug waxaana ka samaysma baatari.

Qaybta aynu kaga hadalnay mareegta qulqulka wa-


xaynu ku soo qaadanay in la isku xidho qaybaha mareegta danabka. Haddaba, marka dhawr unug la damco in la isticmaalo si foolteejku uu u kordho, sidee la isugu xidhaa oo lagu daraa mareegta danabka? Sidaa aynu aragnay unuggu wuxuu leeyahay cidhif togane ah iyo mid tabane ah. Markaa haddii aynu haysanno saddex unug oo engegan, sidan oo kale ayaa la isugu xidhaa. Cidhifka tabanaha ah ee unugga koowaad waxaa lagu xidhaa cidhifka togaanaha ah ee unugga labaad cidhifka tabanaha ee unugga labaad waxaa lagu xidhaa cidhifka togaanaha ah ee unugga saddexaad. Cidhifka tabanaha ah ee unugga saddexaadna waxaa lagu xidhaa cidhifka tabanaha ah ee unugga koowaad. (Sida aad jaantuska ku aragtid) Waxaynu heleyntaa baatari.

Haddaba isku xidhkaas aynu soo sheegnay waxaa la yidhaahdaa isku xidh isdabayaal ah. Taas oo macnaeedu yahay qulqulkii danabka ayaa isdaba joog unugyadii u marto. Qulqulka danabka ee maraya mareegta marka unugyada la isku xidho isdabayaal waa isku mid unugga u horeeya iyo unugga u dambeeyaa. Marka unugyada la isku xidho isdabayaal waxaa kordho cadaadiska danabka ama foolteejka. Saddex unug oo engegan marka isdabayaal la isugu xidho wuxuu foolteejkoodu noqonayaa wadarta foolteejka unugyada, taas oo ah:

(I. 5V + I. 5V + I. 5V = 4. 5V).



Waxaa jirta si kale oo unugyada la isugu xidho. oo la yidhaahdo isku xidh barbarro ah. Marka unugyada la isku barbareeyo, waxaa la isku xidhaa qotinnada togane ee unugyada oo dhan, qotinada tabane oo dhanna gooni ayaa la isugu xidhaa. (Fiiri Jaantuska)



Markaa unugyada barbaro ah la isku xidho, qulqul-ku sidii kuwii isdabayaalka, unug kasta ma marto. Caadaadiska danabka ama foolteejka baatariga ka dhisani wuxuu la mid yahay foolteejka unug keliya. Haddii baatariga ka kooban yahay saddex unug oo barbaro isugu xidhan unug walibana I-5V uu foolteejkiisu yahay, foolteejka baatarigu wuxuu noqonayaa 1.5 foott.

Marka unugyada loo xidho barbaro waxaa uun la isku xidhaa unugyo isku foolteej ah.

#### TUSAALE:

1. Haddii 10 unug oo engegan oo mid kasta foolteejkiisu uu yahay 1.5V la isugu xidho isdabayaal qulqul intee ah ayaa maraysa haddii caabbigeedu yahay 150 ?

#### Haysatid:

$$\text{Foolteejka } V = 1.5V$$

$$\text{Caabbigeedu } R = 150$$

$$\text{Qulqul } I = ?$$

#### Furfurid:-

$$I = \frac{V}{R}$$

$$\text{Foolteejka halkii unug waa } V = 1.5V$$

$$\text{Foolteejka 10 unug waa } V = 1.5 \times 10V$$

$$I = \frac{V}{R} \quad V = \text{wadarta foolteejka}$$

Qulqulka marayaa unug  
kasta waa I A.

$$I = 1.5 \times 10 V.$$

150

$$I = 0.01 A$$

2. Haddii 10 unug oo engegan oo mid kasta foolteej-kiisu yahay. 1.5 foot la isugu xidho barbaro, qulqulka intee ah ayaa mari karta caabbi ah 150 ?

Haysatid

$$\text{Foolteejka } V = 1.5 V$$

$$\text{Caabbiga } R = 150$$

$$\text{Qulqul } I = ?$$

Furfurid:

$$I = \frac{V}{R}$$

$$I = \frac{1.5}{150}$$

$$I = 0.01 A$$

Foolteejka hal unug waa la mid foolteejka 10 unug marka barbarro la isugu xidho.

**Sida unugyada isdabayaal marna barbarro. la isugu xidho.**

Waxa aynu ka hadalnay sida unugyada marna isdabayaal la isuu xidho marna barbarro, iyo mid walba tilmaamaha uu leeyahay. Haddaba si tilmaamahaas aynu soo sheegnay aad u sii garatid, tijaabooyinkan soo socda samey.

Tijaabo:

Waxa aad soo qaadataa saddex unug oo engegan, nal kuwa kaarbuunada ah, silig kubram ah oo daaadhan. Saddexda unug isku qabo adiga oo mid madaxiisa ka xiga saltiisa ku qabanaya. Si aanay u kala dhicin laba galbal oo qardaas adag ah labada dhinac kaga dherer dabadeedna laastig isugu qabo. Siliggii labadiisa dacal daaadhka ka dir. Labada dacal midkood ku mar nalka dabadiisa maraaryaha leh, dacalka kalena unugga ugu dambeeyo guntiisa ku qabo. Nalka ku fadhiisi unugga madaxiisa. Xusuusnow gunta unuggu waa ciddifkii tabanaha ahaa, madaxiisa soo buuranina waa ciddifkii toganaha ahaa. Fiiri kaaha nalka. Sidii aynu hore u soo sheegnay marka unugyada isdabayaal la isugu xidho foolteejka baatariga unugyadaas ka koobani wuxuu noqda wadarta foolteejyadu unugyada. Unugyadaa mid ka saar mareegta oo laba keliya istichaal. Fiiri kaaha nalka. Wax ma iska beddeleen? Bal unug keliya istie-maal, oo dabadeedna fiiri sida mar labaad uu isu beddelo kaaha nalka.

Waxaad tijaabadan ka aragtaa in marka unugyada isdabayaal la isugu xidho inuu kordho foolteejku. Go-aankaas waxaynu ka helnay sidiid kaaha nalku uu isu beddelay. Saddexda unug isdabayaal la isugu xidho wu-

xuuna ugu kaah yar yahay markaa hal unug oo keliya uu ku xidhan yahay.

### Tijaabo:

Qalabkii tijaabadii hore oo kale soo qaado, dabadeedna sida aad jaantuskaa hore ku aragtay isugu rakib. Cidhiifyada tabanaha ah ee saddexda unug silig kubramah isugu xidh. Sidaa si le'eg cidhiifyada toganaha ah silig kubramka ah isugu xidh dabadeedna labada dacal ee silig yada midna ku duub nalka salkiisa maraaraaha leh, midna faaqda nalka ee madow taabsi. Fiiри kaah nalka ma ḷa duwan yahay kii hore? Haddaa Unug keliya isticmaal, fiiри kaahha nalka siduu yahay. Wuxuu tijaabadaan ku arki doontaan in kaaha nalku uu isku mid yahay marka unug keliya la adeegsado iyo marka dhawr unug oo barbarro isku xidhan la adeegsado.

Taasi waxay inoo caddeynaysaa go'aankeennii hore ee ahaa foolteejka barbarrada u xidhan wuxu la mid yahay foolteejka unug kaliya.

### Mareegta Isdabayaalka ah:

Waxa dhacda in loo baahdo in mar la wada adeegsado qalab badan oo ku shaqceeyaa danabka. Matalan, maalmaha dabbaaldeegga iyo ciidaha qala! badan oo kala jaad, ah ayaa guryaha iyo meelaha shewarka lagu qabto lagu xidhaa. Marka waxaa loo baahan yahay in la ogaado siyaabaha ugu habboon ee loo dhiso mareegta danabka Sidii aad soo aragtay in unugyada la isugu xidhi krao isdabayaal iyo barbarro ayaa qalabka danabka ku shaqceeyaan la isugu xidhi karaa isdabayaal iyo barbarro.

Marka la damco in qalabka danabka ku shaqceeyo (Qalabka oo leh caabbi) loo xidho isdabayaal waa la isku

daba taxaa. Haddii qalabku uu yahay nalai, qulqulka danabku isdabajoog ayey nal kasta u martaa. Haddii mareegta isdabayaalka ahi ay meel ka furanto ama nalalka mid laga saaro ama uu gubto, qulqulku ma mari karto mareegta qaybteeda kale ee ay ka mid yihin nalalkii kale, sidaa darteed nalalkii kale waa ay dammaan. Waxaa kale oo jirta haddii nalalku ay isdabayaal ku xidhan yihin markii mid lagu kordhiyoba waxaa kordha caabbiga mareegta, sidaa darteed waxaa yaraatq qulqulki mareysay nalalka. Taasi waxay keentaa in kaahi nalalku uu yaraado. Caabbiga mareegta isdabayaalka ahi waxaa weeye caabbiga unugyada oo dhan oo la isugu geeyey. Bal hadda tijaabidan samay oo isku dey in aad qdobada aynu kor ku soo sheegnay aad wax ku qabsan kartid.

$$R_1 = 20\text{om}, R_2 = 30\text{om}, R_3 = 40\text{om}$$

Caabbiga guud waa:  $(I_1 = I_2 = I_3)$

$$R = R_1 + R_2 + R_3$$

$$R = 20\text{om} + 30\text{om} + 40\text{om}$$

$$R = 90\text{om}$$

$$R = 9$$

### Mareegta Barbarrada ah:

Mareegta barbarrada ah qulqulka danabku waxay martaa qayb kasta oo ka mid ah iyada oo aan sii marayin kuwa kale. Sidaa darteed haddii qayb mareegta ka mid ah la furo, qaybihii kale ayey martaa. Haddii d'awrinal ay u xidham yihin barbarro oo dabadeedna iyaka oo


baxaya midkood laga saaro mareegta danabka, nalkii soo hadhay sidoodii bay isaga baxaan. Qulqulku waxay ku kala qaybsantaa qalabkii oo iniba ay qayb martaa; Haddaba, sidaa darteed qulqulka kala maresaa waa ay kala duwan tahay. Bal hadda tijaabdan u fiirso.

### Tijaabo:

Saddex nal oo kuwa kaarbuunada ah iyo iswij bar-barro ugu xidh baatari foolteejkiisu yahay 6V (Sidaa aad jaantuska ku aragtid). Si aad baatari foolteejkaas leh aad u heshid, afar unug oo engegan isdabayaal isugu xidh. Nalalka mid ka saar. Maxaa ku dhacay nalalkii soo hadhay? Ma dameen. Kaahii nalaiku ma kordhay? Wuxaad tijaabdan ka aragtaa in haddii nalal ama qalab kale oo danab ku shaqeeya oo barbarró u xidhan midkood. ka saarto in kuwii kale ay baxaan.

### Tijaabo

Saddex nal ugu xidh isdabayaal baatari ka dhisan saddex unug oo isdabayaal isugu xidh sida aad jaantuska ku aragtid. Haddii aad weydid nilayda nalka lagu fadhiisiyo, soo qoro qori loox ah oo ah mid aad u jilicsan. Saddexda musbaar sida aad jaantuskaa ka aragtid qoriga korkiisa ku jooji, labo musbaarna dhinacyadiisa ku taag. Wuxaad hubisaa in labada musbaár ee dhinacyadu taabanayaan laba ka mid ah saddexdii musbaar ee kale. Nalka dhix geli musbaarrada qoriga oogada kaga taagan; silig kubramka ahna ku xidh labada musbaar ee dhinacyada. Marka hore nal keliya ku bilow: dabadeed-na mid kale ku dar. Fiiri sida kaaha nalkii hore uu isu beddelo oo uu u yaraado markaa nal kale lagu kordhiyaba:



Saddexdii nal oo wada baxaya mid ka mid ah mreegta ka saar Maxaa ku dhacay nalkii kale? Way dameen.


Haddaba, guud ahaan marka caabbiga la isugu xidho isdabayaal caabbiga mareegtu wuxu noqdaa wadarta caabbiyada. Haddii caabbiga saddexda nal aynu ka soo qaadanno  $R_1$ ,  $R_2$ ,  $R_3$ . Caabbiga guud ee Mareegtu wuxu noqonayaa:

$$R = R_1 + R_2 + R_3$$

Marka  $R$  = caabbiga mareegta guud ahaan:

Tusaale:

Haddii aynu u qaadanno in caabbiga unugyadu ay kala leeyihii haddii mid mareegtii laga saaro kuwa kale aanay-isbeddelin ee ay sidoodii hore u shaqeeyaan. Sidaas darteed, nalka guryaha waxa loo xidhaa barbarro si haddii mid xumaado, ama la demiyo ay kuwa kale u baxaan.



Mareegta barbarrada u xiran marka qalabkii danabka isticmaalayey qaarkood laga furo, waxa guud ahaan yaraata caabbiga mareegta.


Sidaa darteed qulqul weyn ayaa marta qalabkii kale ee soo haray. Taasi waxay dhalisaa in kaahii nalalka soo haray uu kordho haddii iyaka oo barbarro u xidhan qaarkood mareegta laga saaro.

#### Summadaha iyo Jaantusyada Mareegta:

Waxa aynu aragnay in mareegta danabka sahlani ka kooban tahay meel ay ka dhalato danabku sida, unugga engeegan iyo marinka danabka maro oo gudbiye ah iyo qalab danabka adeegsada oo ku shaqeeya. Marka haddii la damco in la sawiro mareegta danabka oo dhan

ammin badan ayaa ku lunta: Haddaba, si loo fududeeyo sawirka danabka waxa la isku raacay in loo doorto sum-mado u taagan waxyaabaha kala duwan ee mareegta danabka ka kooban tahay. Marka summadaha kala duwan aad bartid ee mid waliba waxay 'u taagan tahay aad ogaatid waxaa kuu fududaanayaa inaad samayn kartid ama aad akhriyi kartid jaantuska mareegta kasta oo danab ah

**Summadaha dhab ahaan u baro.**



Marka haddii aynu baranay summadihii aynu isku deyno in aynu samayno jaantsyada mareegtii aynu hore u soo aragnay. Shaxanka ( 1 ) waxaa jaantuskii uu no-qonayaa sidan :

**LAYLI:**

Immisa unug ayaa baatari waliba ka kooban yahay?


Baatan  
taxane



Dawas



Figuus



Nal




siliq istu  
Xidha




Matoor




Caabiye




Baatar  
barbare ah



Foolt, eeg




Ambiyeerbeeg



Galfano-  
beeg

Siligrada hoos ku yaalla kuwee isku xiran kuweese  
iska hor tallaabsan?



### Mareegta sahlan iyo Rardhaafka mareegta:

Waxaa mar marka qaadkood dhacda in qalab badan oo ku shaqeyya danabka mar qudha la wada gasho mareegta. Taasina ay dhaliso in qalabkaasi ay u baahdaan qulqul ka weyn tii loogu talagalay in ay marto mareegta.

Marka sidaas dhacdo waxaa la yidhaahdaa mareeg-tii waa la raar-dhaafiyey, waxaana markaasi dhici karta in siligrada danabka maraysaa ay aad u kululaadaan oo markaas dab qabsado gurigii.

Waxaa kale oo dhacda in mar marka qaarkood in siligrada dahaadhku ka furmo, dabadeedna uu ka dhaco. Haddaba haddii laba ay iska taabtaan meeshaas dahaadh-kii ka dhacay, qulqulkii waxay martaa meeshaas iyada oo aan marayn qaybihii kale oo mareegta ee loogu talagalay inay ku shaqeyyaan. Marka sidaas dhacdana waxaa la yidhaahdaa mareeg gaaban. Marka mareegta gaaban tahay qulqul weyn ay marto waxa dhaca in siligradii ay kululaadaan oo ay dab huriyaan.

Haddaba, si dhibaatadaa looga hortago waxaa mareegyada danabka lagu daaraa qalab la yiraahdo badbaadiye ama dhalaale (Fiyuus). Kuwaas oo isdabayaal loogu xidho mareegta si danabku mareegta u maro. Badbaadiyuhu ama dhalaaluhu waa silig yar oo ka samaysan bir heerkul hoose ku dhalaasha waxaa silingga ku jira ma-gudbiye quruurad ama dhoobo ah. Marka siligu dhalaalo ee uu kala go'o waxaa furanta mareegtii danabka, taasina waxay joojisaa qulqulkii maraysay mareegta. Sidaa darteed, dhalaaluhu waa iswij oo kale waayo iswiju qulqulku ayuu furaa in uu maro mareegta marna joojiyaa. Marka dhalaaluhu uu dhalaalo waa laga saaraa mareegta oo mid kale oo cusub baa la gelshaa ama siliggii ayaa laga beddelaa. Waxaa jirta dhalaaliyaal kala duwan qaar kastaba wixa loogu talagalay in qulqul (Ambiyeero) gaar ahi marto, matalan qaar qulqul 2 ambiyeer ahi marto, qaarna 10 mili-ambiyeer. Haddii tii loogu tala galay mid ka weyni ay marto, dhalaaliyuhu waa gubtaa.

Badbaadiyaashu ama dhalaaliyaashu waxay ku jiraan mareegta danabka ee guryaha. Wuxaan laga yaabaa in mar marka qaarkood ay nalalka gurigu damaan taasoo ay ugu wacan tahay dhalaaliyaha oo gubta. Badbaadiyaashu waxaa kale oo la odhan karo Mareegjebiye. Mareeg-jebiyaashu sida dhalaaliyaha ama badbaadiyaha waxay furtaa mareegta danabka marka siligyadu ay kullaadaan si aanu meeshaa dab uga hurin ama qarxiin. Hase ahaatee Mareeg-jebiyayaashu sida dhalaaliyaha mar kastaba ma dhalaalaan ama ma gubtaan si loo beddelo. Waxay dhalaalaan ama gubtaan marka qulqul danii oo ka weyn intii oo loogu tala galav inay marto mareesta. Mareeg-jebiyayaashu sida dhalaalaha waxay ka dhisan yihiin laba safeexadood oo laba birood oo kala duwan oo la isku ribdhay. Haddii qulqul weyn ay marto labadii

safeexadood ee isku ribdhanaa way kululaadaan dabadeedna way fidaan. Hase ahaatee, labada safeexadood ee isku ribdhan waxay ku dhisan yihiin laba birood oo marka la kululeeyo fididdoodu ay kala weyn tahay. Sidaa darteed, markaa ay kululaadaan ee midba in gooni ah fido ayey safeexaddii ay qaloocsantaa oo kor u kacdaa, dabadeedna ay mareegtii danabku furantaa. Markaa ay qabowdo ee ay ururtana, dib ayey meesheedii ugu soo noqotaa oo ay dabadeedna dhammeysaa mareegtii danabka. Sidaa darteed, mareeg-jebiyayaashu uma baahna in markasta la beddelo sida dhalaaliyaasha.

**Tusaale:**

- b) Saddex nal oo caabbigoodu uu kala yahay 3 Oom. 4 Oom, 5 Oom, ayaa la isugu xiray isdabayaal. waa maxay caabbiga guud?

**Haysatid:**

$$R_1 = 3, \quad R_2 = 4, \quad R_3 = 5.$$

$$R = R_1 + R_2 + R_3$$

$$\begin{aligned} R &= 3 + 4 + 5 \\ &= 12 \end{aligned}$$

- t) Haddii laba nal oo caabbigoodu yahay 2 Oom, iyo 4 Oom loogu xiro isdabayaal foolceejkiisu yahay 12 foolt. qulqul intee ah ayaa mareegta mari karta?

**Haysatid:**

$$R_1 = 2 \quad I = ?$$

$$R_2 = 4$$

$$V = 12 \quad V$$

### **Furfurid:**

$$I = \frac{V}{R}$$

$$R = R_1 + R_2$$

$$R = 2 + 4$$

$$R = 6$$

$$I = 12 V$$

$$\underline{6}$$

$$\text{Jawaab } I = 2 A$$

### **Raadadka Qulqulka Danabka.**

Sidee ayaa loo raadin karaa qulqulka danabka? matalan, haddii aad baambad biyo ah furtid waxad arki biiy়ii oo soo shumbaya. Haddaba marka la dhammeyyo mareegta danabka ee iswinka la xiro, waxa lagu ogadaa in qulqulkii danabku ay mareyso siligga mareegta. La-ma arki karo hase ahaatee, waxaa la arki karaa raad-keeda. ama sida ay ku sameyso maatarka.

### **Raaadaka Kulka ah ee Danabka**

Haddii aynu dib ugu noqonno tijaabadii la isku xiray unug engegan, silig kubramka ah iyo nalkii ee dabadeedna mareegtii danabka la dhammeyey, nalkii if ayuu bixiyey. Wuxuu kale oo aynu aragnay marka mareegta danabka la furo in nalku damo. Haddaba maxay arrimahaasi ina tusayaan? Qaybtii ifka waxaynu ku soo aragnay in marka shay la kululeeyo ec heerkulkiisu uu heer sare gaadho, inuu ilays bixiyo. Matalan, birtumu-

hu marka uu birta dabka gasho ee ay caddaato ilays ayey bixisaa. Wuxa kale oo jirta haddii laba shay la isku xoqo in xoqdaas uu kul ka dhasho. Kulkaas oo ka imaanaya isbeddelid tamartii makaanikadu ay isu beddeshay tamar kale. Haddaba, nalka gudihiiisa waxaa ah silig jimidh yar. Silinggaas marka qulqulka danabku ay mar to waxaa ka dhasha kul. Waxaa kululaada siliggii oo marka ilays bixiya. Waxaa markaas la odhan karaa danabka ayaa wuxuu isu beddelay tamar kul iyo tamar ilays.

Sidaa darteed, nalka iftiimaya wuxu inoo muujinaya in qulqulkii danabku ay siligga mareyso. Raadadkaa kulka ah ee ay leedahay qulqulku si weyn ayaa dadku wax ugu qabsadaa. Waxaa jirta in wax lagu karsado qalabka danabka ku shaqeeya, halkii xaabo amä dhuxul laga adeegsan lahaa. Waxaa kale oo jirta kaawiyado iyo qalab badan oo iyana ku shaqeeya raadka kulka ee danabka.

### Raadadka Kimikada ah.

Waxaynu qaybihii hore ku soo aragnay in danabka laga dhalin karo falgalka kimikaad qaarkood. Haddaba bal aan eegno in qulqulka danabka ay dhalin karto falgal kimikaad. Waxaa jirta in maatarku u kala baxo sadex weji: Adke, Hoor iyo Neef. Walxaha uu danabku dhixmari karo waxaa la yiraahdaa gudbiyaal, walxaha danabku aanu dhëx mari karin waxaa la yiraahdaa magudbiyaal. Marka qulqulka danabku dhixmalo adkaha gudbiyaha ah wax isbeddel ah kuuna dhacaan sida siliga kubramka ah waxaase la arkaa marka qulqulka danabka dhaxmalo hoorarka qaar ka mid ah inay u kala baxaan qayb leh saldanab tabane ah iyo kuwo saldanabka togane ah leh.


Hoorarka caynkaas ah ee marka uu danabku dhexmaro ee ay gudbinayaan iyana qaybo u kala baxa waxaa la yiraahdaa gudbiye-hoor. Falgalkaasna uu hoor u kala baxay qayb leh saldanab kala duwan waxaa la yiraahdaa qulqul sooc.

Maxaa ku dhaca biyaha marka danabka la dhexmariyo? Biyuhu marka ay xafeedda yihin ee ay saafiga yihin ee walxo kale ayna ku milnayn waa ma-gudbiye oo danabku ma dhexmari karo. Hase ahaatee waxaynu ognahay in biyuhu yihin mile caalami ah oo walxo badani ka milmi karaan. Haddaba, markaa iskudhisyada asiidhka, cusbooyinka iyo beysyada lagu daro biyo, biiyhi waxay noqdaan gudbiye oo marka qulqulka danabku dhexmaro. Iskudhisyadaas isku-jir ah ee biyaha ku jira waxay u kala baxaan qaybo saldanab kala duwan leh.

### Kala Baxa biyaha.

Saabaan:

- 1) Baatari ka dhisan lix unug oo isdabayaal isugu xidhan.
- 2) Laba silig oo kubram ah oo daaadhan dheerna.
- 3) Baaquli qarulurad ah.
- 4) Laba unug oo engegan oo aan shaqaynayn.
- 5) Xanjo jilicsan.
- 6) Laba bakeeri.
- 7) iyo in yar oo salfiyuurik asiidh ah ( $H_2SO_4$ ) iyo biyo.



Dariiqo:

Labada Uunug ee dhammaaday mindi ku kala dil-laaci oo ulaha kaarboonka ah ka soo saar.

Laba silig dacalladooda in yar dahaarka ka qaad. Dabadeedna ku kala xidh labada ulood ee kaarboonka iyo cidhifyada baatariga. Baaquliga biyo ka buuxi, biyahanan dhowr dhibcood oo salfiyuurik asiidh ah ku dar. Labadii ulcod ee kaarboonka ahaa dhexqotomi oo ku af-gembi. Meelaha siliggu kaga xidhan yahay kaarboonka xanjo ku dheji si aad u hubisid inaan siliggu biyaha taaban. Guud ahaan qalabka u dhig sida aad jaantuska ka aragtid. Si go'aanada tijaabada aad u hubisid waxaa loo baahan yahay inaad ammin badan oo saacaddo ah aad sugtid. Fiiri waxa ku dhaca biyaha ku jira bakeeriga. Biyihii meeshoodii maxja galay? Labada bakeeri inta biyihii ka baxseen ma isle'eg yihiin? Intee ayay kala veyn yihiin? Bakeeriga biyuhu ka hor madhaan dabool 'ar afka ka saar oo baaquliga ka bixi. Bakeeriga kale

isna marka biyuhu ka wada baxaan, waxaa meesheedii galay labo neefood, labada neefood xaggee ayey ka yimaadeen? — Waxay ka yimaadeen biyaha, markii qulqul-ka danabka la dhex mariyey. Labada neefood waxaa la kala yidhaahdaa Ogsijiin iyo Haydarojiin.

Tijaabadani waxay ina tusaysaa in biyuhu ay yihii iskudhis ka kooban ogsijiin iyo Haydarojiin. Ogsijiintu waxay ku ururtaa bakeeriga ku afgémbiyán usha kaarboonka ah ee ku xidhan qotinka toganaha ah ee baateriga. Haydarojiintu waxay ku uruurtaa bakeeriga ka afgémbiyán usha kaarboonka ah ee ku xidhan qotinka tabanaha ah. Haddaba, bakeeriga hor madhi waxaa kú jirta neefta haydarojiinta ah ka kalena waaxaa ku jirta neefta Ogsijiin.

Arrintaas waxaad ka hubin kartaa haadii aad qori duur baxaya aanse ooleyn aad marba bakeeri gelisid; waxaad arki doontaa in marka ogsijiintu uu ololo, taas oo muujinaya in neeftu ay tahay ogsijiin, waayo ogsijiintu gubashada ayay taageertaa,

**Xidhiidhka ka dhexecéya birlabnimada iyo danabka.**  
**Gogoldhig:**

Waxaa jirta xidhiidh adag oo ka dhexecéya birlaam-nimada iyo danabka. Xidhiidhkaasi waa kuwo ay si caddaan ah u muujin karaan tijaabooyin sahlan.

Marka xidhiidhkaasi la sii dhuuxo oo heer sare laga gaadho waxaa muuqanaysa in birlabnimada iyo danabku aanay laba wax oo kala geddisan ahayn ee ay yihii wax keli ah labadiisa waji. Bal aynu hadda samayno tijaabooyin arrintan inoo sii caddaynaysa.


**Birlab danab:** Ilaa hadda birlabihii aynu soo arag-

nay ama ku soo sheegnay waxay ahaayeen waslado xad-diid ama xadiidlاب ah, oo la birlabeeeyey. Birlabahaasi aynu soo aragnay birlabnimadoodu kama hadho, haddii aanay ku dhicin waxyaabaha birlabnimada baabi'in kara ee aynu hore u soo sheegnay. Bal hadda aynu eegno biraha cayn kale ah.

Tijaabada ( 14 ) B.

Birlab u abuuray danab.


Saabanka tijaabada.



Musbaar silig daaadhan, biin, xaddiid ama xaddiid-lab ah, dhagax bitijoor.

Dariiqo:

Musbaar aan birlabaysnayn, (Hubi inaanu biin xaddiid lab ah soó jiidan karin) ku mar silingga labadiisa caaro ee qaawan maahee intiisa kale daaadhan tahay. ilaa soddon (30) jeer silinggaas ku mar musbaarka. Musbaarkaa oo sidaasi uu siligu ugu maran yahay dulqabo



cantooba biinan xaddiid ah amaba xaddiid-lab ah sida jaantuska aad ku aragtid. musbaarku ma soo jiitaa bii-nanka? Marista kali ah ee musbaarka lagu maray silig-ga miyey musbaarka siisay birlabnimadii aanu hore u lahayn? Silingga labadiisa caaro ee qaawan ku qabo labada cidhif ee dhagaxa bitijoorka. Isla markaaba, musbaarka marlabaad dulqabo. Imminka musbaarku ma soo jiitaa biinka? Ma Cidhifyadiisa mise badhtamahiisa ayaa badi biinanka soo jiitaa? Maxaa hadda birlamni-mada siiyey baad filaysaa?

### Gunta tijaabada :

Marka labada caaro ee Silingga lagu qabto labada ci-dhif ee dhagaxa bitijoorka, waxaa aynu ognahay in (Unugga engegan) qulqul danab ay xulayso amaba dhex-qaadayso silingga ku maran musbaarka. Isla markaa waxaa aynu aragnay musbaarkii aan awal biinan u soo jiidaynay oo hadda biinankaasi soo jiidanaayo taasi wa-xay tilmaamaysaa birlamnimo aanu hore lahayn oo ku soo korodhay musbaarka. Waxaa weeye qulqulka danab-ka ee xulaysa silingga marka labadiisa caaro ee qaawan lagu kala qabto labada cidhif ee dhagaxa bitijoorka. Sidaas awgeed waxaa aynu xidhiidhin karnaa birlamni-mada aanu hore u lahayn ee musbaarka ku soo kordhay iyo qulqulka danabka ee xulaysa silingga ku maran ayaa musbaarka ku dhalisa amaba ku abuurta birlamnimo aanu hore lahayn. Birlabnimada caynkaasi ku timaada waa mid uu abuuray danab.

Birlabnimada sidaas ku timaada ee ay dhaliso danabka waxaa la yiraahdaa «Birlab Danabow». Birlabta birlabnimadeedu dhaliso qulqulka danab waxaa la yi-dhaahdaa «Birlab danab» isweydiintan maxay birlab-danabku kaga duwan tahay birlabtii caadiga ahayd ee

hore inoo soo martay? Birlabnimada birlabdanabowgu ma mid waartaa? Si ay inoogu suurowdo in waydiiskaan aynu jawaab cilmi ugu helno bal aan samayno tijaaboo-yinka soo socda.

### Tijaabo (14) T

Birlab danabka birlabnimadeedu ma waartaa?

1. Saabaanka tijaabadu u baahan tahay:

Waa intii alaaboo ahayd ee tijaabadu hore (14) B.


2. Dariiqada tijaabada:

Siliga labadiisa caaro ee qaawan ku qabo labada cidhif ee dhagaxa bitijoorka. Sidii aad horeba u aragtay, musbaarku markaa biiinanka waa soó jiitaa si gaar ahaan ah cidhifyada musbaarka ayaa soo jiita biiinanka, taasi oo muujinaysa in xoogga birlabnimadeed ee musbaarka uu ku urursan yahay labada cidhif sidii birlabaha caadiga ahaa.

Si dhakhso ah labada caaro ee siliga midkood uga qaad cidhifka dhagaxa bitijoorka ee aad ku hayso.

XUSUUS. Haddii muddo dheer labada caaro ee siliga aad ku hayso labada cidhif ee dhagaxa bitijoorka, waxaa dhici kara in dhagaxu xumado. Sidaas awgeed marka aad tijaabadaan iyo tii horeba samayso, labada caaro ee siliga waa in aadan labada cidhif ee dhagaxa ku wada haynin ammin dheer.

Mar haddii sidaa aynu labada caaro ee siliga midkood labada caaro ee qaawan oo laga qaaday labada cidhif ee dhagaxa.



Biinankii oo ka soo daatay musbaarka, markii laga qaadey silingga laba cidhif ee dhagaxa bitijoorka uga qaadno cidhifkeeda, dhagaxa bitijoorka, waxa aynu og nahay in ay joogsanayso oo aanay jirayn qulqul danab oo xushay amaba dhexqaadka silingga musbaarka ku maran. Maxay sameeyaan biinankii ku dhegsanaa musbaarka marka laba caaro ee silingga laga qaado cidhifkooda dhagaxa bitijoorka? Biinankii weli ma ku dhegsa nyihiin musbaarka?

### **Gunta Tijaabada :**


Tijaabadani waxay inoo muujinaysaa in mar alla marka ay joogsato qulqulka danabka ee silingga ku maran musbaarka xulaysaa ama dhex qaadeysa ay birlabni mada musbaarku baaba'ayso oo biinankii ay musbaarka ka daadanayaan.

Sidaas awgeed waxa aynu odhan karaa musbaarku waxa uu birlab yahay inta danabku uu xulayo amaba dhex qaadayo silingga ku maran. Mar allaale markii qulqulka danab joogsato, musbaarku wuxuu waayaa birlabnimadiisa. Sidaas awgeed waxa aynu odhan karaa:-

Birlab-danabtu birlabnimadeedu waa ay baaba'daa mar alla marka uu joogsado danab xulaaya amaba dhex-qaadaya silingga ku maran wasladda xaddiidka amaba xaddiid-labka ah. Birlab-danabtu ma aha mid waarta.

### **Waxtarka Birlab-danabka.**

Birlabaha-danabku inkastoo ay yihiin kuwo aan birlabnimadeedu waarin, waxa ay leeyihiin waxtar badan.



- 1) Birlabaha danabka ee xoogga weyn leh waxa kor loogu qaadaa waxyaalaha culus, iyo gaadiid ka de-jinta iyo gaadiid saaridda ururada waaweyn ee waslada-ha xaddiidka ah.
- 2) Alaabta danabka ku shaqaysa in badan oo ka mid ah ayaa adeegsata birlab-danab oo yaryar, waxaa ka mid ah dawanka danabka iyo kombiyuutarrada. Heerka waxbarashadan ku xiga ayaad faah-faahin ka baran doontaa.

## CUTUBKA: MALLUUG — BAADH

### HORDHAC

Malluug — Baadh:

Barashada Sayniseed ee la xidhiidka walxaha xered-yada waxa la yidhaahdaa Muluug baadh. Aqoonta Muluug baadh way jirtay ilaa iyo beryo aad u fog oon taariikhda si cad loogu haynin. Marley base cilmiga Muluug baadhku wuxuu la bilowday dhacdooyinka uu dadku weligiisba arki jiray sida:

- 1) Cadceedda aroor walba geesta bari ka soo baxda Galbeedna u dhacda.
- 2) Dayaxa habeenkii iftiinsha iyo wejiyadiisa is doordoorsha.
- 3) Cadceedaha iyo walxaha cireyada kale habeenkii cirka inooga muuqda, iwm.

Muluug-Baadhku wuxu noqon karaa laamaha Sayniska kan ugu da'da weyn. Dadkii hore waxay ku daaali jireen in ay aqoon ku filan ka helaan walax Cireedyada dhexmaaxanaya Samada. Haddaba, maadaama, qaruumihii hore ay tacliintu ku yarayd qalabkooda tijabbintuna liitay, si hufan u may aqoon Muluug Badhka.

Uunkaba siyaabo aad u kala geddisan ayey dadkii hore wax uga sheegi jireen. Tusaale ahaan:

- 1) Masaaridii hore waxay rumaysnaayeeh in uu uunku sida baaquli dalkooda ku gainbiyaan u egyahay oo ay deggan yihin xudunta uunka buurá dhaadheerina ay ku xeeran yihin.
- 2) Hindida waxay la ahayd in uu dhulku godan yahay oo ay afar maroodi sidaan. Afarta maroodina ku dultaagan yihin diin ceelaad. Wuxa kale oo ay moodi jireen in uu cirkü toobin yahay dalkoodana ku giblan.

Sida labada tusaale ayey qaroon waliba u iahayd sheekeeyin ku saabsan samayska Uunka. Dhulka maxaa haya bay Soomaalidii hore odhan jireen? Maxaase ka jira oo ka run ah warkaas? Maxaadse ku beeninaysaa ee kuu marag noqon kara?

## 2) SIDA AY SAYNISYAHANNADU U KOBKIYEEN AQOONTA MUULKA BAADH.

Dhaqdhaqaqa ay sameeyeen waixaha cireedyadu waxay daah fur u noqotay in aynu garano qorraxda iyo walxaha la xidhiidha (hab qorraxeedka). Culimadii bilawday barashada hab qorraxeedka waxa ka mid ahaa:

- 1) «Toolami» oo Giriig u dhashay noolaana jiray qarnigii labaad wuxuu rumaysnaa in uu dhulku taagan yahay oo ay qorraxdu ku wareegayso. Aragtidaas Toolami waa la garowsaday markii hore waxana la adeegsan jiray muddo kun sano ka badan. Aragtidan oo loo yaqaanay «dhul xuudineed» waxay sheegi wayooy iogna-naha u dhxeeyaa walxaha hab qorraxeedka. Kadduna waa la tuuray.

- 2) Kobernikus (1473-1543) oo reer Boolaand ahaa waxuu soo jeediyeey aragti (qorraxeed) ka hufan middii

Toolami (dhul xudduneed) Kobernikus wuxuu rumays-naa.

- b) In dhulka iyo walxaha kale ee hab qorraxeedku-ba ay ku wareegaystaan Cadceedda oo xuddun uah
- t) Dhulku wuxuu ku wareegaa udub dhexaadkiisa waxaana ka dhasha habeenka iyo dharaarta.
- j) In uu dhulku ku wareego qorraxda kana dha-shaan xilliyada sannadku. Aragtidaas Kober-nikus degdeg looma qaadan sababtuna waxay ahayd iyadoon la fahmin.

3) Galillo-Galiili (1564-1642) oo talyaani ahaa wuxuu sameeyey qalabka cirka lagu fiiryo ee diiradda loo yaqaan. Galiilo wuxuu diiraddiisii ku daawaday walxo Cireedyo badan sida dayaxa iyo «Xiddigta» waaberi. Kadibna wuxuu ayiday aragtidi Kobernikas. Hase yeesh ee culumadii may raacin.

4) Tayko Bereh (1564-1642). Wuxuu sameeyey qalab dhowr nooc ah oo lagu eego joogga iyo meelaha wal-xaha Cireedyada. Bereh wuxuu ururiyey jibayto fara-badan oo waayihii dambe si wanaagsan u gargaartay aragtidi Kobernikas.


5) Bereh markii uu dhintay waxa hawshii halkeedii ka sii waday ardaygiisii la odhan jiray Keclar (1571-1630). Keclar xisaabta ayuu si fiican u yaqaanay. In-kasta oo uu la dhib-mutay haddana Keclar wuxuu go'-aanno waaweyn ka soo saaray qoraalladii macalinkiisu Ururiyey. Go'aannada Keclar waxay ku kooban yihiin saddex xeer oo aynu baran-doonno, haddase bal fiiri era-yadan :

- b) Meere ; Waa walax cireed weyn oon iskxd u

's kana wargeysa qorraxda, waxaana  
bulka.


ay walax cireedyadu ma-  
aysanaya walax cireed

hu waa goo-




Waxa isweydiin leh, sidee baad u samayn lahayd goobo qabaal? Bal hadda warqad cad miiska ku dul dheji soona qaado qalin, laba biin ama laba irbadood iyo

gabal yar oo dun adag ah. Labada biin ku qotomi war-qadda ayaga oo woxoogaa isu jira. Duntii oo aad labadeeda caaro isku gunuday dulgalii labada biin. Qalinka caaraddiisa waxaad sudhaa dunta, ku giiji, deedna waxaad wareejisaa qalinka (fiiri jaantuska) Ku celceli ti-jaabandan adoo hadba beddelaya inta ay labada biin isu jiraan. Xarriiqda xoodan ee xaashida ku dulsawirmaa waa goobo qabaal.



Xeerka Labaad: Meerayaashu bad isle'eg ayey soc-daan muddo isle'eg.



$B \text{ badka } B = \text{ Badka } T$

$a \text{ aminta } b = a \text{ aminta } t$

$\text{Bedka } B = \text{ bedka } t$

$\text{Aminta } b = \text{ aminta } t$

Xeerka Saddexaad: Laba jibaarka aminta ee hal wareeg oo meeruhu sameeyaa waxay Saami gal toos ah u tahay saddex jibaarka celceliska foganta uu meeruhu u jiro qorraxda.

$$\frac{r^3}{t^2} = \text{ma doorsoome}$$

Marka  $V$  = Celceliska foganta u dhaxeysa meeraha iyo qorraxda.

$T$  = Aminta uu meeruhu sameeyo hal wareeg.

## L A Y L I :

- 1) Waa maxay walxa - cireedyadu?
- 2) Qor magacyada dhawr walax cireed.
- 3) Muluug-baadhka maxaa lagu bartaa?
- 4) Kiddigisku ma Saynisbaa?
- 5) Cilmiga muluugbaadhku goorma ayuu bilowday?
- 6) Muxuu ka koobmaa hab qorraxeedku?
- 7) Maxay sheegaysaa aragtida qorrax-xuduneedku?
- 8) Yaa abaabulay aragtida qorrax-xuduneedka?  
Maxayse ka hadlaysaa?
- 9) Sideebuu Keclar ku gaadhay xeerkiiisa?

## HAB QORRAXEEDKA IYO HAB XIDDIGEEDKA

Badnaaba walxa cireedyada oo idil waxaynu u naqaanaa xiddigo, dayax mooyaane. Hase ahaatee xagga Sayniska muluug-baadhka markii laga hadlayo, walxa cireedyadu way badan yihiin kalana duwan yihiin. Qaarkood waa neefo isku urursan oo gubanaya oo ilays iyo kulna bixinaya waxana lagu magacaabaa «Xiddigo» ama cadceedo waxaana ka mid ah Qorraxda. Walxa Cireedyada qaarkood waa adke qaboobay ilays iyo kulna ma leh, waxayna ku wareegeystaan xiddigaha. Kuwa noocaas ah waxa la yidhaahdaa meerayaal, dhulka ayaana ka mid ah. Walxaha kale ee samada ka muuqda waxa ka mid ah kuwo adka ah oo aan ilays iyo kul toona lahayn kuna wareegaysta meerayaasha. Kuwaasna waxa ka mid ah dayaxa. Walxa Cireedyadu intaa kuma koobna ee kuwa kale-ayaa jira oo aannu baran doono.

Meerayaasha iyo xiddiguhuba waxay raacaan han-naan aad u nufan oo ay u habaysan yihii. Hannaanka ay meerayaashu raacaan ee ay qorrax ku wareegeys-caan waxa la yidhaahdaa «Habqorraxeed», Dhulku wuu ka mid yahay meerayaasha hab qorraxeedkeena. Vaxa aad ogaataa in aanu hab qorraxeedku ka koob-ayn xiddig iyo meerayaasheeda oo kali ah ee ay walxa kale weheliyaan.

Qorraxaha qaarkood ma laha meerayaal. Hannaanka isku xidha qorraxaha fara badan, meerayaal ha la haadeen amase yay lahaanine, waxa la yidhaahdaa «Hab Xiddigeed». Walxa cireedyadu aad bay u kala du-rugsan yihii. Fogaanaha u dhexeeya walxa cireedyada waxa lagu cabbiraa halbeeg «Sano if» la yidhaahdo hal sano if waa fogaanta uu ilaysku socdo muddo hal sano ah. Waxaynu ognahay in xawaaraha ilayska ee ha-wada dhexdeeda yahay  $300,000$  Km/Sek. Haddaba: Hal Sano if =  $300,000$  Km.  $\times$  365 mal  $\times$  24 saac

$$\begin{array}{r}
 \text{Sek} \quad \text{Sano} \quad \text{maal} \\
 \times 60 \text{ daq} \times 60 \text{ Sek} = \\
 \hline
 \text{Saac} \quad \text{daq} \\
 = 9.5 \times 10^{12} \text{ Km}
 \end{array}$$

Dhulka iyo qorraxdu waxay jiraan  $1.5 \times 10^8$  Km u beddel sano ifyo? Xiddigta inoogu dhaw ee aan qor-raxda ahayn waxay inoo jirtaa  $4 \times 10^{10}$  Km. Waa imisa sano if fogaantaasi?

1) Haddii uu xawaaraha ilaysku  $3 \times 10^5$  Km yahay

Sek  
muddo intee dhan ayay ilayska ku qaadatáa in uu qorra:

da iyo dhulka u kala socdo? Haddii aad garan weydo jawaabta, isle'egtan adeegso.

Muddo = Fogaan

Xawaare

2) Imisa saacadood ayey ku qaadataa ilayska inuu kaga yimaado xiddigtaa inoogu dhaw.

### HAB QORRAXEEDKA

Cadceedda iyo meerayaasheeda waxa laysku yidhaahdaa Habqorraxeed. Cadceeduna waxay leedahay ugu yaraan sagaal Meere oo dhulku ka mid yahay. Meera-yaasha qaarkood cadceedda way inooga dhaw yihin. Walxaha hab qorraxeedka iyo cadceedda waxa isku haya xoog is jiidasha ah. Xooggaasi wuxuu ka dhashaa Cufafka walxaha. Haddii aad dhagax sare u tuurto mud-do ka dib dhulka ayuu ku soo dhacaa. Maxaa ugu wa-can? Ma dhulka ayaa soo jiitay? Haddaba, xooggaas wax kasta oo sare loo tuuraba ku soo celiya dhulka mid la jaad ah ayaa isku haya walxaha hab qorraxeedka. Xoogga Cufisjiidadku wuxuu walxaha hab qorraxeedka u diidaa in ay ka baxaan majiirayaashooda.

### SIDEEBUU U SAMAYSMAA HAB QORRAXEEDKU?

Su'aashan jawaabteedu aad bay u adag tahay, maxaa yeelay qofna ma noolayn markii hab qorraxeedku dhismayey. Hase ahaatee malayaal badan ayey Culumada Saynisku soo jeediyeen. Siday adiga kula tahay inuu hab qorraxeedku u dhismay? Aara'ada kala duwan ee saynis yahannadu soo jeediyeen waxa ugu fiican tan soo socota oo la abaabulay 1945:

Ugu horrayntii waxa jiray neefo iyo Siigo Saxaro ah oo ku baahsan dulalaati aad iyo aad u balaadhan. Saxaradii iyo neefihiiba isku ururay ka dibna abuuray qorraxda. Isku Ururkaasi wuxuu dhaliyey kul laxaad weyn oo qorraxda guba. Saxarada iyo neefaha intii ka soo badhay baa deedna ururay oo dhaliyey meerayaasha.

### MUXUU KA KOOBMAA HAB QORRAXEEDKU?

Hab qorraxeedka walxaha sameeya waxa ka mid ah (.) Qorraxda: qorraxdu waxay dhaacdaa xuddun dhexaadka hab qorraxeedka. Sida xiddigaha kaleba qorraxdu waxay ka samaysan tahay neefo isku Cufan, maalaasan, aad u kulul oo holcaya. Heerkulka qorraxdu aad buu u sareeyaa dhuuxeedana heerkulkiiisu waa ilaa 15 malyuun darajo Kaalfin ( $1.5 \times 10^7$  °K) galaka sare ee qorraxdu sidaa uma sii kulula heerkulkiiisuna waa ilaa 6000 K°.

Qorraxdu iskeed ayey ugu wareegeysataa Udub dhexaadkeeda. Gibilka qorraxda waxa ku samaysma baro madmadow oo loo yaqaan bar-qorraxeedyo. Barqorraxeedyadu way ka heerkul yaryhiin gibalka intiisa kale. Bar-qorraxeedyada qaarkood waxay leeyihiiin dhexroor 30,000 ilaa 50,000 Km ah. Markii ay jiraan bar-qorraxeedyo waxa lagu arki karaa Diirad yar (Xasuusnow in aan indha qaawan lagu eegin qorraxda waayo?).

Qorraxdu waxay soo butaacdaa duufaano waaweyn oo saxaro saldanabeysan ah. Nasiib wanaagse butaacoo-yinkaas waxa inaga daaha atmosfiyeerka ku shaqalan dhulka. Waxa kale oo qorraxda ka dhexdhaca qorraxyo laxaad weyn oo keena inay qorraxdu bixiso olol cad oo dheer oo gaadha boqolaal kun oo Kiloomitir. Qorraxyadan iyo bar-qorraxeedyaduba waxay dhaliyaan tashwiishka raadiyaha taasi awgeedna waxyeelo ayey ku

keenaan war isgaarsiinta raadiyaha iyo tilifoonka ee meelaha kala fog.

Lama tirin karo waxtarka iyo faa'iidooyinka qorraxda, waxase lagama maarmaan ah in aanu ka sheegno saddex meelood oo Keliya.

b) Qorraxdu waa il ay ka soo baxdo tamarta aynu adeegsanaa. Tamarta qorraxda waxaynu u helnaa s toos ah ama si dadban; ilayska iyo kulkuba waa Tamara ma huraan u ah nolosha waxayna toos uga yimaadaan qorraxda. Cuntooyinka aynu dhirta iyo nafleeyda kale ka helnaa waxa u sal ah qorraxda. Tusaale ahaan dhir tu waxay tamarta ka qaadataa qorraxda dhirtana xool ayaa daaqa. (ama dadkaa midho ka gurta), dabadeedn xoolihii ayeynu qalanaa oo hilikooda cunnaa si uu jidl keennu u manaaafcaadsado.

Tusaale kale badroolka ay gaadiidka iyo warshadu huba ku shaqeeyaan wuxuu ka samaysmay nafleey duugantay oo kumaan kun sanadood ka hor noolaan jiray oo tamartii qorraxdana hor u qaatay.

- 1) Ma sheegi kartaa sida tamarta muruqyadeennu ay ugu xidhan tahay tamarta qorraxda?
- 2) Tamarta qorraxda iyo maxaa ka dhexeeya;
  - (b) roobka (t) dabaylahaa.

t.) Qorraxdu waa tan haya hab qorraxeedka Idiy' kiisba. Cufka weyn ee qorraxda waxa ka dhasha xoogga cufisiididka ee ay la leedahay walxaha kale ee hab qorraxeedka. Cufisiidka qorraxda la'aantiis dhulku tsaale ahaan, majiirahiisa ayuu ka bixi lahaa. Ka diburbur iyo baaba'a ayaa xigi lahaa.


## 1) Maxaa Dayaxa ku haya majiirihiisa?

j) Qorraxdu waxay ka mid tahay xiddigaha badan ee uunka dhex maaxa. Dadku wuxuu rabaa in uu wax ka ogaado Uunka sidii uu ku bilowday iyo wuxuu ku dambayndoono. Haddaba qorraxdu waa xiddigta inoogu dhow ee aqoonta aynu ka korodhsanaa ina fahansiuun karto xiddigaha iyo Uunka intiisa kaleba.

### SIDEE BAY QORRAXDU TAMARTA U DHALISAA?

Waxaynu soo sheegnay in ay qorraxdu neefo kulul oo holcaya ka samaysan tahay. Xoogga weyn ee Cufis jiidadka ayaan u sabab ah inay qorraxdu isku kuusanto neefafeeduna is cidhiidhayaan isna cadaadiyaan deedna ay neefuhu holcaan.

Neefta qorraxda inteeda badani ka samaysan tahay waa haydroojiin. Haydaroojiinta ku jirta qorraxda dhuxeeda waxa ku dhaca falgal bu'eend. Afar atom haydaroojiin ah ayaan bu'doodu isku biirtaa si ay u abuuraan halatom oo hilyam ah. Marka uu falgalku dhacayo waxa ka soo dhex baxa tamar lexaad weyn oo kul iyo ilys u badan. Falgalkani wuxu marka hore u baahan yahay cadaadis iyo kul, labadabana qorraxda waxa siiya Cufis jiidadkeeda. Fiiri isle'egga falgalka.



Falgalka noocaasi ah waxa la yidhaahdaa «Isku dheg Bu'eed»

Waxa kale oo isna jira falgal bu'eend oo ay qorraxdu amar ku bixiso. Markan neefta hilyam oo ayana qor-

raxda ku badan ayey bu'da atomyadeedu u kala jabaan. Hal atom oo hilyam ahi hadduu kala jabo waxa ka soo baxa afar atom oo haydarajiin ah iyo tamar badan. Is'egta falgalka waa:

(He) Kul 4(H) + Tamar cadaadis falgalka noo-  
caasi ahna waxa la yidhaahdaa «Dhambalan bu'eed».

### GOORMA AYAY TAMARTA QORRAXDU DHAMAAN DOONTAA

Mar haddii qorraxdu ka samaysan tahay neefo gubanya waa suurtagal inay dhammaato ka dibna bakhtido. Culumada Saynisku waxay rumaysan yihiin in ay qorraxdu weli da'yar tahay oo ay sii shidmi doonto malaayiin sandood oo soo fool leh.

#### L A Y L I


Haddii ay qorraxdu bakhtido :

- b) Dayaxu ma iftiimi doonaa?
- t) May socon dabayluhu?
- j) Oo roobku muu di'i?
- x) Diirimaad miyuu jiri?
- kh) Dadku siduu u noolaan?
- d) Jirinayso duunyee dabadeed maxaa dhaci

#### 2) MÉERAYAASHA

Meere waa walax cireed majira ku leh xiddig hareeraheeda. meere iyo xiddigi meelaha ay ku kala duwan yihiin waxa ka mid ah;

- b) Meere waa adke xerkagsan oo qabow sida (Dhulka), xiddigtuse waa neefo kulul oo gubanaya heer-kulkeeduna aad u sareeyo sida (qorraxda).
- t) Meere iskii uma laha ilays ee xiddigta ayaa kul iyo ilaysba bixisa, meeruhuna iyada ayuu ka ergistaa.
- j) Meeruhu xiddigta ayuu ku wareegeystaa.
- x) Meere waa yaryahay markii xiddig loo fiirsho.
- kh) Xiddigaha ilayskoodu wuu bigbigleeyaa waxaana ugu wacan fogaantooda. Ilayska uu meeruhu soo no-qodsiyaa waa joogto dhawaantiisa awgeed. Hore waxaynu u soo baranay qorraxda oo ah xuddunta hab qorraxeedkeena. Waxaynu soo sheegnay in qorraxda lagu weheliyo hab qorraxeedka. Walxa cireedyada wehliyana waxa ugu muhiimsan meerayaasha. Tirada guud ee meerayaasha ilaa hadda (1978) la ogyahay waa toban, sagaal ka mid ahna si fiican baa loo yaqaanaa. Casharada soo socda waxaynu ku baranaynaa sagaalka meere ee u taxan sida ay qorraxda u kala xigaan.



**CIRJIIDH:** Cirjiidhku waa kan ugu yar sagaalka meere, dhexroorkiisuna waa ilaa 4800 Km. Cirjiidhku

vaa kan ugu dhow qorraxda wuxuuna si fiican u muuqan karaa bilaha Febraayo iyo Maarso oo uu fiidka hore galbeed ka soo baxa. Bisha Oktoobar cirjiidhku wuxuu ka muuqan karaa geesta bari cadceed soo baxa hortii. Cirjiidhku si wanaagsan co cad ayuu u ifaa, ma isagaa ifkaas iska leh?

Meerahani, 88 maalmood ayey ku qaadataa inuu udub-dhexaadkiisa majarihiisa hal wareeg ku sameeyo. Soccdka ay qorraxda ku wareegaan ka sokow meerayaashu waqay leeyihiin socod winooneed udub dhexaadkooda ay ku wareegaan. Socodka winiintu waxa ka dhasha habbeenka iyo maalinta.

Haddaba Cirjiidka, sidii socod wareegaba waa 88 maalmood inta uu hal wareeg udub dhexaadkiisa ku sameeyo. Qorraxda uu ku dhowyahay awgeed heerkulka cirjiidhku aad buu u sarreyyaa waxaanu gaadhaa 400c° geestii: qorraxda ku jeedda.

#### MAQALO XIDH

Maqalo xidh waa meeraha labaad ee qorraxda u xiga isla markaana waa meeraha ugu dhow dhulka, Maqalo xidh dhextroorkiisu waa 12,000 Km. Meerahani 224 maalmood ayuu ku dhamaystiraa majiirahiisa.

Maqalo xidh waxaad ku arki kartaa geesta galbeed isaga oo aad u widhwidhaya waxa kale oo aad ogaata, inuu meerahani geesta barina ka soo baxo Cadceed so baxa hortii. Markan waxa loo yaqaanaa «Xiddigta waa beri» — runtiise ma xiddigbaa?

Maqalo xidh iyo cirjiidhka waxa lagu kala soocaa dhalaalkooda. Meerayaasha oo dhan maqalo xidh baa uga cad. Waxaan ugu wacan isaga oo atmosfijer iyo laruuro leh.

## D H U L K A

Meeraha saddexaad ee qorraxda u xiga waa dhuuka aynu ku noolahay. Hore waxaynu u soo baranay inay qorraxdu inoo jirto 150 malyuun oo Km. Dhulku hal jeer qorraxda 365 kii maalmoodba (hal sano) muddo 24 saacaacood ahna (Maalin) hal mar ayuu udub dinexaadkiisa ku wareegaa.

Heerkulka dhulka dushiisu inteebuu gaadhaa? Meela heedaa kuwee ugu kulul kuwee baase ugu qabow? Socod-yada wareegga iyo winiiniga ee dhulka maxaa ka dhasha?

Dhulku wuxuu leeyahay atomsfiyeer iyo dhammaan xubnaha ma horaanka u ah nolosha. Sidaasi awgeed dhulku waa meeraha keliya ee ilaa hadda ay nolol dhaba-hi jirto.

### DHULKU MUXUU KA SAMAYSAN YAHAY?

Dhulku waa cuf lixaad weyn oo dhiegax, carro, biyc iyo neefo ka kooban. Inkasta oo uu dhulku kubad u egyahay haddana badhtanka ayuu u dhumiic weyn yahay, dhexroorkiisuna waa 12680 Km. Cidhifyada dhulku waa siman yihiin inkasta oo uu dhulku bannaano waa-weyn leeyahay haddana Oogadiisu waxa ka mudhan buuro, dooxoovinba iyo laago dhaadheerba way leeyi-joggedu 9 Km ku dhow yahay. Badaha guntoodu buuro, dooxooyinba iyo laago dhaadheerba way leeyi-hiin.

Qaaxada hoose ee dhulka aad ayey u kulushahay waxaana la filaya inuu heerkulkeedu ilaa 3000°c gaadho. Sidaas awgeedna dhulka guntiisu way dhalaashan tahay.

Qaraxa fulkaanuhu waa maxay? Meelo dalkeena ah oo ilo biyo kulul leh ma taqaan? Maxaa diirshay biyahaa?

Saddex afreed (75%) dhulka oogadiisu waa biyo, Biyaha badankoodu waxay ku jiraan badweynada, bada-ha iyo webiyaasha qulqula.

Biyaha hoostooda waxa ku nool xayawaan iyo dhir ka fara badan kuwaa bariga. sida bariga ayaa badaha salkoodana laga qotaa macaadin iyo shidaal kaleba.

Dhulka waxa ku giblan atmisiyeer ka koobma lakab oo hawooyin is dulsaaran ah. Atmosfiyeerku wuxuu inaga celiyaa falaadhaha halista ah ee qorraxdu soo ganto, oo kul iyo ilaysba leh.

Hawada inagu xeerani 78% waa naytrojiin 20% waa ogsijiin, inta kalena waa kaarboon laba ogsaydh, hawoo-yin kale iyo uumi biyood.

### DAYAXA DHULKA

Dayaxu waa walax-cireed ku lammaan kuna wareeg-ey-sata dhulka. Dayaxu meere ma aha. Dhumucda dhulku waa 3460 Km, dhulkana waxa uu u jiraa 384,000 Km. Daxayu waxa uu leeyahay socod-wareeg iyo socod-

1  
winiin. Muddo 27 — maalmood ah ayey dayaxa ku qaa-  
3

dataa in uu hal mar dhulka ku soo wareego. Isla mud-  
1  
dadaasi 27 — maalmood ah ayuu dayaxu isku winiiniyaa.  
3

Halkaa waxa inooga caddaanaya in hal maalin-dayaxeed

1

(hal winiin), iyo 27 — maalmood oo dhulka ahi ay isle'ig  
3

yihiiin. Marka uu dayaxa dhammeysto halkii wareegba,  
isla haddana ma soo baxo ee laba maalmood ayuu maq-

1

naadaa. Taasi awgeed, hal bil waa 29 — maalmood.

2

### WEJIYADA DAYAXA:

Dayax «Cusub» oo bil loo yaqaanaa waxa uu ka dhashaa geesta galbeed. Galabta uu dhasho dayaxu wuu yar yahay. Marka ay qorraxdu dhacdana muddo gaa-ban ayuu ka dambeeyaa dabadeedna wuu dhaccaa. Maalin labaad, dayaxu waxa uu ka muuqdaa heer ka sarreeya halkii uu shalay ka soo baxay isaga oo yar weynaaday. Maalinba maalinta ka dambeysa ayuu heerka dayaxu sare u soo raacaa cirka, waaxdiisa inoo muuqataana sii korodhää ilaa uu bari tago.

Dayaxu waxa uu u weyn yahay uguna cad yahay habeennada 13aad, 14aad iyo 15aad, (Siiba 14aad ka). Dayaxa 14aad ka ihi isla marka cadceeddu dhaceysyo ayuu isna bari ka soo baxaa, isaga oo giraan idil ah.

Wejiga dayaxu habeennada danbe wuu sii yaraadaa, goorta uu soo baxaayana wey sii dib dhacdaa. Habeenka 28aad, dayaxa iyo qorraxdu isku mar ayey soo baxaan, habeenka xigana, ma soo baxo dayaxu Intaasi ka dib,

1

(29 — maalmood), bil ama dayax cusub ayaa galbeed ka

2

dhasha.

Is-beddelka ku dhacaya wejiyada dayaxu wuxuu heegayaa in uu dayaxu kubadeysan yahay. Dayaxi ays ma laha, ee ka qorraxda ayuu noqodsiyaa. Weji a qorraxda ku jeeda ee dayaxa aad buu u kulul yahay heerkulkiisuna waxa uu gaadhaa 100°C — Ma taqaan heerkul ay biyo ku karkaraan? Wejiyada dayaxa ee qorraxda ka jeedana aad buu u qabow yahay (— 150°C).

Dadweynaha adduunku waligiiba waxa uu ku taami jiray in dayaxa, qorraxda iyo xiddigaha kalaba wax ka ogaado. Sheekoojin badan baa, hadba, dayaxa lagaga warami jiray. Waxa kuweena ka mid ahaa Geedka dayaxa. Adiga ma kula tahay in dayaxa guudkiisa uu geed ku yaalo? Nololi ma jirto dayaxa guudkiisa. Waxa inooga muuqda dayaxu waa buuro, dhagaxyo iyo dooxyo aad u waaweyn. Buuraha dayaxu waxa ay u badan yihiin kuwo ka samaysmay fulkaano.

Dayaxu waxa uu ahaa walax-cireedkii ugu horreeyey ee qof dhuulka ka tegey uu isku taagay. Goorma ayuu qofkaasi dayaxa gaachay? Dalkeebaa laga diray? Muxuu sii raacay? Ma ka soo laabtay?

## L A Y L I

- 1) Sidee buu u dhacaa dayaxa — madoobaadku?
- 2) Sidee ayuu u dhacaa qorrax — madoobaadku?
- 3) Had iyo jeer weji keliya ayaynu dayaxa ka aragnaa, oo ina soo eega. Waayo? (Kaasho se cod-Winiiniga dayaxa?)
- 4) Dayaxu meere miyuu yahay ?
- 5) Dayaxu meere miyuu leeyahay ?

#### 4. SALAX — CAD

Meeraha saxal-cad waa ka dhulka xiga marka xagga qorraxda laga sco fiirsho. Meeruhu waxa uu leeyahay:

- b) Socod-wareeg = 687 maalmood.
- t) Socod-winiin = 24 saac, 37 daqiiqo.
- j) Heerkulka usarreeya = 30°c.
- Dnexroorka = 6700 Km.
- x) Heerkulka u hooseeya oo ilaa.— 70°c ah.
- kh) Fogaanta uu qorraxda u jiro = 226.4 malyuun kiloomitir.

Saxal — cad aad buu u ifaa marka uu muuqdo. Midab dhalaal badan oo yara guduudan ayuu leeyahay, waana sababta loogu magacaabo xiddigta cas.

Saxal-cad waxa uu leeyahay atamosfeerka ka dhulka shaabe ha. Baryihii hore, culimada saynisku waxa ay rumaysnaayeen in ay nololi jiri karto saxal-cad du-shiisa. Hase ahaatee, dayax-gacmeed ku degey meeraha dushiisu (1976), kuma uu arkin astaamo nololeed mee-shaasi, walise baadhitaanku wuu socdaa.

#### 5. SAXAL — GUDUUD,

Meerahani waa ka ugu weyn meerayaasha oo dhan. Xataa wuxuu ka xajmi weyn yahay meerayaasha kale haddii la isku daro dhammaantood.

Dhexroorkiisu waa 141,920 Km. qorraxdana waxa uu u jiraa 773,280,000 Km. Amminta uu wareegaana waa 11 sanadood iyo 9 bilood. laakin amminta winiinigu waa 9 saacadood iyo 53 daqiiqadood. Heerkulkiisu waa 140°c.

## 6. NABTUUN.

Meeraha lixaad ee hab-qorraxeedka waxa la yidhaahdaa Nabtuun. Meerahan lama arki karo dii rad la'aan. Midab cagaaran ayuu meeruhu leeyahay. Dhexroorkiisu waa 52,800 Km, qorraxdaana waxa uu u jiraa 4,468,800,000 Km. Hal jeer ayuu qorraxda ku

3

wareegaa 163—kii sanadoodba. Muddo 15 saac 84 da-  
4

qiiqo ah ayuu hal jeer ku wareegaa udub-dhexaadkiisa, heerkultiisu aad buu u hooseeyaa, wuxuna dhan yahay ilaa 230°c. Nabtuun waxa uu leeyahay laba dayax.

## 7. B U L U T O

Meeraha ugu fog ee hab-qorraxeedku waa Buluuto. heerkulka meerahani aad iyo aad buu u hooseeyaa. Dhexroorkiisu waa 6,400 Km. Qorraxda waxa uu u jiraa 5,865,600,000 Km. Meeruhu waxa uu ku dhammeyaa maa jiirihiisa 248 sano.

## 8. S A A T E E N

Saateen waa meeraha ku xiga saxal-guduud. Dhexroorkiisu waa 120,000 km, qorraxdana waxa uu u jiraa, 1,417,760,000 Km. Wareegga majiiraha waxa uu ku qaa-

1

taa 29—sanadood, wininka udub-dhexaadkana waxa uu  
2

ku qaataa -0 saac 14 daqiqo. Heerkultiisa waxa lagu qa-  
daray 145°c.

Saateen waa meere diirad uun lagu arki karo. Mee-rahani waa ka ugu qurux badan, maxaa yeelay wuxuu leeyahay giraamo ku dul wareegsan. Giraamaha oo sad-dex kala horreeya ahi waxa ay ka samaysan yihiin neefo iyo boodh. Giraanta xagga meeraha ugu xigtaa waxa ay u jirtaa 12,000 Km. Saateen waxa kale oo uu leeyahay 9 duyax.

## 9. YURAANAS.

Yuraanas waxa la arkaa haddii diirad la adeegsado oo keliya. Marka la arko waxa uu u muuqdaa cagaar. Dhixroorkiisu waa 49,440 Km, qorraxdana waxa uu u jirra 2,952,000 Km. Muddo 84 sano ah ayuu meerahani hal wareeg ku sameeyaa qorraxda. Hal winiin waxa uu ku qaataa 10 saac 45 daqiqo. Heerkulkiisu aad buu u hooseeyaa oo waa ilaa 170°C. Yuruunas waxa shan dayax ayaa meeraha ku wareego.

## QAYBAHA KALE EE HAB-QORRAXEEDKA.

Qorraxda oo kaliyahay ma dhamays tiraan hab qorraxeedka. Qaybahaa kale ee hab qorraxeedka waxaa ka mid ah:

b) SEEFCIREEDYADA waxay ka mid yihiin walxa cireedyada samada sabeeya. Marmarka ay seefci-reed muuqato waxa la arkaa iftiin cad oo cirka 800 dhegan.

Seefcireeddu waxay leedahay dabo iyo madax. Madaxu wuxuu ka samaysan yahay dhagxaan, bataax iyo neefo qaboobay oo isku dhagey. Markii ay seef ci-reeddu ku soo dhowaato qorraxda ayey neefihii dhalaalaan iskuna rogaan gaas daba jiitama madaxeeda dherka qaacu wuxuu gaadhi karaa ilaa malaayiin kiilomitiir.

Dabada iyo madaxa seef cireeddu waxay soo celi-

yaan ilayska qorraxda ee iyagu ilays ma leh. Xajmiga iyo culayska seef-cereedku way yar yihiin.

Saxal-Guduud waxa ku gadaaman neefo iyo daruuro aad u fara badan. Marka diirad lagu fiirsho, waxa muuqata bar weyn oo dul sabeysa meeraha. Bartaasi waxa loo filayaa in ay tahay daruur.

Gaaliilo Gaaliiliyo ayaa ugu horreeyey qof diirad ku arka 'meerahan. Waxa kale, oo uu arkay Gaaliiliyo afar ka mid ah 12ka dayax ee meerahaasi leeyahay.

t) Waran Cireedyada: Gantaalaha Oloka ah ee habeenkii cirka mara waxa la yidhaahdaa:- Waran Cireedyo. Dadka qaar waxay waran cireedka moodaan «Xiddig» soo dhacday runtiise ma aha. Waran Cireedku waa dhagxaan iyo biro isku dhafan oo xawaare weyn cirka ku mara. Walxahaan yar yar iyo ku aad u weynba way leeyihiin.

Marka ay Waran cireedyadu soo galaan atomsfiyeer-ka dhulka waxay islis la yeeshaan hawada ka dibna iyaga oo gubanaya aye inoo muuqdaan. Waran cireedyada qaarkood ba a dhulka ku soo dhaca oo la arkaa laakiinse inta badani hawada aye ku dhex gubtaan.

#### XIDDIGAHA CIRKA.

Habeen aanu daruur iyo caad toona lahayn dayaxuna aanu soo bixin haddii aad cirka sare ueegto waxa aad aragtaa xiddigo tirobeelay oo samada ka widh widhaaya. Xiddiguuhu way kala waaweyn yihiin, kala if badan yihiin kalana cusub yihiin, xiddigaha buluugga ahi waa kuwa cusub, kuwa guduudanina waa kuwa gabobay. xiddigaha qaarkood waxa la filayaa in ay meerayaal leeyihiin taas awgeedna waxa dhici karta in ay nololi jirto hab qorraxeedyada fog. Waxa aynu ognahay inuu dhulku qorraxda iyo udub dhxeedkiisa labadaba ku wareegeys-

to. Winiiniga dhulka waxa ka dhasha xiddigaha oo inoogu muuqda in ay soo baxaan kadiibna dhacaan (Sida Cad ceedda). Wareegeysiga dhulka waxa ka dhasha in xiddigo kala duwani inoo muuqdaan xiliyo kala duwan. Xiliyada, Guga iyo Jiilaalka cirku ma isku xiddigaa?

Eegashada waxa laga dhigtaa jiho tuse iyo xila ilaa-liyo. Ma sheegi kartaa xiddig lagu garto jiho? Sideebay xiddiguuhu u sheegaan xiliyada?

Xiddigaha oo dhan lama wada adeegsado ee qaar ka mid ah ayaa la isl yaqaanaa waxana ka mid ah xiddigta qiblada. Waxa jira xiddigo koox koox u socda. Kooxda xiddigo wada socda ah, waxa la yidhaahdaa Urur. Dadkii hore waxay ururyada xiddigaha u bixin jireen magacyo u badan kuwa Xayawaan, Geesiyaal iyo Ilaalayo badan oo ay caabidi jireen. Ururada ay Soomaalidu adeegsato waxa ka mid ah:-

- b) Haltodobaad
- t) Sacaha
- j) Laxaha
- x) Nin la gigay (ama guray)

Ma taqaan sheekoojin la xidhiidha Ururadan.

#### HAB XIDDIGEEDYADA

Kiddigo iyo hab qorraxeedyo tira badan oo xidhiidh wadaaga ayaa la yidhaahdaa «Hab Xiddigeed». Tirada Walxa Cireedyada ka tirsan hab xiddigeed kaliyah ahi wax la sheegi karo way ka badan tahay. hab xiddigeedyada oo wada jira waxay sameeyaan Uunka.

Habeen gudcur ah haddii aad cirka oo saafi ah kor u eegto waxa laga yaabaa in aad arki doonto xariiq cad, balaadhan oo dheerna oo cirka gudban, waxaa cad ee aad waddada moodaa waa malaayiin iyo malaayiin qoraxood oo ka tirsan hab xiddigeedka aynu ku noolahay.

Hab xiddigeedkeenna waxa la yidhaahdaa «Habar Jii.d». Ma taqaan sheekada la yidhaahdo halkuu habaar qabe hooyadii jiiday.

Hab xiddigeedka Habar jiid balaadhkiisa waxa lagu qiyaasay 80,000 sano if oo leeg  $76 \times 10$  Km, qaradiisana 8,000 sano if oo leeg  $7,6 \times 10^4$  Km.

Hab qorraxeedkeenu kuma dhawa xudunta hab xiddigeedkeenu.

Hab xiddigeedyada kuwa ka mid ahi waxay leeyihin qaab ay u dhisan yihiin. Xubnaha hab xiddigeedkastaa waxay wadaagaan xoog cufis jiidad guud oo isku **haya**.

Culumada muulka baadhku waxay caddeeyeen **inay**, hab xiddigeedyadu kala ordayaan inkastaa oo hab **xiddigeed** walba uu gudihiisa iska haysto, taasoo marag ka ah Uunka fidayo.

### SIDEEBUU UUNKU U SAMEYSMAY

Uunku wuxuu ka koobmaa hab xiddigeedyada wali-giiba dadku wuxuu iska warsan jiray sidii uu Uunku u dhismay. Waxaynu halkan ku faalayn doonaa laba aragtiyood oo culumada. Saynisku ku eegayaan abuuritaankii Uunka. Inkasta oo muran weyni u dhexeeyo labada aragtiyood haddana labada waa la rumaysan yahay.

1) Qorax Weyn: Aragtidiini waxay rumaysan tahay in beryihii hore ay hab xiddigeedyada oo dhami neef malaasan oo hal kubad yar ah isku ahaayeen. Dabadeedna kubaddii ayaa Qarax weyni ka dhacay oo kala qabtay muddo labaatan bilyan oo sano laga joogo. Ka dibna neeftii ururiyo ayey samaysay halkaasoo hab xiddigeedyada iyo hab qorraxeedyduba ka dhashaan. Aragtidiini fidida uunka waxay u Aaninaysan qaraxii berigaas dhacay. Wax cusub oo Uunka ku soo biirayaa ma jiraan ayey aragtidiu leedahay.

2 — Xaaladda deggan: Aragtidani waxay qabtaa in aan goor uunku bilowday iyo goor uu dhammaan doonaba midna jirin. Markasta waxa samaysma hab xiddi geedyo cusub oo kuwii hore cidhiidhya dabadeedna ay kala ordaan, taas baana u sabab ah fidida uunka.

### SAHAMINTA CIRKA

Qalabka Sahanka: Cirka sare iyo uunka intiisa ka leba si waxa laga barto waxa la adeegsadaa qalab fara badan oo kala geddisan. Qalabka Cirka lagu sahamiyo waxa ka mid ah:-

#### I) Diirado.

Diiraduhu waa qalab lagu dhugto walxaha aad u durugsan. Waa laba nooc diiradaha ilayska ku shaqeeya. Nooca kowaad waxay leeyihiin dhalooyin bikaac tuuraya. Nooca labaad ee diiraduhu waxay leeyihiin muraayado golxale. Diiraduhu waxay soo dhoweeyaan walaxdii lagu fiirsho. Awooddana ay diiraduhu leeyihiin way kala geddisan yihiin.

#### 2) Kamarooyin

Walxa cireedyada samada yaacaya waa la sawiraa si loo eego samayska duleed ee walxaha.

#### 3) Diirad Kaaheed:

Diirad kaaheedku waa qalab u samaysan sida baaglii aad u balaadhan oo goobaaban. Qalabkani wuxuu ilaaliyaa oo uu qabtaana wixii war isgaarsiina ee u dheexeya dayax gacmeedyada cirka loo diro. Xiddigaha aad u fog waxa ku yimaada mowjado birlab danab. Mowjadahaa waxa qabta soona gaadhsiiya culumada sayniska diiradkaaheedyada.

### MAXAA LAGA RABAA SAHAMINTIISA.

Wax-ogaal-jeclaanta dadka ayaa ugu weyn halgan-

ka loogu jiro sahaminta cirka. Cilmi iyo cuudba waa la-  
ga rabaa baadhitaanka samada iyo walxa cireedyadaba.

Aadamigu wuxuu doonayaa inuu ogaado cirka sare  
wixii jira. Ma jirto nololi arladeena meel dibada ka ah?  
Sideebuu Uunku u Bilowday? Maxaase ku danbayn?

Dadka tiradiisu aad bay u korodhay waayahan dam-  
be. Manaafacaadka dhulkuse way isa sii dhimayaan  
gaar ahaan xagga macaadinta iyo tamarta shidaalka.  
Haddii macaadin iyó shidaal la wáayo warshadaha iyo  
qalabka wax soo saarkuba khatar iyo inay tiranto ayey  
ku dhawaaniaysaa. Haddaba cirka waa halka kale ee  
aynu kaalmo u raadsan doono.

### ILAA HADDA HEERKEEBAA LAGA GAADHAY SAHAMINTA CIRKA

Abadkiisba Aadamigu wuxuu taamay in uu mar,  
goor kastaba ha noqotee, gaadhi doono himiladiisa ah cir-  
ka sare. Taasi waxa u marag ah sheekooyinka iyo ku-  
tubaha laga qoray cirka ee dadkii hore laga hayo.

Meesha ugu weyn ee lagu taamaa waxay ahayd  
dayaxa iyo sidii loo gaadhi lahaa.

Hirgalinta Cirsahamiska waa laga waday af iyo ad-  
dinba Tijaabooyinkii ugu horreeyey waxay ku bilowdeen  
buufsanayaal qalab sida oo neef haydarojiin ama hil-  
yam ku jiraan dabadeedna hawada lagu sii daayo. Buu-  
fsanayaashaasi waxay gaadhi jireen meela sare oon  
dhaafsanayn hawada atomsfiyeerka. Waxa kale oo ji-  
ray talooyin badan oo ay culumo soo jeedisay dayaxa iyo  
cirka sare.

Tijaabooyinkii kale ee la sameeyey waxa ka mid  
ahaa tan soo socota:-

Sanadkii 1500 ayaa nin Shiina ahaa wuxu sameeyey

Dayax gacmeed ka kooban kursi iyo todoba iyo arafthan gantaal oo baaruud ku shaqeeya kuna dhajisan kursiga. Wuxu rabay inuu dayax gacmeedkaasi gaadhsiiyo dayaxa. Ninkaas oo la odhan jiray Waan-Huu, intuu kursigii fadhistay ayuu qarxiyey 47kii gantaal si uu kursigu ula duulo. Qaraxii dabadiis meeshii waxa qariyey qaac iyo boodh ninkiina isla meeshaas ayuu ku dhintay.

Dayax gacmeedyada haatan la adeegsado waxa bilaabay nin Maraykan ahaa lana odhan jiray R. H. Goddard kuwii ugu horreeyey ee uu Goddard sameeyey waxay ku shaqaynaayeen batrool iyo ogsijiin isku dhafan. Sannadkii 1926kii ayuu Goddard diray dayax gacmeedkii ugu horreeyey oo gaadhad 60 Km.

Dagaalkii labaad ee adduunyada Jarmalka waxay soo saareen dayax gacmeedyo hubahaan loo adeegsado loona yaqaanay «V — 2». Dayax gacmeedyadan V-2 waxa lagu garaacay dalka Ingiriiska waxyeelo culusna way gaadhsiiyeen.

Beryahan dambe Ruushka ayaa u horreeyey cid dayaxa u dirta dayax gacmeed.

Tijaabadii u horresay ee hirgashay waxay ahayd 1959kii, dayax gacmeedkii la dirayna waxa la odhan jiray LUUNIK IAAD Isla sannadkaas ayuu LUUNIK III ku soo wareegay dayaxa soona sawiray dhinaca inaga qarsoon ee dayaxa.

#### DAYAX GACMEEDYADII AADAMIGA SIDAY.

Sbutnika II oo uu ruushku diray 1957 ayaa ugu harreeyey dayax gacmeed wax nool qaada. Wuxuu siday Eeygii lagu magacaabi jiray «Leyka». Leyka wuxuu dhintay intii uu cirka ku maqnaa.

Qof dayax gacmeed raaca waxa ugu horreeyey Gaashaanle «Uuri-Gagaariin» oo ruush u dhashay wa-

xaanu duulay Abriil 12kii 1961, hal ayuu dhulka ku wa-reegay ka dibna nabad qab ayuu ku soo laabtay.

Dhinaca Mareykanka, dayax gacmeedyadii dadka si-day waxay bilowdeen 1962, midkii ugu horreeyeyna waxa raacay Gaashaanle sare «Sheberd».

Tartan dheer ka dib, Dawladda Mareykanku waxay ku guuleysatay in ay xaqiijiso riyadii aadamiga markii ay dayax gacmeed dad la socdo ku dejisay dayaxa ooga-diisa, dayax gacmeedkaas waxa la odhan jiray «Aboollo II» Wuxaanu ku degay dayaxa bishii Luulyo 1968. Raad-kii u horreeyana waxa dayaxa saaray «Niil Armstrong» oo la socday Aboollo II.

#### DAYAX GACMEEDYO LOO DIRAY MEERAYAASHA

Tstartanka Dawladaha waaweyn dhexmaray ee saha-miska cirku kuma koobna dayax.

Ruushka iyo Mareykankuba dayax gacmeedyo ayey u direen meerayaasha. Wuxaase lama ilaawaan ah guu-shii labaad ee ay Maraykanku ka soo hooyeen sahamiska cirka. Taas oo ahayd markii ay dayax gacmeed aan dad la socon ay ku dejjiyeen meeraha saxal cad oogadiisa bi-shii Luulyo 1976kii. Dayax gacmeedkan waxa la odhan jiray «Fayking-2).

Sahaminta cirka waxa ku baxa lacag iyo tamar le-xaad leh waxase loogu hurayaa faa'iidada laga filayo oo ka qiimo iyo qaayaba weyn Maxay tahay faa'iidada la-ga heli doonaa?